Hadyad Jacayl

Daabacaaddii 2aad 2019

Cabdisamad Awdaahir Ismaaciil

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Madbacadda Hiil Press

Baahinta

DAL IYO DIBAD

hiilpress6@gmail.com

Cairo,Egypt

© Dhammaan Xuquuqda Kitaabkani Way dhawrantahay. Lama Daabici karo, lama sawiri karo, islamarkaana guud ahaan iyo qayb ahaan toona looma minguurinkaro, haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin Qoraaga Buugga

Daabacaaddii 1aad 2018

Wixii falcelin ah, faallo ama wax-ku-biirin ah ee buuggan ku saabsan waxa aad kala soo xidhiidhi kartaa Qoraaga : **sumcada@gmail.com**

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hibeyn

Buuggan, oo jacaylka nooc kasta oo uu yahay, si qoto-dheer ugu nuux nuuxsanaya, inta wax naawilaysa iyo inta nabdiga ku haysaba ay si laab furan ugu naaloon karaan, ayaa waxaan u hibeeyey dadkii jacaylka dhibta u soo maray iyo kuwa imika ugu jiraba. Waxaana dadkaas ugu horreeya Cilmi Ismaaciil Liibaan (Cilmi Boodhari) oo jirrabkii iyo jah-wareerkii uu jacaylka kala kulmay godka la jiifsaday. Inkastoo ay badan yihiin dadka jacaylka dhulka ula dhacay ee uu dhaawaca u geystay, ayaa haddana waxaa jira marka Cilmi laga yimaaddo, dad ma dhaafaan ah oo aan la hilmaami karin, waxaana ka mid ah: Cali-Maax iyo Cawrala' oo labadooduba jacaylka u dhintay. Qays iyo Layla oo iyagana jacaylku ula dhaadhacay aakhiro, Alle ha u naxariisto dhammaantood.

Waxaa kale oo aan u hibeeyey buuggan Abwaannada iyo Maanso-yahannada, oo waagii berya iyo qorraxdii dhacdaba dadka u gaalaa bixinayey jacaylka, kana tiraabayey marka dhacdo cusub oo jacayli timaaddo. Hawraarta iyo heesahaay tiriyeenna dadka inta la tabaaleysan ee uu jacaylku la taraaray iyo kuwa ku tanaadayba ay isku maaweelin jireen.
Sidoo kale, waxaan jecelahay inaan u hibeeyo walaalladayda jacaylka iyo kalgacalka walaalnimo naga dhexeeyo, kuwaasoo kala ah: Asma, Aasiya, Niciima, Cabdishakuur, Cawil iyo Nafiisa.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Tusmada Buugga

Hibeyn.....0
Tusmada Buugga 1
Mahad-Naq. 3
Hor-dhaca Buugga.....5
Qeexidda Jacaylka.....7
Hababka Uu Ku Gudbo Jacaylku. 19
Calaf 34
Keli ahaanshaha waxa ka fican wehel jaceyl 36
Siyaabaha Loo Dareemo Jacaylka..... 39
Sideed ku ogaan kartaa qof ku jecel.....51
Hababka La Isu Dareensiiyo Jacaylka.....52
Qofka jacaylka kuu sheegta qiimee.....65
Nabsiga 68
Barashada iyo Qoomamaha Jacaylka.....72
Jacaylka Iyo Xilliyadii Asxaabta. 75
Dhambaalka Iyo Jacaylka.....77
Gefka hayb-sooca looga galey guurka.....86
Jinku Ma Jeclaan Karaa Insiga?.....90
Maahmaahyo Ku Saabsan Jacaylka.....91
Waa Maxay Maalinta Jacaylka Adduunku (Valintine's Day).....92
Haasaawaha Iyo Dhallinyarada.....97
Suugaanta Jacaylka Iyo Dadkii Hore. 107
Qisadii jacayl ee Weerar bulxan iyo Mullaaxo.....108

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qisadii jacayl ee Wiil-Waal Iyo Raage Ugaas 114
Sheekooyinka Qosolka Iyo Lammaanaha 122
Qisooyinkii Dadkii Jacaylka Ku Caan Baxay 137
Cilmi iyo hodan 137
qays iyo leyla 149
cali-maax iyo cawrala 152
TIXRAAC iyo Xigasho: 162
Weedh Celinta Akhristayaasha 164

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Mahad-Naq.

Marka hore, waxaa mahad leh Ilaaha **Kariimka** ah ee koonkan uumay, anigana ifka igu kor yeelay, iguna karaameeyay diinta islaamka, iina kaamil yeelay lixda laxaadba, iguna ilhaamiyay inaan qoro oon allifo buuggan Had-yad jacayl.
Mar labaad, waxaa mahad leh waalidkay iyo dhammaan dadka igu taageeray, qayb libaaxna ka qaatay sidaan u noqon lahaa qof wax soo saar leh. Waxaanan si maamuus leh ugu mahad-celinayaa dhammaan dadkii wax ka gaystay buuggan ha yaraato ama ha badnaatee, kuwaasoo talo iyo tusaalaba i siiyey.

Dadkaana waxaa ka mid ah Qoraa **Siciid Maxamuud Gahayr (Hargeysaawi)** oo aan ku sharfayo doorkii uu ka qaatay tifaf-tirka iyo toosinta higgaadda buugga. Siciid waxa uu maalmo kooban ku gutay xilkii aan ka saaray qurxinta buugga. Eebbe ha milgeeyo.

Mudanka aan abaal-celinta u hayo waxa ka mid ah:
1) *Khadar Maxamed Xaashi.*
2) *Hinda cabdi sheikh.*
3) *Maxamed Aadan.*
4) *Axmed-Naasir Jaamac.*
5) *Dahabo Muxumed Geelle.*
6) *Cali Muxumed Geelle.*
7) *Cabdirashiid Ismaaciil Muxumed.*
8) *Axmed Ismaaciil Muxumed.*
9) *Xasan khaddar sh maxamuud*
10) *Amal maxamuud axmed*
11) *Cabdicasiis ibrahin ciise*
12) *Muhiim ismail wayab*
13) *Sacad maxamuud xaddi*
14) *Cabdifatax Ibrahim ciise*
15) *Ismaaciil cali ducaale*

Waxaan si gaara ugu mahad-naqayaa saddexdan hal-door :- **Abshir Askar Maxamed , Axmed Ali Garas (Ma qaloocshe)** iyo **Mawliid Maxamed Xaashi,** oo buuggan kaalin aan la hilmaami karin ka ciyaaray, kuwaas oo tala-bixinta, toosinta iyo turxaan bixintiisaba ku tuuntuunsaday. Igana taageeray siduu

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

buuggani u noqon lahaa mid dhammays-tiran oo dadka u tebin kara ujeeddooyinka uu xambaarsan yahay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hor-dhaca Buugga.

In muddo ahba waxaa igu lammaanaa dareen, kaas oo i lahaa *"Miyaa aad dadka u daah furtid buug kala-dhigaya, oo kala-dhambalaya, dhammaan sirta ku dhex-duugan jacaylka?"*. Anigoo markaa u kacay soo ururinta iyo isku dubaridka wax yaabaha sida taban iyo si toganba uga hadlaya jacaylka. Taasi oo aan tab iyo taagba isugu geeyey, si aan mar uun dadka uga haqab-tiro arrimaha jacaylka.

Jacaylku, waa tiirka dunidani ku taagan tahay, kuna tiirsan tahay, dadkuna ay ku tarmaan, kuna tamariyaan in laga hadlo oo lagu tuntuunsadana ay tilmaanteeda leedahay.

Haddaba, wakhtiyadan dambe ayaad mooddaa in jacaylku, uu saaran yahay doonni xagga hoose biyaha uga daloosha, oo uu qar-qoon ku jiro jacaylkii daacadda ahaana uu sii diciifayo, dunidana ku sii yaraanayo.

Sidaas darteed, buuggan **HADYAD jacayl**, dhallin iyo waayeelba wuxuu u iftiimin doonaa ifafaalaha qurxoon ee jacaylku leeyahay. Kaas oo dhinaca kalana ku faaqidaya in haddii jacaylka la isla dhisi waayo oo dhidibka dhulka loogu taagi waayo, uu dheelliyayo dhibaato iyo dhallan-dhool adduunna uu yeelanayo.

Buuggan, waxa uu qofku kaga bogan karaa dhammaan waxa uu tebayo iyo su'aalaha jacaylka ah, ee uu u taag waayo, kuna noqda laf dhuun-gashay. Sidoo, kale HADYAD jacayl waa tusmo iyo tub uu qofku ugu soo hagaago dhammaan wixii ku taca-luqa jacaylka. Kuwaasi oo u noqon doona qofka hage iyo la-taliye, kala-taliya arrimaha jacaylka ku saabsan ee soo wajaha.

Buuggan, oo aan in badan ku hammiyi-jiray inaan qoro, wuxuuna ahaa dareen ku lammaanaa maskaxdayda, si uu ummadda afsoomaaliga ku hadasha ugu noqdo dhaxal-gal. Ileen waatii uu Abwaan Cabdi Deeqsi Warfaa "Cabdi-Sinimoo" uu hore u yidhi *"wixii la qoraa qurruumo hadhee muxuu hadal qiimo leeyahay"*.

Wax aan hammigaa iyo hawaawigaa buug qorista ku jiraba, labadii sanno ee ugu dambeeyey ayaan qalinka u qaatay inaan soo bandhigo qoraallo, dadka xiiso gelin kara. Anigoo qori jiray maqaallo ka hadlaya waayaha iyo hadba

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

wakhtiga lagu jiro. Aakhirkiina waxaan u xuub-siibtay oo aan wakhti siiyey hawlaha jacaylka taariikhdu markay ahayd, 01-07-2012. Inkastoo aan ka mashquulay oo waxbarasho iyo caqabado kaleba iga soo dhex-galeen, haddana kama aan tegin inaan buuggan dhammaystiro.

Buuggan, waxaa ku jira oo qofku ka daalacan karaa dhammaan wixii jacaylka khuseeya; tusaale ahaan, iyadoo jacaylka la qeexayo, tilmaamo dhammaystiran dadkana lagu dhiirri-gelinayo siday cidlada iyo geeri-go'anka uga samaysan lahaayeen wehel. Siyaabaha loo dareemo ama la isku dareensiiyo jacaylka, sidaad u sheegan lahayd jacayl iyo in haddii qof kugu soo ciiro aanad xaska ugu banneyn, dhibaatooyinka jacaylku leeyahay haddii la dhayalsado, sidaad dhambaal jacayl ah u qori lahayd, sida ubaxyada jacaylka la isu guddoonsiiyo, hababka loo haasaawo iyo maah-maahyo jacayl ah.

Isagoo, weliba buuggani warbixin iyo xog kaa siin doono maalinta jacaylka adduunka, suugaanta iyo jacaylkii dadkii hore, sheekooyinka qosolka leh ee dhex-mara lammaanaha. Adigoo xagga u dambaysana kaga bogan kara, qisooyinkii dadkii jacaylka caanka ku ahaa isla markaana u god-galay. Sida: Cilmi iyo Hodan, Cali-Maax iyo Cawrala iyo Qays iyo Layla. Waxa kale oo ku jira sheekooyin jacayl iyo loollan dhinaca lammaanaha oo dhex maray abwaanno caan ah sida Raagge Ugaas, Garaad iyo Weerar Bulxan.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qeexidda Jacaylka.

Jacaylku waa doonis xad-dhaaf ah, oo dhex mara laba jinsi oo kala duwan: lab iyo dheddig. Waana is calmasho nafiba nafta kale ay ku daboosho baahideeda rabaaniga ah ee Ilaahay (SW) ku abuuray.

Abwaan la weydiiyay jacaylka maxaad ku tafsiiri lahayd, in kastoo hore loo yidhi *"jacaylka marka la jilo ayaa laga fahmi og-yahay in la qeexo"*. Haddana Abwaankaasi wuxuu ku macneeyey sidan:

"intuu waaxid uumiyo
Wax ku nool aduunyada
Wanaag iyo kalgacal iyo
Jacayl buu ku waaboo
Dhexdoodii ka weeloo
Ku wanaajay noloshoo
Ku wadaajay dunidoo
Waa dareen rag iyo dumar
Isu weecinaayoo
Weheshiga horseed u ah"

Tixdan aynu carrabka soo marinnay, waxay toos u cabbiraysaa in jacaylku yahay dareen isu-keena laba jinsi oo kala duwan: lab iyo dheddig, waana tiirka dunidani ku taagan tahay ilaa Xaawa iyo Aadan.

Hees ayaa ahayd:

"Aadan iyo Xaawaa
Ololaha kalgacal
Illeen soo unkee
Aadmiga kalana
Ambaqaadyayoo
Abtirsiimo noqay"

Bal aynu milicsanno ujeeddooyinka gunta dheer ee ku duugan in Xaawa feedha bidix looga dheego Nebi Aadan calayhi salaam.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

1. Feedhaha bidix waxay qafis u yihiin oo ay ilaaliyaan wadnaha si aanay dibadda waxyeelo uga soo gaadhin. Iyaguna inay sidaa isku-ilaaliyaan midba midka kale oo ay noqdaan dad isu tudha oo is dhawrta.
2. Saableyda feedhuhu waa kuwo isku dheggan oo midba midda kale haysato, sidaasoo kale in bini-aadankuna noqdaan kuwo iska kaashada nolosha oo kalgacal iyo xubbi dhexdooda ka abuurmo

Sida la sheegay, seeska iyo saldhigga jacaylku wuxuu ku dhismaa isku-duubnaan, is-afgarasho, is-weheshi, isu-huritaan, isu-dul-qaadasho iyo is-xurmayn.

Akhristayaal iyadoo laga siman yahay jacaylka sargoyntiisa, saamayntiisa iyo ka san-saan bixintiisa, haddana aynu eegno dadyawga caalamka iyo sida qofba carrabkiisa cishqiga ugu macnaystay. Inkastoo hore loo yidhi *"jacaylku waa erey qof kasta aad la kulantaaba uu siiyo macno gaar ah"*.

Dadka Carbeed Maxay Ka Yidhaahdeen Jacaylka?

Kelmadda Xubbi oo lafti ahaan ah erey Carabi ah ayaa waxay usoo gaabiyeen iyagoo soo qaadanaya labada xaraf ee shibbanaha ah (X iyo B), X= qalbi, B= side.
Markaa, waxay leeyihiin kelmadda xubbi macnaheedu waa **qalbi wax sida.** Markay, fal-safadeynayaanna waxay yidhaahdaan jacalku waa sida qalin-qoriga (beensalka) oo qolofta sare ee qalinku waa qalbigii, dhuuxa ku jiraana waa jacaylkii. Markaa haddii qalinkaasi helo sikiin afka loogu qoro dhuuxu wuu soo baxayaa, haddii kalana ma soo baxayo, jacaylkuna waa sidaas oo kale.

Kelmaddan kale ee af Carabiga ah ee (cishqi), bal iyadana aan eegno waxa laga soo gaabiyay iyo saamayntiisa iyadoo, iyana la soo qaadanayo xarfaha waaweyn ee shibbanaha ah;
C= caniifa Sh= shamsi Q= qadiim , waad aragtaa erayadaasi siday ay ugu qoto-maan xaqiiqda. Macnahooduna uu yahay, caniifa: adag, shamsi: qorrax, qadiim: soo jireen ah, waxaanay ka turjumayaan in jacaylku uu yahay wax soo jiray, siina waari doona tiirkiisuna adag yahay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Reer-galbeedku jacaylka maxay ka yidhaahdeen?

Iyagoo leh jacaylku waa shay qaali ah oo ku lammaan nolosha aadamaha, ayaa haddana waxay usoo gaabiyeen sidan:-
L (lack of pleasure) O (ocean of sadness) V (valley of death) E (end of life).
Erayadan oo ah Af Ingiriisi waxa laga soo gaabiyey kelmadda **LOVE**, oo ah jacayl, erayadaas oo Af Soomaali ahaan micnohoodu noqonayo, inagoo usoo qaadaneynna siday u kala horreeyaan: farxad la'aan, badda murugada, dooxada dhimashada, dhammaadka nolosha.
Waxay kasoo qaadeen in qof wax jeclaadaaba uu iska dhibban yahay.
In wax la jeclaadaa waa in nafta la dhibo sidaas miyaa?

Haddaba, fekerka reer-galbeedka iyo heesta uu qaado fanaanka Maxamed Cali (Burco) ayaad mooddaa inay isla-jaan-qadayaan:-

"Meydhanaanka geeliyo
Sida dheyda caanaha
Looma dhamo jacaylkoo
Laguma dhaashto caashaqa
Dhayal ha u malaynnine
Dhuuxiyo lafaha iyo
Waa wax dhiigga kaa jaqa
Caafimaadka kaa jara".

Jacaylku, waa naar loo adkaysto nolosha aan jacaylka lahaynna waa nimco aan loo adkaysan:

"Waa urugo iyo ciil
Waa arami caashaqu
Waa eebo kugu mudan"

Laakiin, anigu feker ahaan, waxaan aad ugu bogay kelmadda jacayl, sida dad dhuuxay ay ugu macneeyeen sidan, iyagoo sharraxaya ereyga jacayl xarfaha loo soo gaabiyey:-
J=jawhar A=amakaag C=calaacal A=anfariir Y=yaab L=luul.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylku, dhib iyo dheef labadaba wuu leeyahay, marna dacarta ka qadhaadh marna malabka ka macaan.waxa taa inoo sharaxaysa heestan uu alifay Abwaan Maxamed Cumar Nidaamiye.

"Ma ogiye jacayl waa maxay?
Waa macaan amba qadhaadh
Kolba waa siduu kugu soo mare
Waa magaca cudur
Midka ugu xumee
Dadku moogyihiin".

Saymo iyo dhibaato joogto ah ayaa jacaylka loo mari jiray ,waxaana dhici jirtay mararka qaar, Raga iska daayee in dumarku siday u socdaan afka uga gali jireen libaaxa oo ahaa waxa keliya ee wakhtigaa halista muuqata ahaa. Sida la sheegay libaaxu waxa uu ahaa mid bixiya magantiisa, isagoo ay astaan u ahayd inuu jeenigiisa dhulka ku xariiqo saddex jeer.hees ay ku luuqayso Caasha Cige ayaa sawir buuxa inaga siinaysa libaaxa iyo markay cidlo ku kulmaan gabadh uu caashaq haleelay.

Miigane libaaxow
Mudanaha dugaagow
Inaad tahay maqaadiir
Iyo cadow masiibo ah
Marna aad shimbir u tahay
Maatida halowdoo
Wacadkaagu meelmaro

Mudo aan dhawaym baan
Maqli warkaagee
Maantana haddaan ahay
Marti iyo amaaniyo
Magantaada aaryahow "

Adigoo jacaylka saymahaa u galay haddana Marka aad dareento in uu nafta dawo u yahay, nolosheenana ku lifaaqan yahay, inaad sidii abwaan sangub heestan curisaa miyaanay daw ahayn.

Walee aniga caashaqu

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Wehelkaygii weeyaan
Wiil layga beeriyo
Wadnahaygii weeyaan
Wixii eed ka sheegtana
Iskumaba wanaagsanin
Warna nama dhex mari karo

Akhriste, jacaylka dhabta ahi wuxuu siiyaa aadamiga aragti, taasoo wax walba oo uu eegaba uga dhigta wax dooggan.

"Siixo roob ku qaadoo
Saxan saxo udgoonoo
Aan saadaalinaayaad
Sadriga uga dhigantee".

Fannaanadda Sahra Axmed Jaamac (AHUN) waa tii lahayd:

"Sida ubaxa ama roob arooryaad
Dadkoo oon iyo harraad qaba
Ayaad indhahayga deeqdee
Sideen kugu illoobaa?".

Jacaylku, marna wuxuu kaa dhigaa qof habeenka iyo dharaarta kala saari waaya, adhiga iyo geelana kala garan waaya.
Mar kale, waa tan sahra axmed jaamac *Ilaahay ha u naxariistee,* oo laba eray oo hees ay qaado ka mid ah ku sharraxaysa in marka hore jacaylku qofka kusoo galay farxad iyo riyaaq marka dambe se uu dacar leefsiin karo, waxaanay tidhi sidan.

"marka hore marwaadkiyo
Masaawaadka faraxiyo
Muxibada riyaaqa leh
Waa mid lagu yaqaanaa

Cishqi kuu maleegtana
Mala taba ma waayee
Maalmo waxaan dareemuu

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Mudo kale I daayaba
Ma naxo jacaylkuye"

Marka labaad, si uu kuugu iftiimo macnaha ay koobsanayso kelmaddan jacaylka ahi aynu soo qaadanno, maanso odhanaysa jacaylow maxaad tahay? Gadaalna waxaynu ka raacinaynnaa jawaabaha dadku ka bixiyeen oo ay ku macneynayaan jacaylku wuxuu yahay, waana sidan:

Jacayloow maxaad tahay?
Ma hawiyo jin baad tahay?
Ma juuciyo dhib baad tahay?
Ma wax jiitamo dheer oo
Nafta kala jarraad tahay?
Ma jeestiyo colaad iyo
Silic jooga baad tahay?
Ma imtixaan jidkiisiyo
Jaxiimoo kalaad tahay?
Iga jaahil bixiyoo,
Jacaylyahow maxaad tahay?

Tixdanna bal iyana aynu eegno:

Cishqigu ma dab baa?
Ma daruur da'aysaa?
Mise daad ku qaadoo
Kugu dara badweyntaa?

Jacaylku inuu yahay wax jira oo ku qeexan dunidan waxaa jawaab diirran ka bixinaysa heestan hoos ku qoran ee uu hal abuuray abwaan Cabdi qays kuna luuqeeyay axmed mooge

"Jidhku muu dubaaxsheen
Nafta oon ku jirin oo
Cirku jabaq ma keeneen
Haddaanay jirin daruuri
Ifka lamaba joogeen
Dhulka oon la jiifin
Ogobay jacaylkuna

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxaan jirin hadduu yahay
Jalleecadaan ku eegaba
Jirro ima haleesheen
Mana jidhidhicoodeen".

Fannaanaddii codka baxsanayd Kinsi Xaaji Aadan *Ilaahay ha u naxariistee,* ayaa iyana ka marag kacaysa jiritaanka jacaylka iyadoo leh:

"Sidee ruuxa beer nugul
Jacayl ugu badheedhaa
Baraad li'i u seexdaa
Hadduu yahay bar-kuma-taal
Abwaan kuma balweeyeen
Ma boqreen Hadraawiba
Beer-lula ma sheegeen"

Soomaalida kuwo ka mida, oo isku howlay aqoonta jacaylku, waxay ku macneeyeen inuu yahay Geed. Geedkaas oo inta badan siidhkiisa uu ninku sido, dhulkana ku qotomiyo,gabadhuna ay waraabiso. Geedku markuu waynaadana la wada manaafacaadsado.
Hees ayaa ahayd

"Geed weeye caashaqu
Gunta xidid ku yeesoo
Gacamaha biyaha sidaa
Gudub ugu arooraan"

Aynu hadda soo qaadanno weedho dhawr ah oo dadku jacaylka ka yidhaahdeen:

- Jacaylku waa dhaqan kalsooni ah, qof kasta oo kalsooni yar haystaana wuxuu haystaa jacayl yar.
- Jacaylku waa iniin ka biqisha meel aanay iniinyaha kale ka biqlin.
- Jacaylku waa bilawga aqoonta sida uu dabkuba u yahay bilawga iftiinka.
- Jacaylku waa ciyaar aan caadi ahayn, waa uu guulaystaa ama waa uu guuldarraystaa.
- Jacaylku waa balanbaalis haddii aad xoog u qabato way burburaysaa.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

- Jaceylku waa ubax iyo reexaan udgoon, oo carfigiisa ay ku raaxaystaan dadka waraabiyaa, waxana lagu waraabiyaa oo uu ku koraa ereyada macaan. Lammaane kasta oo is-cugtay iyo kuwa calafku kulmiyay haddii aanay abuurin jaceylka shaki kuma jiro inay is qoommameeyaan ugu dambaysta. Waayo jaceylku wuxuu horseedaa is fahan, iskaashi iyo nolol-wadaag guul lagu gaadho.
- Dadku raasamaalkiisa iyo waxa uu jaceyl yahay way dar yeelaan, wax kasta oo la daryeelaana ma guuldarraysto mana duugoobo.

Wakhtiyadan dambe, oo dunidu horumartay, ayaad haddana mooddaa in uu jacaylku dadka fara-baas ku hayo, oo ay la murugoonayaan lana cataabayaan. Iyagoo u ciirsanaya bal dadkii jacaylka wax ka yaqaannay inay wax ka yidhaahdaan:

"Abwaaniinta suugaanta,
Heesaha sameeyoow,
Caashaqan sal iyo baar,
Saameeyey dunidii
Su'aal maad ka bixisaan"

In badan ayaa abwaaniin ka tiraabeen, oo tixo ka mariyeen in jacaylka tiirkiisu aanu immika ka taagmin dunida, ee uu ahaa wax soo taxnaa, kaas oo uu daliil u yahay gabaygii Cilmi Boodhari ku yidhi sidan:

"Caashaqa haween waa horaa,
Caadil soo rogayee,
Sayidkii carshiga nuuray iyo,
Caliba soo gaadhyee"

In kastoo jacaylka, saamayntiisu imika aanay bilaabmin oo ay ahayd silsilad soo taxnayd ilaa markii dunidan la sargooyey. Aan idiin xasuusiyo heesta uu hal-abuuray Abwaan Xasan Xaaji Cabdillaahi (Xasan Ganey), kuna luuqeeyaan fannaaniinta Xasan Aadan Samatar iyo Faadumo Khaliif Cumar (Magool) Alle ha naxariistee:

"Cimrigeed adduunyada
Waxaa jiray col iyo nabad
Ceydh iyo nin xoolo leh
Iyo laba is caashaqay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Caawana kamay tegin
Caynkaynnu ku ogayn"

Waxa aad haddana arkaysaa dad liddi ku ah jacaylka, oo inkirsan jiritaankiisa. Laakiin, malaha waannu biyo dhigine, jabku wuxuu taagan yahay markuu laf iyo ludba ka asiibo, ee uu xiddidada dhiigga qaada nugleeyo. Illeen libaaxa nimaan arag iyo nin arkay si ugama wada carraraane, dabadeedna uu yidhaa sidii Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi):

"Bi'i waa jacaylow
Boodhari inuu dilay
Been baan u haystee
Bi'waa jacaylow
Boog aan la dhayinoo
Cidi baanan karin oo
Bogga iyo wadniliiyo
Beerka igaga taalliyo
Inuu yahay bir caashaqu
Been baan u haystee"

Wakhtigan la joogana akhristayaal, jacaylkii wax buu tebayaa, si baa loo deedafaynayaa, inta daryeelaysaa yar, inta ku durdurineysaa badan. Abwaan Maxamed Cali Kaariye Ilaahay ha u naxariistee, beri aan dhaweyn waa kii lahaa isagoo aad mooddo inuu ka hadlayeyba dadka xilligan jooga:

"Way kala maagayaan
Way mala-awaalayaan
Isagoo mid kaliyey
Toban magac ku sheegayaan
Maantay la taahayaan
Berrina wuu ka maydhmayaa
Jacayl maaha kaasiyee
Marmarsiiyo kale iyo
Muraadeysi weeyaan
Muraad iyo dantiisee
Ma tagee cishqigu
Naftuu mayracshaa"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylkii daacadda ahaa inuu sii dabar go'ayo, dunidana ka sii tirmayo ma hadal baa ka taagan? Maansadii rasmi ee uu tiriyey abwaan Xasan Daahir Ismaaciil (Weedhsame) waa kii lahaa:

"Jacayllada roodhi kowda
Jacayllada soo rucleeda
Jacayllada soo riddeeda
Jacayllada raaf dillaaca
Jacayllada reer magaalka
Intaasiba waa ma raagto"

Haddaba, geeddiga jacaylka aan godan barwaaqo ah iyo goob-naq leh gondaha u gelinnee, marka la gorfaynayo jacaylka waxaa la yidhaa *"wuu gelinno badan yahay"*. Dunidana gondaha iyo goonyaha, gadaal iyo horay waa mid ku gedaaman:

Heestii sharraxeysey in jacaylka iyo dunidu isku yihiin ul iyo diirkeed ee uu hal abuuray abwaan Sangub waa tii lahayd:

"Haddii aan jacayl jirin, jagi lama ciyaareen
Haddii aan jacay jirin, jaar lama ahaadeen
Haddii aan jacayl jirin, nimco laguma joogeen
Haddii aan jacayl jirin, adduunyadu ma joogteen
Haddii aan jacayl jirin, ifka johorad nuurtio
Wanaag laguma joogeen"

Inkastoo, jacaylka dhowr jaad loo kala qaaday, qofba jiho ha la jibaaxee bal inagu jeedalka aynu ku wada dhufanno. Falsafadeynta iyo barashada jacaylku waxay gaadhay in la qeexo inta nooc ee jacaylku u kala baxo, iyadoo la gaadhsiiyey ilaa toddoba:

"Jacaylku waa toddoba
Haddii la tirshee
Mid aan tegin
Taabka la ii geli"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Toddobadaa nooc oo malaha loola jeedo, ka Ilaahay *"Subxaanuhu wa tacaalaa"*iyo Nebiga*"SWT"*, ka waalidka, cashiirada, ka ashyaada aan noolayn iyo qaar kale oo soo raaca.

Milicsiga hees ay talan-taalli ku qaadaan Faadumo Duur iyo Cabdi Tahliil, ayaa isku dayeysa inay sharraxdo toddobada nooc ee uu jacaylku kala yahay, waxaanay tidhi:

"Ma ogtahay jacaylku
Aan kaa jaahil bixiyee
Inuu yahay toddoba jaad
Saddex waa jin iyo jaan
Iyo jaahil xoogsaday
Juuqna looma odhan karo
Saddex waa jab iyo hoog
Waana lagu jalbeebtaa
Midna waa waxaan jirin
Aan ku jiif waraystee
Adigu keed la jiiftaa?

Waa su'aal ay jawaabi ka taagan tahaye, Cabdi Tahliilna wuxuu ku jawaabay:

"Inta ku nool adduunyada
Jamaal qurux wanaagay
Kaagaan la jiifaa"

Jacaylku waa fagaare ruux waliba farriintiisa ka dhiibtee, bal aynu fiirinno hal-tebinooyin kale oo faaqidaaya toddobadii hab ee jacaylka loo kala qaaday:

1) **Jacayl aan midab lahayn:** - waa jacayl si yar oo fudud oo lama filaan ah ku abuurma,sidaa darted ma reebo taariikh iyo xusuustoona.
2) **Jacayl midab leh:** - waa jacayl gundhiga abuuritaankiisa ay sees u yihiin Qurux iyo Lacag. Marka dambana haddii quruxda ama lacagta mid la waayo waxay lamaanuhu bilaaabaan is hiifitaan iyo diidmo aan xad lahayn.
3) **Kalgacal:**- kalgacaylku waxa uu ka dhex dhacaa ama ka bilaabmaa Waaalid iyo ubadkii,gacal iyo ehel iyo guud ahaan bulsho kasta oo meel ku wada nool.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

4) **Dookh:** - Dookhu waa waxaan cimri dheer lahayn oo todobaadle ah ,kaasoo marka la fasariyo la yidhaa *"waan ku arkayoo ku caashaqay"*
5) **Usoo hilow:** - jacaylkani waa mid ka dhex dhaca lammaane,lab iyo dhadig midkuu doono ha ahaadee oo diidan dhigiisa kale, balse marka loo amaano ama loo qurxiyo dhinicii uu diidanaa u soo hilooba .

6) **Jacayl :** - jacaylkani waa ka inta afsoomaliga ku hadashaa u yaqaanaan inuu yahay halis lkn culimada cilmi nafsiga raaadceeyaa aanay u arag inuu yahay wax sidaa usii ridan.
7) **caashaq:** - caashaqu waa ka ugu halista badan, waana kii ku dhacay cilmi iyo hodan,qays iyo layla, kaas oo kuu diida jiif iyo joogba, marka dambe ee uu dhulka ku dhigana aakhiro kuula jarmaada.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hababka Uu Ku Gudbo Jacaylku.

Laba hab ayuun buu jacaylku ku gudbi karaa, **aragtida kowaad** iyo **aragtida labaad**. Kuwaas oo koobsanaya siyaabaha qofka lagu jeclaanayo oo dhan. Aynu mid walba hoos ugu dhaadhacno, si aynu u fahanno.

Aragtida 1aad:

Sida, ciwaanka ku suntanba waa jacayl aan kugu simin in aad qofka sidaa uga sii bogato waa qofka la jeclaanayee. Jacaylkan oo isla markiiba waabayda kugu saydha, isla wakhtiga aad qofka isha qac ku siiso. Sida erayadan hoos ku qoran ee xikmadaysani muujinayaan:

"Jacaylku waa dabayl
Duufaan waddoo
Dibnaha iyo saaran deymada"

Dadka qaarna jacaylkan aragtida 1aad, waxay ku macneeyaan inuu yahay jacayl aan la filan karin, kaasoo kugu bariisada markuu doono.

"Ballan maaha caashaqu
Iyo bandhig laysugu baaqoo
Waa wax ishaa biligteeda
Boggaaga ku beerma"

Sida la ogyahay jacaylkani wuxuu ku gudbi karaa miridho gudahood, isla ilbidhiqsiyana wuxuu hoy ka dhigan karaa wadnaha, taas oo aad markiiba dareemi kareyso qandhadii jacaylka.

Qod baad tahay meel qabow ka baxoo
Qajeel ubaxii dhammaan qariyoo
Qacdii aan ku arkaan is qoonsadayoo
Bal qabsoo waaban kuu qandheys nahay

Kaas oo durbadiiba qofka kuu saaraya carfi iyo udgoon ku caashaq gelinaya:

Isha markaad la cuskatuu
Cillaan iyo kuu saara cosoboo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dareen kugu cartama iyo
Kugu beeraa cishqi

Jacaylka aragtida 1aad kugu gala wuxuu noqdaa mid ku jaan go'a noloshaada oo kaala jihaada in aad nafta ka jarto qofkan ay jamatay laabtu, xataa calafku ha kaa jiitee.
Abwaan Maxamuud Nuur Fadal waatii gabadh uu jeclaa la guursaday, kaddibna ay carruuro yeelatay, inkastoo ay marwo noqotay, ubadna ay dhashay jacaylkii uu gabadhaa u qabay kama uu tagin, aakhirkiina waa kii ku gabyay:

Inkastooy dhalaan yeelatiyo,
Ubad dhawaaqaaya
Dhimashadu ha joogtee si kale
Waan dhursugayaayee
Dhufsatayee qalbiga maanigaa,
Dhudi ka reebaaya

Abwaan Ismaaciil Cagaf isna waatii inan uu jeclaa loo soo sheegay inay dhoofayso, diyaaraddiina ay wakhtigaa loo sheegay duulayso. Halkii uu joogay ayuu kasoo dhaqaaqay. Nasiib darro muu soo gaadhin oo iyadoo markaas uun cirka gashay ayuu soo istaagay goobtii, waa kii dabadeed lahaa isagoo eedda saaraya dhaqsaha diyaaraddu u kacday:

Bilaa la raraa baabuurrada oo
Bariidada waad kaga bogataayee
Biligtaa qudhaa belaayo ah

Sida la sheegay beri dambe ayuu nin ay Ismaaciil-Cagaf saaxiib ahaayeen gabadhii oo reer leh la kulmay, waxayna weydiisay: "*Saaxiibkaa heesihii caashaqa ahaa ee uu tirin jiray ma iska daayey?*". Ismaaciil markii hadalkaasi soo gaadhay wuu damqaday, waxaana ku soo kacdoontay doogtii jacaylka, wuxuuna ugu cataabay:

Adoo gabaniyo adoo guri lehba
Gabawgaagu way gudboon-yiin

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylka aragtida kowaad kugu gala, dadka qaar waxay u aaneeyaan quruxda iyo qofka la jeclaanayo oo leh indho soo jiidasho ama jiniyad. Waana sababta qofka oon gaadhin heer uu ka bogto uu muuqaalka qofku indha-daraandarinayo.

Sunniyaha carceeree
Cidhifka isla gaadhiyo
Indho cawl la moodoo
Caashaqa abuuraa
Igu beeray cudurkee

Quruxdu waa heybad dabiici ah, waxayna kicisaa dareenka jacaylka. Haddaba sheygan quruxda la yidhaa leyskuma waafaqsana sida dad ku xeeldheer sheegeen, iyagoo leh dunidan wax quruxdiisa leysku waafaqsanyahay wuxuun baa jira ubaxa. Qof kastaa wuxuu ku odhanayaa ubuxu aad buu u qurux badan yahay, laakiin quruxda dadka leyskuma waafaqsana.

Tusaalayn; Afar wiil ayaa waxa ka soo hor-baxay afar gashaantimood oo laafyoonaya, waxay is-weydiiyeen *"teebaa ugu qurux badan"* mid waliba tii ay la noqotay ayuu farta ku fiiqay oo uu leeyahay taasaa u qurux badan,dabadeed way isku waafaqi waayeen, sida hal qof quruxda leys kugu geeyaana sida muuqata way adag tahay.

Quruxdu waa qofba dhinaca uu ka eegee, in badan ayey Soomaalidu quruxda aad u faallaysay, iyadoo daraasadahaa ay sameeyeen aad mooddo inay muhiimadda dumarka siinayaan, sheegayna sida ugu habboon ee quruxda gabadha loogu xulan karo ama loo dooran karayaa ay tahay sidan:

Soomaalida Iyo Quruxda

Soomaalidu waxay tidhaahdaa: (hadday gabadhi siddeed iyo labaatan sifo oo dumar lagu raaco leedahay, asay gabadh tahay, guurkeeda sina looma daayo). Sifooyinka ay tilmaamaanna waa sidatan:

- Afar ay u dheer tahay: labada gacmood, timaha iyo qoorta.
- Laba ay u dhuuban tahay: qoorta iyo dhexda.
- Afar ay dhumuc u leedahay: labada kub iyo labada cududood.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

- Afar ay u caddahay: labada indhood iyo ilkaha labadooda lakab.
- Afar ay u madowdahay: labada indhood wiilkooda iyo labada sunniyood.
- Afar ay deeb u leedahay: labada dibnood (bushimood) iyo labada mudane (Naasaha caaradooda).
- Laba ay u shuban tahay: labada dhaban.
- Hal ay u buuxdo: shafka oo ah meesha dumarku quruxda ka sitaan, ishuna ku nasato.
- Hal ay u qoran tahay: waa sanka.
- Lix iyo labaatankaas sifo araggay ugu qurux badan tahay, labana maqalkooda ayay dheguhu ku raaxaystaan, waana qosolkeeda iyo codkeeda macaan.

Carabta Iyo Quruxda

Soomaalida oo keliya ma-aha, ee Carabta lafteedu waxay tidhaahdaa: (gabadh wanaaggeed ma-dhammaystirna haddaanay afar u caddayn, afar u casayn, afar cidhiidhi u ahayn, afar u carfayn, afar u madoobayn, afar u weynayn, afar u koobkoobnayn, afar u ballaadhnayn, afar u jilicsanayn, afarna u yarayn). Faahfaahintooduna waa sidan:-

- Afar ay u caddahay: indhaha, ilkaha, ciddiyaha iyo midabka.
- Afar ay u castahay: carrabka, cirridka, dhabannada iyo dibnaha.
- afar ay cidhiidhi u tahay: sanka, dhegaha, xuddunta
- Afar ay u carfayso: sanka, afka, kilkilaha iyo cambarka.
- Afar ay u madowdahay: sunniyaha, timaha, indhaha wiilkooda iyo baararkooda.
- Afar ay u weyn tahay: joogga, garbaha, feedhaha iyo badhida.
- Afar ay u wareegsan tahay: madaxa, indhaha, cududda iyo kubabka.
- Afar ay u ballaadhan tahay: foolka, indhaha, shafka iyo cajarrada.
- Afar ay u yar tahay: dhegaha, cagaha, afka iyo calaacullada.
- Afar ay u jilcan tahay: sunniyaha, sanka, dibnaha iyo dhexda.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dhinaca Ragga: Dumarku Ragga Maku Raaci Karaan Qurux.

Jawaabtu waa haa, inkastoo Soomaalidu tidhaa *"Gabadhu ninka waxay ku dooran kartaa karti, aftahannimo iyo ragganimo"*. Ragguna dumarka quruxda iyo qiimahaba wey ku dooran karaan. Laakiin diinteennu waxay inoo sheegtay in quruxdu ay ka mid tahay waxyaabaha lagu raaco dumarka. Ninkii odeyga ahaa ee maah-maahayeyna waa kii lahaa:

> *"Ilaahaw saddex waannu leennahaye saddex hannoo gelin*
> *Ilaahaw talo xumo waannu leenna haye odayaasha hannoo gelin*
> *Ilaahaw foolxumana waannu leenna haye hablaha hannoo gelin*
> *Ilaahaw cirweynina waannu leenna haye islaamaha hannoo gelin"*

Ninku sida uu u jecel-yahay inuu guursado gabadh da'yar, qurux badan, caqli badan, dhawrsan, isagana jecel oo dhaqaalaysa, ayay gabadhuna u jeceshahay in loo guuriyo wiil da' yar ama aan wax badan ka durugsanayn, qurux badan, caqli iyo ragannimo badan, dhawrsan oo iyada uun ku kooban, deeqsina ah.

Waxaa la yidhi: Nin gaaban oo fool xun baa wuxuu qabay gabadh qurux badan. Maalin buu usoo galay, iyadoo si fiican isu qurxisay, markaas buu isha la raacay, awoodina waayay inuu ka jeesto. Markay aragtay siduu u eegayo bay tiri: "Maxaa kugu dhacay?". Ayuu ku yidhi "Wallaahi aad baad u qurxoonaatay". Markaas bay tidhi: "Ku bishaareyso inaan aniga iyo adiguba janno geleyno". Suu weydiiyey "Oo xaggeed ka ogaatay?" markaas bay tidhi "Anoo kalaa lagu siiyey markaas baad shukriday, adoo kalena waa la'i siiyey markaas baan sabray, qofka shukriya iyo ka sabraana waa ehlu janno" bay hadal ugu soo jartay.

Waxaa la yidhi: Nin baa isaga oo faras fuushan waxaa kahor timid naag aanu quruxdeeda iyadoo kale hore u arag. Markaas buu ku yidhi: "Hadduu nin ku qabo Eebbe hakuu barakeeyo, haddii kalese ii sheeg". Markaas bay ku tidhi: "Maad iska kay dhaaftid wax aanad jeclayn baa igu yaalle". "Maxaa kugu yaal?". "Madaxayga cirraa ku taal". Intaa markuu maqlay buu faraskii saynta u rogay si uu u dhaqaaqo, waase ay joojisay, oo intay timaheedii hagoogta ka qaadday tustay, mise waaba timo madowgooda wax lagu misaalo aan la arag. Waxayna ku tiri: "Wallaahi inaanan weli labaatan jir gaadhin, ha yeeshee

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

waxa madaxaaga iiga muuqatay cirro, waxana aan rabay inaan ku tuso in annaguba aan idinku nacaynno waxa aad nagu nacaysaan".

Waxa hubaal ah in dumarku ragga quruxda ku raacaan, laakiin malaha in ragga quruxda lagu raacaa raad badan ma-laha.
Gabadh baa gabadh weydiisay: Naa rag kee baad ugu jeceshahay? Markaas bay tidhi: "Waxaan ugu jeclahay gadh caddaale, guunyo badane, gaajo gooye, kuu garaabe, ku garab taagne, gef ka dheere, garoor ma daadshe, gaawe carafle, gaadhi farasle, gaadhka haaye, deris gargaare.

Abwaan Canab Guuleed oo ka baryeysa Eebbe inuu siiyo nin sifahan hoos ku qoran leh, waxay tidhi:

"Ilaahaw adaa Qaaddiroo qaybshay dunidiiye
Adigaa quruumaha ku nool quudshay kaligaayee
Qalbiyada adigaa daalacdoo qodob ku seegaynee
Geesi qiimo weyn lagu ogyoo qayrkiiba u heysta
Soddonkii quraankana nin ay, qabatay laabtiisu
Oon qalayn salaaddana siduu, Caadil ugu qeexay
Qaxar iyo dhibaatiyo mid aan, qaladba ii geysan
Qarki aad ka eegtaba mid aan, meelna laga qoonsan
Kaasuu qalbigu doortay oon, qaadan kari laaye
Qaaddirow Ilaahaw isii, waa is qaddarin laynne"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Aragtida 2aad

Habkan aynu si fiican u kala hufno, una kala haadinno si ay ugu sahlanaato fahankaaga. Waxaa la yidhaahdaa jacaylka aragtida 2aad ku gudbaa afarta nooc ee qofka loo jeclaado ayuu ku taxaluqaa, afartaasoo kala ah: diinta, qoyska, maalka iyo quruxda. Inkastoo quruxda uu kaga saamayn badan yahay inta kale xagga jacaylka aragtida 1aad kugu asiibana loo aaneeyo quruxda.

Waa kan nin Abwaan ah oo sharraxaya afartan hab ee qofka loo xisho isagoo wiil doob ah ugu hogga tusaaleynaya siduu usoo xulan lahaa ruuxuu lawadaagi lahaa nolosha.

"Midbaa quruxda loo guursadaa laguna goobtaaye
Midna magaca qoyskey gashey guur ku mudataaye
Midna gunnudda ey heysatuu kaa galaa damace
Midna waxaa gayaankaa ka dhiga garasho diimeede
Geellow si gaara u ogaw tan u gadaaleysa"

Jacaylka noocan ah waa hab xanaf tiran oo ku siiya wakhti aad kaga bogato qofka. Waxa aad ka bogan karaysaa qofka dabcigiisa, kartidiisa iyo akhlaaqdiisa markaad si hufan ubarato, iyadoo marka barashada laga hadlayana loo xeeriyo saddexdan:-

"Jid ma la martay
Jidiin mala cuntay
Jabad mala gashay"

Abwaan Hadraawi *mar* uu barashada jacaylka ka hadlayey isagoo saddexdan ku salaynaya waa kii lahaa:

"Umalay jacayl,
Weli jaar ma noqoteen
Jid ma wada lugayseen
Ma la cuntay jidiin weli
Jiidhkaad la dhalatiyo
Ma kaa jaray dadkiinnii
Gooni joog makaa dhigay"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Aragtidani waa fursad aad noloshaada sahan ugu geli karto ileen noloshaada waxaa kusoo biiraya qof ka qiimo badan wax kastoo lagu dedaalo.
Ninbaa geelba hal ka lahaa, dabadeed wuxuu doonay gabadh. Hashii keliya ee uu lahaa ayuu u bixiyey yarad. Rag ay qaraabo ahaayeen ayaa waydiiyey *"waar geelba hashaad ka lahayd maxaad u bixisay ee aad isu xoola tirtay?"*. Ninkii wuxuu raggii ugu jawaabay:
"Nin laba kor u taagan arkayaa afar hoos u foorara muxuu ku falayaa"
Isagoo malaha ka wada nin labada naasood ee inanta oo kor u taagan arkayaa, afarta naasood ee hasha ee hoos u foorara muxuu ku falayaa?.

In aad sahan u gasho oo aad baadhitaan qoto dheer samaysaa malaha waa mid aan la dhaadayn:

"Sahan kaygu dheeraa
Sahaydeydu badanaa
Kuu socdaalay awgaa
Saaxiibadaa kaa wareystoo
Ku su'aalay jaarkoo
Siday kugu sifeeyeen
Ruux lala seeso nololoo
Aan lala simin abuurkoo
Guur lala saxaad tahay

Jacaylka aragtida labaad kugu galaa wuxuu soo jiitamaa wakhti, si uu qofku uga jeel baxo ruuxa uu nolosha la wadaagi lahaa.

Sheekadan bal si fiican uga bogo, si ay kuugu iftiimiso baabkan aynu ka hadlaynno (aragtida labaad).

Sheekadii Kabo-Calaf iyo walaalkiis Faarax.

Beri ayaa waxa jiray laba nin oo walaalo ah, labadaa nin mid waxa la odhan jiray Kabo-Calaf, ninka kalena waxa la odhan jiray Faarax. Kabo-Calaf ayaa weynaa Faaraxna wuu yaraa, Kabo-Calaf weli muu guursan. Dadku Kabo-Calaf waxay ku xaman jireen in uu yahay nin nacas ah, Faaraxna uu yahay nin fariid ah oo reerkoo dhan wax laga weydiiyo.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa dhacday, in degmadii ay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

deggenaayeen Faarax iyo walaalkiis Kabo-Calaf ay abaari saamaysay oo xaaluf iyo biyo la'aani ka dhacday, kaddibna roob uu ka da'ay meel aan degmadoodii ahayn. Sidii reer miyiga caadada u ahayd ayey soo sahamiyeen meel ay dejiyaan reerkooda oo doog leh, ka dib meel ayey u soo heleen wayna u guureen.

Markii ay xoolihii degeen oo nimcadii meesha taallay ay afka dareen, ayey dhallinyaradii bilaabeen ciyaaro habeenkii la tumo. sida Wiglada, Heellada, Walasaqada, Jaandheerta IWM. Heesahaa oo ay caado u ahayd in la tumo marka roobku da'o ee xooluhu u nimcaystaan, markaas oo dadka reer miyiga ahina ay raaxo dareemaan oo ay ka nastaan biyo la'aanta iyo xoolahoodii oo u barwaaqooba.

Had iyo jeer reer miyigu waxay is guursadaan marka roobku u da'o. Xitaa haddii ay gabadh iyo wiil sheekaystaan oo ay heshiiyaan waxay odhan jireen, ***"marka roobku da'o ayeynu is guursanaynnaa"***.

Ninkii Faarax ayaa waxa uu la sheekaystay gabadh reerkoodu leeyahay degaanka ay u soo guureen isaga iyo walaalkiis Kabo-Calaf. Gabadhii ayey go'aan ku gaadheen iney is guursadaan, iyadoo arrintii halkaa ay ugu xidhan tahay Faarax iyo gabadhii ayaa waxa dhacday iney is laayaan Faarax reerkoodii iyo gabadha reerkoodii. Dagaal xun baa dhex maray labadii reer, rag badanna way iska laayeen labada dhinacba. Talo ayaa faro ka haaddey' oo waxay ku qabsatay Faarax iyo Kabo-Calafba inay meesha ka guuraan oo degaankoodii dib ugu noqdaan.

Ninkii Faarax waa nin jacayl hayo'e, waa ka samri waayey gabadhii ay is jeclaayeen, ka dibna wuxuu go'aan saday in uu gabadhii la soo tago. Reer miyiguna waxay samayn jireen, dumarka boqolkiiba sagaashan 90% waa lala tegi jiray, tobanka hadhayna waa la bixin jirey 10%. La-tegiddu waa nooc ka mid ah guurka soo-jireenka ah.

Sidii caadada u ahayd, dadkii hore waxay samayn jireen marka nin gabadh la soo tegayo, wuxuu kaxaysan jirey inaadeerkii, haddii lagama maarmaan noqon weydo ayuun buu kaxaysan jirey walaalkiis iyo adeerkiis. Sababtoo ah marka uu gabadha la soo tago, waxa reerka gabadhu ka dhalatay loo diri jirey walaalkiis, adeerkiis iyo aabbihiis, si ay u soo weydiistaan gabadha,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Ninkii Faarax wuxuu ku soo dhex dhacay ilmaadeerradii, wuxuu u sheegay in aanu marnaba dhaafi karayn gabadhaa oo uu jecel yahay, dumar kalena aanu il saarayn inta ay nooshahay. Ilmaadeerradii waxay kula taliyeen in uu iska daayo, waayo colaad xun oo rag layska laayey ayaa ka dhex dhacday labada reer. Markaa haddii ay arkaan niman ka socda beeshii ay is laayeen waxay u malaynayaan iney doonayaan in ay rag dilaan, markaa iyagana waa la qudh-goynayaa. Sidaas awgeed ayey kula taliyeen in Faarax uu ka samro gabadha.

Faarax kuma qancin arrintaas ay u soo jeediyeen ilmaadeerradii, wuxuu go'aan ku gaadhay in uu keligii iska tago. Walaalkiis Kabo-Calaf ayaa yidhi *"aniga ayaa ku raacaya mar haddey ku diideen ilmaadeerradaa"*. Kabo-Calaf ayaa raacay Faarax waxayna aadeen gabadha iyo meeshii ay deggenaayeen, dhulka u dhexeeyaa waa masaafo badan, reerana ma yaalliin, muddo illaa habeen iyo maalin gaadhaysa ayey nimankii waddada sii hayeen. Maalintii danbe ayey ku soo bexeen degmadii gabadhu ka dhalatay, ayaantaas oo dhan ayey dhuumanayeen. Sababtoo ah colaaddii ayaa weli sii qoyanayd, casarkii ayey gabadhii oo awr carraabinaysa meel ka heleen, waxayna ku yidhaahdeen ***"Gabadh yahay adiga ayaanu kuu soconnaa, waadna og-tahay labadeenna reer colaadda ka dhex oogan, markaa waxaanu doonaynnaa illow iyo illowba in aad na raacdid caawa"***

Haweenaydu waa Gabadh-Gabdho ka tagtay oo fariidnimo ku dheehan tahay. Markiiba waxay u sheegtay geed ay ugu timaaddo caawa. Wakhtigu weli waa gu'oo roobku wuu da'ayaa. Afarta jaho ayaa waxa iska soo qabsaday roob, nimanku wax yar oo jicsina ayey siteen intiina habeenkii iyo maalintii ay jidka ku soo jireen ayey soo laasteen. Markii habeenkii dumay ayaa waxa dhacay in nimankii roobkii geedkii hoostiisa uu ku qadh-qadhiyo, gabadhiina ay ka raagto. Gabadhii waxa ku dhacay walaalladeed iyo ilmaadeerradeed oo geela hor seexan jiray ayaa roobkii guriga ka soo jirsadey, sababtaa awgeed ayaanay u soo bixi karayn.

Nimankii waxay raagsadeen gabadhii markaasay gurigii dudda-diisii intay isa soo taageen ayey dhegeysteen meesha ay ka sheekaynayso, dabadeedna way gujiyeen. Gabadhiina way garatay in loo yeedhayo, markaasay sheeko ay iyagana wax ugu sheegayso walaalladeed iyo ilmaadeerradeedna ay sheeko dhacday uga dhigayso ayey ka sheekaysey.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxay tidhi *"beri ayaa waxa dhacday nin iyo gabadh ayaa is jeclaa, labadoodii reer ayaa is laayey, nimankii gabadhii way ka samri waayeen, dabadeed waxay soo aadeen gabadha reerkoodii, markaasaa roob da'ay sidan caawa oo kale. Markaasay nimankii gabadhii la hadleen, waxayna ku tidhi, haddii aad gaajoonaysaan caanaha dhiilka ku jira ee xerada adhiga dabadeeda yaalla cabba, haddii aad doonaysaan in laydin laayana guriga soo gala, haddii aad aniga idoonaysaanna geedkii taga"*

Nimankii gabadha ay walaalaha ahaayeen may fahmin arrinta, laakiin waxa markiiba fahmay nimankii doonayey ee ahaa Faarax iyo Kabo-Calaf. Markiiba waxay qaateen dhiilkii caanaha ahaa ee ay gabadhu u tilmaantay, waxayna tegeen geedkii ballantoodu ahayd.

Markii roobkii is taagey ayaa nimankii gabadha ay walaalaha ahaayeen gurigii ka tegeen oo ay xeradii geela horteedii u hurdo doonteen. Gabadhiina markii ay nimankii ka hoydeen ee ay firaaqo heshay ayey soo aadday geedkii ay kula ballantay Faarax iyo Kabo-Calaf. Nimankii gabadhii ayey gacanta qabsadeen oo guure ugu dilaacsheen.

Habeenkii oo dhan ayey sii guuraynayeen, markii waagii dillaacay iyagoo maraya meel aan wax dhaqaaqaa joogin, cuntana aan sidan ayey gabadhii nimankii ku tidhi: "Ina quraaciya" Faarax oo ah ninkii gabadha la soo tegey ayaa yaabay oo yidhi isagoo la hadlaaya Kabo-calaf ***"walaal gabadhu maxay leedahay, ma meel wax lagaucuno ayeynu joognaa waa maxay quraacda ay doonaysaa?"*** ayuu Kabo-Calaf waydiiyey. Wuxuu Kabo-calaf ugu jawaabay: ***"waxay leedahay aynu cadayanno"*** wuu fahmay dabadeed waa la caddyday.

Markii ay duhurkii noqotay ayey daaleen ka dibna geed hadh weyn ayey fadhiisteen, markaasay haddana gabadhii tidhi: ***"Ina nasiya"*** Faarax ayaa haddana yaabay oo yidhi: ***"walaal sawnagan fadhina ee hadhsanayna-maaha waa maxay nasashada inoo hadhsani?"***. Wuxuu haddana Kabo-calaf ugu jawaabay: ***"waxay leedahay kabaha aynu iska bixinno"*** kabihii aya layska bixiyey wayna nasteen, kaddibna galabtii ayey ka carraabeen geedkii,

Markii qorraxdu sii dhacaysay ayey gabadhii tidhi: ***"Degmadii ayeynu soo galnay"*** Faarax ayaa yidhi: ***"Gabadhu miyey inaga dheer tahay mise way inaga indho fiiqan tahay waa maxay degmada aynaan arag ee ay iyadu aragtaa?"***. Wuxuu Kabo-calaf ugu jawaabey; ***"waxay aragtay haad"*** Haaddu had iyo jeer waxay joogtaa meesha ay oontu taallo/degmadu taallo. Faarax oo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

la yaabay gabadhu waxay leedahay iyo sida uu u afgaranayo Kaba-calaf ayaa waxay soo gaadheen degmadii ay sheegaysay. Reer degmada ugu kooneeya ayaa marti geliyey nimankii iyo gabadhii, ka bacdina waxaa loo soo dhigay cunto, sidii reer miyigu samayn jireen marka ay dad marti geliyaan oo ahayd in ama xoolo loo qalo martida ama raashin koob subag ah leh la soo dhex dhigo iyo caano. Reerkii ay u hoydeen na sidii oo kale ayey sameeyeen oo waxay siiyeen raashin koob subag ah la dhex dhigay iyo caano.

Gabadhii ayaa waxay ka xishootay inay subagga ragga hortooda ku shubato cuntada meesha ay ka cunayso, markaasay aragtay ninkii Kabo-calaf oo subag dhiniciisii ku shubtay, ninkii kalena wuu ku shubtay, gabadhii ayaan inyarna looga tegin subaggii, markaasay intay fandhaalkii raashinkii dhinacii Kabo-calaf saartay ayey tidhi: ***"maanta Kabo-calafaw hadal aad i tidhi beerka ayuu sidaa ii kala jeexay"***. Markaasaa subaggii iyo caanihii oo is wataa waxay u soo dareereen dhinaceedii, waxay faruurtay gacan dhan oo ay u soo raacaan subagga iyo caanuhu. Ninkii Kabi-Calaf oo markiiba wax fahmi jirey ayaa fahmay waxay u jeeddo, oo ah in ay caanaha iyo subaga intay caawa ka shubato ragga ay berrito ka dheerayso, halkaana ay ceebi ka raacdo raggaa. Markaasuu isna intuu raashinkii oo dhan isku dhex walaaqay walaaqay ayuu yidhi:***"Ana hadal aad i tidhi maanta caloosha oo dhan ayuu sidaa ii walaaqay"***.

Gabadhii ayaa ka yaabtay fariidnimadiisa ninkii Kabo-calaf, markiiba waxay qoondaysatay in uu guursado ninkaa Kabo-calaf. Markii ay guryo tageen ayey gabadhii tidhi: ***"intaasi waxay dhaar iga tahay in aan nin aan Kabo-calaf ahayni i guursanayn, haddii kale gurigayagii ayaan qabanayaa***". Ninkii Faarax talo ayaa ku caddaatay oo wuxuu sameeyo ayuu garan waayey, labo mid ayey isu soo taagtay in uu gabadhii dhibta uu u maray ay dib isaga noqoto iyo in uu walaalkii oo ka weyn oo dhibtana la soo maray uu u guuriyo. Wuxuu markiiba go'aansaday in uu Kabo-calaf halkii gabadhii ugu dhiso, gabadhiina waxaa calfaday oo guursaday ninkii Kabo-calaf. Ninkii Faaraxna halkii ayaa gabadh kale looga doonay.

Ninbaa gabadhiisu dhimatay, geelba awr uu ka lahaa ayuu ku axmay, mar la weydiiyey maxaad awrkii hantiba kuu ahaa aad ugu qashay. Wuxuu ugu jawaabay ***"tanna waa ku duugis, ta kalana waa ku doonis (xigsiisanka)"*** oo uu uga jeedo marka ay reerku maqlaan in awrkii keliya een lahaa aanan kala lexa jeclaabin, oo aan ku axmay inantoodii inay ta kalana waa xigsiisankee ay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

xagga hore iga siin doonaan, oo ay odhan doonaan *"ma ninkii inanteenna sidaa ka yeelay ayeynu inan u diidnaa?"*. Waa maya oo inantuna ku soo dhiirrato inay buuxiso booskii walaasheed.

Raggii hore si ay u baadhaan gabadha garashadeeda iyo inay u cuntamayso waxay ku xidhi jireen hal xidhaale waxaana ka mid ahaa;

- Ninbaa intuu hablo geyaana u yimid weydiiyey saddex su'aalood oo uu ta ugu garaadka fiican kaga dhex xulanayey wuxuu yidhi saddex arrin ii sheega:
    1) Geel xeradii
    2) Rag gogoshii
    3) Garaw iidaankii

Hablihii mid ka mid ah ayaa garatay oo tidhi:

- ✓ Geel xeradii waa nabad
- ✓ Rag gogoshii waa godob li'i
- ✓ Garaw iidaankiina waa gaajo

Odeygii Iyo Inankii Uu Dhalay Ee Hablaha Martiyey...

Wiil iyo gabadh baa ku heshiiyey inay is guursadaan, markaasuu wiilkii aabbihii kala tashaday wuxuu damacsan yahay, odeygiina wuxuu ku yidhi *"bal kaalay isoo tus gabadha aan kula soo eegee"*, kaddibna inta laysa soo raacay ayaa la yimid inanta reerkoodii. Reerka waxaa joogay gabadhii iyo gabadh ka yar oo ay walaal yihiin oo kaliya. Wiilkii iyo aabbihii waxay ku yidhaahdeen *"Rag ha joogo ama ayaanu joogine annagu marti baanu idiin nahay"*, waxaana ay fadhiisteen ardaagii reerka. Kaddibna intay hablihii tashadeen ayey u qaleen neef, hilbihiina way soleen, gabdhahana inantii yareyd ayaa usoo qaadday soortii una keentay raggii, waxaanay ku tidhi:

"Waan raagney oo rag la'aan baa leh
Waa riyo oo ido la'aan baa leh
Waa solay oo biyo la'aan baa leh"

Kaddibna intay hor dhigtay ayey dib uga laabatay oo sii laafyootay, odeygii baa yidhi *"waar ma tanaa gabadhii?"*. Markaasuu yidhi *"wiilkiina mayee waa tii ka yareyd"*.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Odeygii oo basarkii iyo habkii inantii hore la'sii dhacsan ayey tii kalana weelkii ay wax ku cuneen kasoo doontey. Waxaanay iyana ku tidhi;

In caano la cidey
In caano u cidey
In caris laalaadisa
Intaa iyo in dhiggeeda ah

Kaddibna odeygii iyo inankiisii dibay isaga laabteen, isaga oo ujeeddadii uu lahaa gaadhay;

Qaabka Qofka Iyo Jacaylka Maxaa Iska Quseeya?

Qaaddirkeen markii uu dunidan ku abuuray quruumo uu midba qaab u samaysan yahay, midabo kala duwanna qaatay, isku dhex qasan oo quruxda iyo foolxumaduba qeyb ka yihiin, ayaa haddana qof kasta oo dunidan qayb ka ahi waxa uu jecel yahay wax qurxoon. Jacaylkana uu la qaybsado qof sida qorraxda u ifaaya. Sidaasay tahay ka aan yara qor-qorneyni miyuu ku qadayaa? Jawaabtu waa maya, waayo Eebbihii dunidan dhidibbada u taagay, dadkana ku dhex abuuray ayaa qaababkan isku dhafan isugu dheelli tiray.

Waa halkii Cilmi Boodhari'e:

"Waxa qaarba cayn looga dhigay
ha-is-cajabiyeene"

Jacaylku Wuxuu Guri Ka Dhistaa Foolxumada Iyo Quruxda Dhexdooda.

Aragtida 2aad, waa qaab aalaaba foolxumada daah saara maadaama aanu jacaylku dhakhso kugu soo boodayn oo uu wakhti qaadanayo, bal dhuux oo u fiirso tusaalahan:

Waxaad aragtay qof aanad ku qancin qurux ahaan markii kuugu horreysay ee aad la kulantay ee aad isha qac ku siisay. Kaba soo qaad qofkaas inaad baro kawada shaqaysaan ama bar kuwada nooshihiin ama wada joogtaan meel lagu barto cilmiga. Ishu baalla-daymoodka maalintii dhawr jeer ay bidhaansato oo markasta indhahaagu qabtaan, marka dambe si aanad ogayn ayey qofkaa aragtidiisu kuugu milmaysaa oo aad ula qabsaneysaa.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Aragtidii aad qabtey ee ahayd inuu fool xun yahay ayaa yaraaneysa, waayo qofkan waxaa laga yaabaa inaad kelmado iyo kaftanba wadaagteen in muddo ah, aakhirkana waxaa suura gal ah inaad jeclaataba, ileen caqligu marbuu foolxumada qurux ka dhigaa waa dhab.
Dabadeed haddii lagu su'aalo oo lagu weydiiyo *"ma cid baad magaalada ka weydey maxaad ku jeclaatay qofkan ee aad ku dooratay?"*. Markaa malaha waxa habboon inaad ku jawaabto oo aad soo xasuusato heestii odhan jirtay:

"Duni wada hallawsan
Dadkan wada jacaylkaa
Ee daad kalgacal iyo
Dhammaan saaran doonyaha
Ayaan dacal ka raacee
Ma deyrkii Makaan gubay
La yaab malaha dookhuye?"

Inkastoo ay Soomaalidu tidhaahdo *"jacaylka quruxda ka beerma ayaa ka badan ka caqliga ka beerma"*, haddana jacaylka caqliga ka beerma ayaa ka cimri dheer kan ka beerma quruxda.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Calaf

Hees ayaa ahayd:
"Wed iyo calaf waxaan ahayn
Jacaylkeenaa ka-weyn"
Wedka garannaye calafow maxaad tahay?.

Kelmadda calaf Soomaalidu waxyaabo badan ayey u adeegsataa:

Tusaale: - Nin waliba wixii loo calfuu cunaha mariyaa.

- Waxaan calafkaaga ahayn lama cuno, waxaan wed ahaynna looma dhinto
- Calafkaaga cago lagagama baxsado.

Muhiimadda iyo macnaha innaga oo maanka ku haynna, aynu isku sidigno labadan erey ee calaf iyo qaddar oo labaduba salka ku haya qoraalka Eebbe wuxuu qalinka ku duuguunbaa soconayee:

- Calafku waa sida midho geed saaran oo ma dooran karayaan dhulka meeshay kaga dhici lahaayeen.
- Dadka qaarna waxay yidhaahdaan calafku waa sida caleemo daad wado oo meesha uu doono ayuu ku tuuraa.

Dadkeennu aad bay u adeegsadaan kalmadan calaf, siiba waxa aad loogu adeegsadaa dadka nasiibkoodu xumaado ee aan is calfan, iyaga oo yidhaahda calaf baanu ku lahayn iyo calaf kii saanay ahayn.

Oday aan la yara kaftamay ayaa ii warramay, odeygu dherer ahaan wuu gaaban yahay. Dabadeed wuxuu damacu ka galay inan aan ka dheerayn oo iyana dherer ahaan gaaban in muddo ah wax uu la haasaawaba, inantii waxay soo jeedisay rayi kaasoo ay leedahay *"adna waad gaaban tahay ana kaama dheeri markaa ina kala dhaqaaji intii aan isku dhali lahayn ubad ina raaca oo iyaguna gaagaaban"*. Odeygii wuu garwaaqsaday waxay gabadhu ka hadleysay waanu uga garaabay isagoo ku raacay rayigeedii sidii baanay ku kala faataxeysteen Dabadeed duqii baan si kaftan ahaana ugu idhi *"malaha halkaa jacayl baan ku jirin oo iska leydh raacbaad ahaydeen?"*. Odeygii wuxuu iigu jawaabay *"may adeer sidaa maaha ee calafkaa ka adeegay"*.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Haddaba mar kasta oo wax sidaynu u rabnay u dhici waayaan waxaynu u aanaynnaa calafka oo eedda saarnaa inagoo leh calafkaa sidaa yeelay.
Calafku waa huteel laga cunteeyo oo ay joogaan soorayaal sillan oo hadba kuu keena cunto aanad rabin sidaa miyaa?

Haddaba akhriste waxba eeda yaynaan saarin calafka, waayo Ilaahay waxa uunka ku uuman wuu ogyahay bar bilaw iyo bar dhammaad waxay samaynayaan ileen waa wuxuu abuuree. Taasna waxaa la yidhaa qaddar, inagu qaddarka weynu rumay-sanahay, laakiin inaynu dedaalno ayaa habboon, qaddarku markaa ha yimaaddee.

Waa hubaal calafkaaga ma beddeli kartid;
Abwaan Ismaaciil Mire, wuxuu yidhi:

Haddi uu kallaho ama
Kob-dheer uu fuulo
Badkalluun ku jira maray ku tahay
Ama fijaan koob ah
Nin walba wixii loo katibay
Waa la kulansiin

Abwaan Canab Guuleed waxa ay ku gabayday:

Adduun waa qisiyo yaab, quusayoon gudhine
Marna waa qaflado iyo naxdino, qaawan abidkoode
Qorraxdii dhacdiyo waagu way, kala qalloocaane
Qosolka iyo farxadaheedu waa, qaab an soconayne
Marna waa qabow iyo nimciyo, laysku qoofalaye
Qof weliba wixii loo qoruu, qayb u helayaaye

Calafku ha adeego laakiin hab dhaqankeenna weynu beddeli karnaa, qofkuna waa inuu dedaalaa inta karaankiisa oo aanu is hagran, si marka qaddarku u yimaaddo aanu u odhan *"haddaan sidaa samayn lahaa ama sidaa yeeli lahaa waxan may dhaceen"*. Taas oo la diiday kelmaddan dadku soo celceliyaan ee ah haddii... haddii.. haddii... oo qoomamo iyo ciil xambaarsan, loomana baahna wax tegay inaad kasii faallooto.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Keli ahaanshaha waxa ka fican wehel jaceyl

Dunida bini-aadanka waa lagu lammaaneeyay ilaa xataa haddaad eegto xayawaanka wax kastaaba waa laba-laba.
Markii adduunka dhidibbada loo taagay waatii Aadan oo keli ah la abuuray, si ay isu taageersadaan una tarmaan waatii Xaawa feedha bidix looga dheegey, sida uu gabaygan inoogu sharaxayo abwaan cabdilaahi macalin dhoodaan.

Markii Eebbahay dunidan goday
Ama la gawdiidshay
Iyadoo quruumanna la gadiyey
Oo geb laga siiyey
Sow Aadan oon gacal lahayn
Gegi ma soo taagin
Sow Xaawa feedhiisa biddix
Ugama soo goynnin
Sow geesh carruuriyo Ilaah
Guuto kama siinnin

Qofku inuu keli ahaado waxaa ka mudan inuu sameysto wehel, si uu dhaxanta iyo gawraha habeenkii dugsi uu ka galo u helo.

Cilmi-Boodhari isagoo sharraxaya taranka iyo sida aan ruux keli ahi macno u samaynayn waa kii lahaa:

"Cidlo lagama beermeen dadkoo
Cuudi waaxida he,
Waxaa caymba ceyn looga dhigay
Hays cajabiyeene"

Bal kalmaddana u fiirso, miyuu nafluhu keli ahaantii kob iyo reer oodi? Akhristayaal waa in aynu ku dhiirrannaa in aynu nolosha qiimo u yeelno oo aynu helno wehel nabdiga iyo niyaddu inoogu degto.

Nin baa bari guurso loogu taagwaayey, tol iyo xigaalba waa lala hadlay , lagu xiiq, waar ninku mayal adakaa. Maalinti dambe ayey Ilmaadeeradii u tashadeen ; waar ninkii loo taag waaye maxaynu yeelnaa baa lays waydiiyey, in ay budheeyaan ayey isla garteen.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Nin iyo budh intay soo qaateen ayey ugu yimaadeen isagoo ardaa jiifa, waaba lagu bilaabay,halkii dhaqaaqdaba bud duulayaa ku dhaca, tuu qaadaba la jabi. ninkii waxay u noqotay in la dilo iyo in uu yidhaa "*waan guursanayaa*" Deedna waxay kaga yeedhsiiyeen "*Waar waan guursanayaaye iga daaya*". ninkii wuu guursadey, ku dhawaad bil markuu qabay gabadhii ayuu isna budh soo qaatay ,oo nimankii oo meel halkana ka shaahaynaya lasoo dul istaagay, waaka la galay ,oo kii dhaqaaqaba madaxa jabiyey .ka dib baa la weydiiyey, waar maxaad ragga ku laysay ? Markaasuu yidhi " *Waar nimanku budhkay igala raageen'e, may bari hore I budheeyaan aan guursadee.*

Nin kale oo doob guun ahaa, kana daahay inuu guursado, ayaa isagoo naftiisa canaanaya waakii yidhi;

"Anigiyo naftaydaa garra'may, gu'gan horraan tiiye
Wiil yahaw gaddaad adigu tahay, waan giriif sanaye
Gogol boodh leh baad ardaa, hoos galgalataaye
Go'uun baad dugsanaysaa siduu, gaari kuu yahaye
Maxaa guri si loo yeesho iyo aroos, gabadhba kuu diiday"

Haddaynu caalamka carrabka la yara tiigsanno, waxaa jira dhakhaatiir cilmi-nafsiga ku takhasusay, waxaa u taga dad ka cabanaya wer-wer iyo arrimo ku cakiran noloshooda oo ay cilin u la'yihiin;
Isla markiiba dhaqtarku qofka cabanaya wuxuu weydiiyaa cid nolosha kula wadaagtaa miyay jirtaa? Hadduu yidhaa qofku maya, wuxuu ku dhiirri-geliyaa inuu samaysto wehel, kaa soo cidlada haysata ka caawin kara.

Daraasad cilmiyeed;-
Waxaa daraasaddan lagu sameeyey ragga iyo dumarka oo la sheego inaanay kala maarmi karin, iyadoo qaybtan hore ee daraasadda lagu tijaabiyey dumarka oo keliya oo la sheegay inaanay ragga ka maarmi karin.

Hogo-tusaalayn; bal akhriste ka warran haddii ragga iyo dumarku is arki waayaanba, waa sidii mar-mar ku dhici jirtay reer miyigii hore oo ay maalmo badan ku qaadan jirtay siday mar uun u arki lahaayeen gabadh. Taas oo xataa ay u dib-jiri jireen muuqeeda inay mar uun isha qac-ku-siiyaan inay la hadlaan iyada daaye'.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Haddaba daraasaddan cilmi-baadhista ah ayaa lagu sameeyey dumarka sida uu noqon lahaa dareenkoodu haddii ay waayaan rag meel uu joogaba.
Waxaa leysku soo ururiyey dumar tiro ahaan boqol ku dhaw, iyadoo lagu xareeyey meel loo qoondeeyey, meeshaas oo aanay rag ka arki karin, halkaas oo leh seero waaweyn oo maalintii lagu sii daayo, dhexdiisana ay ku yaallaan meelo yar yar oo caws loogu dallaalimeeyey oo aad mutul mooddo, halkaana ay ku sheekaystaan, waxaa kaloo cuntada loogu soo dhiibaa dumar, adeegyada ay u baahan yihiinna waxaa u qabta dumar.

Waxay hablihii ka sheekaystaanba dhacdooyinkii soo maray iyo sheeko wadaagyadii ay soo sameeyeen, ayaa markii dambe ee waxyaabihii ay isku maaweelin jireen dhammaadeen, ay kala xiiso dhaceen.
In muddo ah, waxay halkii ku jiraanba, midkastaa waxay noqotay baralaati, hablihii isku soo ururi jiray midkastaa halkii ay joogtay ayey islaabtay oo ay ku tabcaantay, iyagoo cuntadiina diidday.
Hablihii wax xanuun la moodo ayaa ku dhacay, iyadoo markii dambe dhakhaatiir loogu yeedhay, laakiin wax natiijo ah kamey gaadhin, waxaanay sheegeen in shaybaadhkii la mariyay uu soo baxay (**negative**).

Aakhirkiina waxaa loogu yeedhay dhakhaatiir ku takhasusay cilmi-nafsiga kuwaa soo sheegay in hablaha waxan hayaa aanu xanuun aheyn, ee ay jirto waxay tabayaan. Markaa bal in berri subaxa quraacda loogu soo dhiibo rag, halkii markii hore dumar uga keeni jireen. Subaxii ayaa rag loogu soo dhiibay quraacdii. Hablihii beerka u jiifay kor bay u soo kaceen, iyagoo ku soo ururay ninkii, mid kastaana isku dayeyso inay la hadasho. Imika niyad ahaan hablihii waxay noqdeen caadi. sidoodii hore ayey kusoo noqdeen, iyagoo meelihii loo dallaalimeeyey koox koox isugu soo ururay. Waxaana galay firfircooni iyo dardar cusub, iyagoo bilaabay sheekooyin hor leh oo ku saabsan raggan quraacda loogu soo dhiibay.

Halkaana waxa ay ku xaqiiqsadeen khubaradii, in dareen ahaan ragga iyo dumarku isku xidhan yihiin oo aanay kala maarmi karin.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Siyaabaha Loo Dareemo Jacaylka.

.Jacaylku waa waxaan la arki Karin, lana taaban Karin oo laga dareemo qalbiga, kaasoo ruuxba si isu-tusa. qofba meel buu ku tilmaamaa halka uu jacaylku ka turqay, iyagoo cabashadooda sawiro kala gedisan ka bixinaya.

Dareemida in jacayl ku hayaa waxay door muhiima ka qaadataa inaad nafta ku hagto halka laga raacey. Haddaba sided u ogaan lahayd inuu jacayl ku hayo?, tusaalahan si fiican u dhugo:

- ✓ Haddi liindhanaan hortaada lagu tuujiyo biyo yar ayaa tif kasoo odhanaya carrabka hoostiisa. Markaa waxaynu odhan karaynaa liin dhanaanta ayaa si taban u carisay dareemayaashaada si ay jawaab uga bixiyaan
- ✓ Tani waxay tusmo u noqon karaysaa jacaylku inuu yahay dareen marka uu yimaaddo dareen-dhaliyuhu aad dareento

Dadka qaarbaa waxay sheegaan in dareenka jacaylku hurdo la'aan ku sababay.

Hurdo kama bogtoo
Beerkaan u seexdaa
Barbarrada ma qabanaayee
Anigoo burburayoo
Dhinacyadu i barareen
Waaguu ii bariyee

Kuwo kale ayaa iyagu sheega in gasiinka iyo oomataba looga go'o

Inaan cadaydo mooyee
Waxaan calaalsho lay diid

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dareenka jacaylka iyo falgalka kimikalka

- Marka uu qofku wax jecel yahay waxa jira kemikooyin badan oo dhex yaacaya guud ahaanba jidhkiisa, gaar ahaanna maskaxdiisa. Kimikooyinkaas oo ay culimada saynisku maalinba maalinta ka danbeysa wax cusub ka ogaanayaan doorka ay ka ciyaaraan marka uu jacaylku qofka haleelo.

Dabcan maaddadaha **estrogen** iyo **testosterone** iyagu sida la ogyahay waxay door weyn ka qaataan habka isu tagga oo isagu in si gaar ah looga hadlo u baahan, la'aantoodna in jacayl iyo hindisihiisaba cidi isku luri lahayd fili maayo.

Jahawareerka qofka ku dhaca marka ugu horreysa ee uu saymaha kalgacaylku ruuxa sahansado waxa ka mid ah: wadnaha oo si aad ah kuu rawrawleeya, dhidid fagax kaa soo yidhaahda oo inta calaacaluhu dhididaan uu xitaa gacan-qaadku ku adkaado iyo jidhidhico jidhka oo dhan, kor iyo kal roorta.

Haddaba aqoonyahannada arrinta uu kuurka galay ayaa astaamahaas iyaga ah masuuliyaddooda u xanbaariyey maaddadaha kala ah **dopamine, norepinephrine** iyo **phenylethylamine.**

Matalan **dopamine** ayaa la qabaa inay ka masuul tahay dareenka raynraynta ah, ee ku saaqa marka qofkii aad jecleyd kusoo hor joogsado ama aad war lagaaga keeno. Waxana lagu naanaysaa "pleasure chemical". Sidoo kale **norepinephrine** ayaa la rumeysan yahay inay sida maaddada kale ee **adrenaline** ay iyaduna masuul ka tahay riyaaqa iyo wadnaha karaaraya.

Dr.Helen Fisher oo ah anthropologist, waxna ka dhigta jaamacadda **Rutgers University**, oo aadna caan ugu ah baadhitaannadeeda ku takhasusa jacaylka, ayaa shegtey in ay labadan maaddadood oo wada socdaa ay abuuraan enerji ama awood xad dhaaf ah, boholyow, hurdo-seeg, oon-diidnimo, dareenka iyo feejignanta qofka oo meel qudha ku ururta sida qofka uu jecel yahay.

Haweenaydani waxay intaa raacisey, jidhka aadanuhu wuxuu sii daayaa kimikooyin jacayl oo isku milmay marka ay arrimo doora oo isku wada habbooni dhacaan, ee iskama sii daayo marwalba, ragga ayana u badan arrintaa, sababtuna waxa weeye ragga isha ayaa deeqda.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dheeho jaantuskan muujinaya xidhiidhka ka dhexeeya maaddadaha aynu soo xusney iyo maskaxda, adigoo adeegsanaya midabyadu sida ay isu leeyihiin.

Cilmi-baadhayaasha arrintan ku hawllani waxay adeegsadeen qalabka loo yaqaanno **functional magnetic resonance imaging (FMRI)** oo ay ku eegaan maskaxda dadka marka ay dawanaayaan sawirrada qofka ay jecel yihiin. Waxayna sheegeen in iskaanka ama muuqaalka uu mashiinku muujiyo muddada uu qofka jacaylku ku cusub yahay ee uu jahawarerka ku jiraa ay muujiyaan dhiig aad ugu qulqulaya tebiyeyesha maskaxda qaybteeda u nugul maaddadda **depamine** oo sababta boholyowga, hiyikaca iyo qabatinka.

Si kale haddaan u idhaahdo lammaanaha is jeceli markay heerkan marayaan iyaga mooyane in cid kaleba dunida ku nooshahay ma moodaan, iyaga uun baa indho isu leh.

Qeexid kale oo ku saabsan sababaha isku-indho-burburka ama is-cajabinta iyo isku-tudhashada labada qof ee dhacda marka jacaylku abuurmo, ayaa waxay ka timi aqoonyahanno ka tirsan jaamacadda London, University College London.

Culimadani waxay ogaadeen in dadka uu jacaylku hayo ay aad u hooseyso maaddadda **serotonin** e jidhkooda ku jirtaa iyo weliba **neural circuit** oo aad u cabudhsan. Serotonin-ta hooseysa ee laga heley dadka wax jeceli waxay la mid tahay natiijada laga heley dadka qaba habdhaqanka ama xaalad-caafimaadeedka **OCD** ama **obsessive compulsive disorders,** taas oo muujineysa sababta uu qofka wax jecel u madax maro masayrku, oo uu xitaa kolkol masayrkaasi xad dhaafka u noqdo.

Jacaylku waa xaalad-kimikeed khamiirtey oo hawlaha maskaxda iyo sida ay u shaqeeysoba saamaysa, waana qayb ka mid ah jiins-keenna, oo weliba ay lug ku leedahay bar-baarinteennii hore.

Haddaba iyadoo ay suugaanta abwaannadeennu arrintaa ku abbaareen ay aad u badan tahay, waxan tusaale usoo qaatey hees uu leeyahay, fannaanka codka macaan ee Salaad Maxamed (Derbi).

Heestan abwaanku wuxuu ku qeexayaa sida inanta uu rabo jacaylkeedu maankiisa u dooriyey, ee hoggaanka ugu hayo, oo aanu isagu isu xukumin ee awood kale ku shaqeeysanayso iyo sida marka aanu arag uu boholyow culusi

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

ugu habsado ee uu naftiisa u hiifo. Calaamadahaa oo ah kuwa lagu yaqaanno qofka qabatima waxyaalaha maanka aadanaha beddela.

Meel aan joogaba adey muuqdoo
Midabkaagey hor maraayee
Naftu muhatoo, maarmi weydoo
Muusannowdoo ku dul meertoo
Aday magan iyo,Marti kuu tee
Ha i moogaan
Miyirkii bay la tagtee meedey?
Wey i maan qaaddee meedey?
Meedey ma hayee meedey?
Kama maarmi karee meedey?

Ka helitaanka jacaylka iyo marxaladaha uu maro

Waxa jira saddex marxaladood oo kala cayiman, oo loo qaybiyo jacaylka, saddexdaas marxaladoodna haddii ay kugu kulmaanna, waa tusaale buuxa oo sheegaya in jacayl ku hayo. Saddexdan xaaladood waxa ay kala yihiin:

1) Muhasho - Lust or erotic passion
2) Soo jiidasho xanbaarsan riyaaq jacayl - Attraction or romantic passion
3) Isku xidhaan iyo isku taamid - Attachment or commitment

Waxa mudan in la xusuunaado in qof kasta oo ay hammuuntu inoo qabataa, in aanu had iyo goor ahayn kan aynu jecelnahay. Si kale aan u idhaahdee, waxaynu u muhannaa kol-kol qof aynnaan jecleyn.
Muhashada iyo xoodaamada markaynu dhallinyarada nahay, ama wax yar uun ka dib markaynu qaangaadhno, waxa jidhkeenna ku dhex fir-fircoonaada estrogen iyo testosterone. Markoodii ugu horreeysey, waxayna inagu abuuraan damac iyo harraad aynu u qabno ama aynu ku waayo-aragno jacaylka.
Maqaal ay qortey Dr. Lisa Diamond, oo la yidhaado "Love Desire" (Current Directions in Psychological Science, vol 13 no. 3), ayaa waxay ku sheegtey in jacaylka iyo xoodaamada muhashada uun ahi ay kala yihiin labo aad u kala fog, waxana kala duwan gundhiggooda hoose.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Muhashadu waa damac aan meel fog gaadhsiisnayn. Laakiin jacaylka dhabta ahi waa mid salka ku haya baahida koolkoolinta abadiga ah iyo weheshiga ruux ahaaneed. Taasaana sababta mar-mar in inaga oo aan muhashadaa badani inoo hayn ooridaada ama saygaaga, in aad haddana lasii joogtid, oo waa halkii Abwaan Dacare ay sheekadu noqoto:

Maxaan kaaga baydhaa,
Ama kaaga baaqdaa,
Sow layma kaa badin!.

Dr. John Money oo isagu ku takhakhusey arrimahan ayaa isagu si cad u kala bayaamiyey, wuxuuna yidhi:- *"Jacaylka dhabta ahi wuxu ku jiraa inta suunka ka sarreysa, muhashada iyo xoodaamadana waxa looga taliyaa inta suunka ka hooseysa. "Love exists above the belt, lust below. Love is lyrical. Lust is lewd."* Pheromones-ka, muuqaalka qofka iyo ifafaalayaasha aynu ka eeg-eegno qofka aynu weheshan doonno, ayaa dhammaantood door ka ciyaara ka dabadhaca. Wax walibana waxay ka bilaabmaan ka dabadhacaa isaga ah. Muhashada iyo xoodaamadu way inna gaaf-wareejiyaan si aynu ula kulanno dhiggeenna, soo jiidashada iyo riyaaqa kalgacalkuna waxay innagu hagaan xidhiidh tisqaada.

Soo jiidasho xanbaarsan riyaaq jacayl.

Dareenkaa hore ee is-barashadu ama ha ahaado mid muhashadaa ku yimi ama yuu noqon'e, haddii uu xidhiidhkaasi sii socdo, waxa yimaadda isa soo jiidasho qushuuc leh. Marka isu riyaaqaasi bilowdo (romantic passion), waxa inaga luma awoodda aynu si miisaaman ugu fekeri lahayn, (our ability to think rationally). Lumistaasi ruuxa aynu jecellahay mid ku kooban ha ahaato hadday doonto e'.

Marka ay marxaladdan marayaan labada qof ee is jeceli, waxay wakhti dheer ku qaataan sidii ay isu baran lahaayeen, isuna fahmi lahaayeen, waxayna uga sii gudbaan heerka saddeexaad ee isku-xidhnaanta ama nidar-galka (Attachment or commitment)

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Isku xidhaan ama isku taamid.
Marxaladdan markuu soo gaadho jacaylku, wuxuu noqdaa maguuraan. Waxad kasoo gudubtay jacaylkii hoosiiska ahaa, waxanad geleysaa jacaylkii dhabta ahaa. Markaa laga bilaabona waa in uu jacaylku u adkaystaa ama ka samata baxaa hadimooyin fara badan iyo bur-bur kasta. Ellen Berscheid oo ka tirsan (University of Minnesota) iyo (Psychologists ka tirsan jaamacadda University of Texas), waxay labaduba aamminsan yihiin in ay isku-indha-kuulashada iyo is-cajabintuna ay ku xidhan tahay hadba inta qotada jacaylku le'eg yahay. Isku-indho-bururukaasi ayaa u muuqda inuu caawiyo sii wada joogga labada qof.

Waxa uuna ku yimaaddaa iyadoo labada ruux uu mid ahaan, isagoo aan is ogeyn, uu ka kale la weynaado, oo uu xitaa dhaafiyo ama kala cajiibsanaado sida dhabta ah. Wuu kala qurux badnaan karaa, kala aqoon badnaan karaa amaba kala karti badnaan karaa inta runta ah. Dadka sidaas ahina way isku raagaan marka la bar-bar dhigo kuwa aan iyagu sidaa yeeli karin ama aan dooneynba inay yeelaan, ayuu yidhi Dr.Ted Huston oo isagu hoggaamiya cilmi-baadhistaasi.

Markaad dareento inuu jacayl ku hayo xaggeed daawo u doonan lahayd?, ileen xanuunka jacaylka meel lagu shaybaadhaa ma jirtee.
Nin abwaan ah ayaa laga hayey:

Xanuunkaygan dhabarkiyo
Xididdada u dhaadhacay
Nabarradan i dhaawacan
Dhimbiilahan igu shidan
Dhaqaajin waa diktoorkii

Jacaylku waa dareen naflaha ku lammaan, ku ladhan, kuna loohan ruuxda bini-aadanka, dawadiisunu ay tahay in qofka leebka kugu ga'nay aad kula liicdo.

Dadka ruuxaad jeclaatee
Naftu ay darjiidhiyo
Halkey niyaddu doontiyo
Dookhaagu wuxuu yahay
Waa inaad la deristaa

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waa hubaal in dabiib iyo dhakhtar iyo meel kale oo loola cararaa aanay jirin jacaylka, horaana loo yidhi:

Wadaad dhir sitaana kaama dhufto
Dhakhtarna kaama dhayo jacaylka

Cilmi-boodhari-na waa kii lahaa:

Mariil baa qardhaas loo tolaa
Malo la geeyaayee
Milil baa la gooyaa cishqaan
Cidina maaraynne
Casharkay wadaaddadu dhigeen
Cudurkan goyn waayee
Cilmi iyo dawoba doontay oo
Waayey cilinkiiyee

Tix kale aynu soo qaadanno oo nin abwaan ahi ku kala dhigayo bal siduu jacaylka u dareemay ee uu ugu dhacay:

Nimuu caashaq dhibay baan ahoo ciillan weligiiye,
Anigoo carruurtu i galay cudurka shaydaane,
Culays buu i saariyo xanuun caadi yoon bi'ine,
Cabsi kama qabayn maalmuhuu igu cusboonaaye,
Cid uun baa dawayn" baan is idhi, ciirsi kuu baxa'e,
Cashar ii qora baan lahaa culumo duub wayne,
Ceesaamo gowracay intaan ciid ka faashadaye,
Cishriin tobaan bilood baan ku jiray weel cidhiidhi-yahe
Welina caafimaad kuma leddoo waygu caynkiiye,
Intuu ii cadhoodtu dhammaan cunay dubkaygiiye,

Casho iyo quraac buu ka dhigay cudadahaygiiye,
Cadkii waa ka feensaday laftii coodi iyo jiidhe,
Ciriqyadii wadnaha buu xidhoon dhiigga celinayne,
Nafta waygu caascaasiyo, ceeshkii iga gooye,
Caanmaha maray tahay dhadhamo wayga celiyaaye,
Cunahaba wixii sii maraa waa candhuufada'e,
Cagtaydaa tallaabada gabtoo caajis baan ahaye,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sidii ruux cirroola ah yaan tukubo culus ku luudaaye,
Cidhba-jeedis mooyee durduro waan ka caal-dhigaye,

Waxbase yaan calaacalin rag waa kii calool adage,
Middii cudurkan igu beertay baa ii cadaawa ahe,
Anigaa naftaydii casilay Caadil ii qoraye,
Cudur iga fog baan doontay oon caabuq ii hadhine,
Haweenna way ka cararaan nimaan caysh u fidinayne,
Hadba kii cashada siiya bay wada caweeyaane,
Caqli iyo garaadkoodu waa calal nadiifaade,

Haddii uu cirfiid yahay midkii cuudleh bow talinne,
Cadaabtii Ilaah iyo nabsiga kama cabsoodaane,
Cilmi baan ogayn jeer in ay caaska geliyeene,
Middii calanka loo saaray baa caydhisoo dhimaye,
Inuu caashaq naageed dilaan cidina moogaynne,

Aniguna halkaan caawa aal cidhibla' weeyaane,
Ka carraabay dunidoo naftani waygu cidhibriiqe,
Noloshii cirkay iga tagtay iyo caadka hoos mara'e
Cisraa'iil wuxuu igu wadaa ceelkii aakhiro'e,
Teer iyo carruurnimo middaan daba cataabaayey,
Haddii ay i caawini lahayd cudur ma jiifeene,
Cidlada iyo jirradu waa darteed caawa aan qabo'e,
Ninkii caashaq naageed qabow, xidho calooshaada,

Gabadhii u golangashay wiilkii geela xergeeyey, markuu geelii kasoo noqday waatii ku lahayd:

> ***Badhidaad ogayd iyo***
> ***Cududihii ballaadhmaa***
> ***Waxa jaray baruurtii***
> ***Baahidii aan kuu qabay***
> ***Kolkaad Bolo xergaysay***

Dadka jacaylka isku arkay calaamadihiisa ee uu laf iyo jiidhba isaga baxay, ayaa malaha dhab u dareemay jacaylka, waa sidii Abwaan Dheeg:

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

"Ma salguuro caashaqu
Ani sahal ma igu helay
Intuu soortii iga jaray
Suun adag ma igu xidhay
Ma i saaray heegada
Ma salguuro caashaqu
Ani sallow ma igu riday
Sambabadiyo feeshaha
Intuu surimo kala baxay
Ma ku soofay xididada"

Bal aynu eegno Abwaan Maxamed Cabdi (Wabax), oo sharraxaya astaamaha iyo calaamadda lagu garto qofka wax jecel. Wuxuu yidhi:

Inanyahay cishqqigu waa beliyo, caashaq kuu yimide
Waa cudur lafaa kaa galiyo meel aan la caddaynee
Waa cudur calooshiyo wadnaha, caalidh ku abuure
Waa cudur cuntada kaa jariyo, ceeshka oo idile
Waa cudur qofka uu caawa helo, lala cajiibaaye
Waa cudur hurdada kaa ceshoo, aad caddibnaataaye

Intaasoo calaamadaa ayuu caashaq leeyahaye
Cilmi waa isagii hooyey ee, Layla ciid dhigaye
Ana caynadooddaan ahoo, ciriq i naafeeye
Cisho noolba adigaa qalbigu, kula caweeyaaye
Cadceed subax la moodyeey, middaan caashaqaad tahay
Goortaan codkaagaa maqlaan, aragga u cawdaaye
Caadil baan ka tuugaa indhahoo caadka laga qaado

Cuddooney tallaabada markaad aayar celineysid
Cududdiyo habbooney markaad cagaha qaadaysid
Xuural-ceyntii aakhiro ayaan kugu ciseeyaayee
Carrigaan ku noolniyo ilaa cidhifka Nayroobi
Waxa inan caddaan iyo madaw, Caadil ku abuuray
Cindigayga maan gelin mid kale, waad ka ciil bixiye
Ogobeey naf kuu ciirsatoo, caajistaan ahaye

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxa iyana sidan kale u dhigay kuwo uu jacaylku dhex jibaaxay oo ruuxay jiif iyo joogba u diideen u sharaxaya waxa ku dhacay, iyagoo qof farriin ugu dhiibaya kuna leh:-

Saalaxaw adaa soconayoo, qaatay salabkiiyee
Salaama alle yeelyaw haddaad, Saaxil nabad gaadho
Sawd yar oon ku faro iiga gee Saynab waad heliyee
Saqda dhexe habeenkii hurdada, waan ka salalaa dheh
Soortana ma cunoo aawadaa, saa'im baan ahay dheh
Saddex goorta aan qado ayaan, subax quraacdaa dheh
Waxaan sarara weynaa baryahan, samay ka dhuubnaa dheh
Saraawiishu waa iga bateen, igu samaysnaa dheh
Hadba aniga oo soconayaan, sare u qaadaa dheh
Salaan qudha haddaad soo dirtoo, subax la ii keeno
Adigoo sariir ila hurdana, kama sokayseen dheh
Ma samrine sidii aad ogayd, waan ku sugayaa dheh

Haddaynu ku soo dheeraannay oo aynu ka hadalnay qofku siyaabaha uu u dareemo jacayka, intaynaan ka bixin bal aynu kusoo khatinno maqaalkan oo si cilmiyeysan u eegaya wixii aynu ka hadleyney:

Qofka sida dhabta ah wax u jeceli waxa uu u ilaaliyaa una sharfaa lammaanaha kale ee uu jecel yahay si ka badan sida uu u daryeelo naftiisa.

- Lammaanaha sida dhabta ah uu jacaylkiisu kugu duulo waxa uu noqdaa ka u danbeeya ee aad ka fekerto habeenkii iyo ka u horreeya ee aad ka fekerto subaxii.

- Qofka jacaylka rasmiga ahi haleelaa si dhab ah ayuu u ilmeeyaa, mar kasta oo uu xasuusto lammaanaha uu u jecel yahay, isaga/iyada.

- Mar kasta oo uu soo dhaco tilifoonkiisu/keedu iyada/isaga waxa uu jecel yahay/jeceshahay in uu noqdo/noqoto codkii lammaanaha uu sida dhabta ah u jeclaa.

- Mar kasta oo uu soo galo qol ay dad badani ka buuxaan waxa uu ka baadi doonaa oo uu indhaha la raacaa in uu indhaha qac ku siiyo muuqaalka aragtida lammaanaha uu jecel yahay ama ay jeceshahay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

- Haddii uu ogyahay halka uu joogo lammaanaha uu jecel yahay masaafaday doonto ha jirtee wuu u boholyoobaa waanu u tagaa.

- Haddii lammanaaha aad jeceshahay uu la socdo rag ama dumar kale, waa inuu muuqaalkiisu/muuqaalkeedu uu si gaar ah kaaga soocnaadaa bidhaan ahaan masaafo durugsan.

- Marka uu ku soo eego lammaanaha aad jeceshahay ee indhahaagu ay qabtaan indhahiisa waad naxdaa, garaaca wadnahaaguna si aan caadi ahayn ayuu u sii kordhaa.

- Mar kasta waad ka fekertaa, wax kasta oo aad aragtaa way ku xasuusiyaan jecaylkiisa/jacaylkeeda, waxaanad jeceshahay hadal haynta iyo warka lammaanaha aad jeceshahay iyo maqalka codkiisa/codkeeda ilbidhiqsi kasta.
- Qofka jecaylku biyo dhigaa kuma dhiirado in uu si caadi ah ula hadlo lammaanaha uu jecel yahay, mar kasta oo uu la hadlana waxa uu dareemaa firka-nax iyo qajilaad saa'id ah kalgacal awgii.

- Meel kasta, xilli kasta iyo wax kasta oo uu qabanayo'qofka wax jeceli waxa qalbigiisa ka dhex guuxa lammaanaha isaga/iyada uu sida runta u jecel yahay.

- Qofka sida dhabta ah wax u jeceli waxa uu bilaabaa dhegaysiga heesaha iyo miyuusigga dabacsan ee ay ku jiraan ereyada macnaha leh ee ku dhibca qalbiga ee ku saabsan qiimaha, qaddarinta iyo xushmadda jacaylka.

- Qofka sida dhabta ah wax u jeceli waxa uu mar kasta door bidaa in uu ka maqlo lammaanaha kale ee uu jecel yahay in uu ka badheedho jacaylka oo uu ku yidhaahdo *"waan ku jecelahay"*.

- Hadii uu ku hayo jacayl dhab ahi aragtida indhahaaga iyo qalbigaaga waxa aad ku lammaanaysaa lammaanaha aad sida xaqiiqda ah u jeceshahay. Mar walbana waxa aad jeclaataa ilaa xad ag-jooggiisa, muuqiisa, codkiisa iyo sheekadiisa isaga/iyada.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

- Uma quudho qofka wax jeceli lammaanaha uu jecel yahay been, khiyaamo iyo quudhsi, guusha horumarka noloshiisana waxa uu arkaa isaga oo hanta ku guulaysiga kasbashada jacaylka lammaanaha uu jecel yahay.

- Waxa uu jeclaadaa in makhluuqa dunida ku nool oo dhammi ay la jeclaadaan, lana ammaanaan lammaanaha uu jecel yahay.

- Wakhtigiisa qaaliga ah iyo naftiisaba waxa uu u huraa lammaanaha uu jecel yahay hadh iyo habeenba.

- Jacaylka dhabta ahi ma gaboobo, ma gamashiyo, ma gudho, ma gaaggaxo, ma gabnoobo, mana guuro abidkii. Qofka wax jecelina kama qanco yoolka jacaylkiisa, wakhtigay doonto hala gaadhee, mana garawsado wax kasta oo xumaan ah oo liddi ku ah lammaanaha uu jecel yahay ha yaraato ama ha badnaatee. Xumaan kasta oo uu leeyahay lammaanaha uu jecel yahay waxa shiikhiya jacaylka baaxadda leh ee uu hayo.

Akhriste, haddaad dareento asbaabahan jacaylka lagu garto miyaanay habbooneyn inaad sheegato inuu jacayl ku hayo?

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sideed ku ogaan kartaa qof ku jecel

Jacaylku waa rabitaan ku beerma qofka, waxaana qof kasta oo wax jecel lagu gartaa astaamo gaar ah oo inta badan soo ifbaxa xilli dambe oo jacaylku biyo dhigo qalbigiisa. Ragga ayaa uga nugul dumarka qarsashada jacaylka.
Had iyo jeer dumarku waxay ku dedaalaan inaan si sahlan raggu u o'gaan sirahooda jaceyl oo iyaga oo qudha ay ku koobnaato.

Haddaba astaamaha lagu garto gabadha ama ninka wax jeceli aad ayay u fara badan yihiin, laakiin waxaan qormadeennan ku tibaaxaynnaa dhawr qodob oo gabadha ama ninka wax jecel lagu garto.
Maahmaah English ah ayaa tidhaahda "True Lover Don't Say Love Each Other, But They Know They Do" oo ay macnaheedu tahay labada qof ee sida dhabta ah isku jeceli lagamaba yaabo inuu ku yidhaahdo *"waan ku jecelahay"* midba midka kale balse wey ogyihiin waxaa ka dhexeeya, waxanay isku dareensiiyaan ficillo aad ka garan karto qofka sida dhabta ah kuu jecel (action)

1- Qofka ku jecel si rasmi kuuma fiirin karo, deymada ayuu kugu xadayaa, marka aad dhinac kale u jeeddana aad buu kuu fiiriyaa
2- Wax kastoo aad neceb tahay qofka ku jeceli wuu ka fogaanayaa adiga oo aan dhihin ka fogow
3- Wuxuu jecelyahay inuu kuu soo dhawaado marka aad meel wada joogtaan
4- Dadka adiga aad jeceshayna wuxuu jecelyahay inuu ixtiraamo waxa aad jeceshayna inuu jeclaado. Waxaa la yidhi nin ayaa jeclaa gabadh ay deris ahaayeen, maalin kaste waxay wax ku tumi jirtay mooye. Ninkii baa markuu dhintay gurigiisa waxaa laga helay 40 mooye. Mid kale ayaa la weyddiiyey qorraxda ka warran iftiinkeeda markaas ayuu yidhi *"marka heblaayo (gabadha uu jecelyahay) gurigeeda ay qabato ayay ugu iftiin badantahay"*
5-Mashquul kasta oo uu yahay kama maqnaatid xusuustiisa. Wuxuuna ku siiyaa naxariis badan iyo xannaaneyn. Dantaadana ayuu ka hormariyaa tiisa.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hababka La Isu Dareensiiyo Jacaylka

Waa qodob ay dad badani quudarraynayaan, kuwaasoo uu qarqiyey jacaylku haddana garan-la' qaabkay wax ugu gudbin lahaayeen ruuxan qalbiga ruxay ee sidii falaadhaha qorraxda jacaylkiisu u qabtay.
Waa hubaal inaan idiin marin doono kelmado kasoo maaxday rag muddo isku hawlayey arrimaha jacaylka, oo ku masaafaysan habka mudanka ama mudantay naftu muhatay aad ugu macneyn lahayd dareenkan laabtaada mayeyga iyo miiraaluhu ku dhex heleen.

Waxa jira afar qodob oo qofka lagu dareensiin karo jacaylka:

- ✓ **Ficil:**-inaad noqoto qof ballanta usoo degdega si firfircoonna usoo bandhiga dareenka laabtiisa ku jira, markastana dhoollacaddeyn iyo isku dara weji-furnaan.
- ✓ **Waqti:**- inaad qofkaad jeceshahay agtiisa wakhti badan ku qaadatid, u hurtid oo aanad noqon ruux markuu u yimaaddaba degdegaya, ee aad wakhti usoo qaadato.
- ✓ **Kelmad:**-markasta inaad qofka kula hadasho kelmadaha dareenka kiciya ee jacaylku ku dheehan yahay iyo kuwa ammaanta ah.
- ✓ **Had-yad** : inaad qofka u gayso waxyaabo ka farxiya oo aad hadyad ahaan u guddoonsiiso

Qosol hiillimaad noqay.
Qosolku waa qaab kale oo la ogaaday in qofka lagu dareensiin karo jacaylka, siiba dumarka, taasoo dhawaan daboolka laga qaaday daraasaddan lagu sheegay in dumarku ragga ka qosliya ay ka jecelyihiin kuwa kale,

Qosolku wuxuu muujiyaa qalbi furnaan, dumarkuna aad bay qosolka ugu soo baxaan Soomaaliduna waatii hore u tidhi:
"Hablaha waa lala qoslaa
Miyaa lagu qayliyaa?

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Ninku marka uu kulanka ugu horreeya la yeelanayo gabadh qurux badan oo uu damac ka hayo, waxa ugu horreeya ee ninku ka fikiraa inuu gabadha ku daraan-dariyo waa xagga lebbis-qaadashada iyo inuu uga warramo qisooyin xul ah oo astaan u ah raggannimadiisa iyo heerka fiican ee uu ka taagan yahay shaqada uu hayo, laakiin arrimahaas oo dhammi uma dhigna qosolka oo ah hab si sahlan usoo jiidi kara qalbiga gabadha.

Gabadhu haddii ay jeceshay ninka quruxda ama xarragada badan, waxay toban laab ka jeceshahay ninka ka qosliya. Khubarada nafsigu waxay sheegeen in xiisaha iyo tamarta uu qosolku gabadha ku abuuraa uu ka awood badan yahay ka kalmadaha haasaawaha ee dabacsani gabadha ku abuuraan.

Dadyow kale, ayaa iyaguna daah-furay qaabab dhowra oo qayb libaax ka qaadan kara habka qofka loo dareensiiyo jacaylka, iyagoo sidan u dhigay:

Go'aan-qaadasho adag, nafta dhiirri geli si aad ugu fogaato baqdin, waayo baqdintu waxa ay keeneysaa in aad la laabato go'aan-qaadashadii aad u tallaabo qaadday.

Is Xakameyn, waxaa la ogaaday in qofka loo bandhigay jaceylka in aanu durbadiiba aqbal la imaan doonin. sidaasi daraateed, waxaa habboon in nafta la xakameeyo, lagana ilaaliyo in ay quus istaagto oo ay rejo-beel la kulanto.

Hadal Geesinnimo Leh. si karti leh oo aad isugu taagto adeegsiga sifeynaaya jaceylkaaga baaxadda uu le-eg-yahay, haddii kale waxa uu ujeedka noqon karaa in hadallada qaar ay keento laba labayn iyo laba bogleyn qofku dareemo. Mana habboona taasi in ay dhacdo xilliga aad ku gudo jirto sheegashada jaceylkaaga. Mar walba oo aad adeegsato hadal aan lagu marganayn waxa ay keeneysa fahan qoto dheer iyo dareen nafeed oo aad qofka ku soo jiidato.

Fiiro Dheer. hadalladaadu waxa ay u baahan yihiin in aad u fiirsato, waayo qofka aad u bandhigtay jaceylku waa mid dib u milicsan doona hadalkaaga. Sidaasi si la mid ah adigana waxaa kula gudboon in aad furto laabtaada, si aad u hesho hadalladii kaaga yimid qofka aad kala xaajootay jaceylka, isla mar ahaantaana markaa ka dib aad u milicsato hadallada kaaga yimid qofka kale.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Rejo: Rejo wax aan ku dhisneyn ma laha natiijo, inkastoo bini'aadamku ay aad u neceb yihiin waxyaabaha qabyada ah, taasina ay keento in markiiba uu u kuur galo natiijada biya-dhaceeda. Sababtoo ah waxaa suuratgal ah in loo bandhigaha jaceylka uu hadalkiisa ku gaabiyo waan ka soo fiirsanayaa. Ka fiirsigaasi oo lagu saleeyo ka rejo-qab natiijo leh mid lagu farxo.

Ka Gun Gaadhid: Hadallada qaar ma habboona in aad isu tusaaleyso waxa loo yaqaanno male amase maleyn. Waa in qofka carrabkiisa laga hubsado waxa aad tuhunto amase hadallada qaar aad u fahanto ujeeddo kale, haddii aad la kulanto arrimahan oo kale weydii qofka adigoo leh *"sidaas maxaad ula jeeddaa?"*. Waana hubaal in aad heli doonto jawaabta saxda ah.

Intiinna la soo deristay jaceyl ugub ah, sida ugu fudud ee aad u sheegan karto jaceylku waa mid u baahan taxaddar fara badan iyo xaqiijin in gacanta lagu dhigo nafta aad jamatay. Illeen jaceylka daawadiisu waa qofka aad jeclaatay. Sidaas darteed, miyaanay habbooneen in laga fekero habka ugu wacan ee jaceyl loo soo ban-bixin-karo, si loo gaadho jaceylka dhabta ah ee aan duugoobaynnin, sla markaana waa mid ka fog waxa loo yaqaanno hammiga oo aad ugu eg jaceylka.

Jacaylku waa dab, qofkaad jeceshahayna waa biyo, markaa haddaad dhimbiilaha jacaylka ku dhex deyso jidhkaaga adiga uun baa ku gubanaya qofkii aad jeclaydna waxba kaama oga. Qofkaan jecelnahay waa naqaan, laakiin qofka na jecel ma naqaan, waa hubaal inaanad aqoon qofka ku jecel illaa uu kuu sheegto.

Sheego jacaylkaaga maanta maxaa yeelay shalay way tagtay berrina mooyi. Isku dey in marka aad dareento jacaylka aad xagga hore ka sheegato, waayo jacaylka waxaa baabi'iiya waqtiga ee wakhtiga ha sugin, taladuna waa mar aad gaadhi waydo mar ay kula gudboon tahay iyo mar aad garan weydo wakhtiguna waa sidaa.

Saban tegay, midkii soo socdiyo
Saaka waxa jooga
Saddexdaa wakhtibaa xaal adduun
Lagu sifeeyaaye

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Soo noqod ma yeeshaan wixii
Saatirow tagaye
Saa dambe iyo berrina waa suaal
Saaidoo maqane
Waxay taladu kuu suubban tahay
Subaxaad joogtaa

Soomaliduna hore waxay u tidhi: *"waxaad maanta qaban karto berri looma dhigto"*.
Dawanku maaha dawan ilaa aad garaacdo,
Heestuna maaha hees ilaa aad ku heesto,
Jacaylkuna maaha jacayl ilaa aad sheegto.

Akhriste qofku caalimul qayb maaha, oo waxba kama oga kurbada ku haysa ee u sheeg jacaylkan ku asiibay qofka sababtiisa leh, oo sidii Aamina Cabdillaahi Xirsi waxaad tidhaahdaa:

Hadal ii dahsoonaa
Dadka aan ka qarin jiray
Oo ay dani i tidhi "sheeg"
Diirka aan ka qaadee
Ma u tahay diyaar
Mise waaban daayaa
Ha i dilo jacaylkuye?

Ninkii heesayey ee doonayey inuu jacaykiisa dibadda usoo saaraa waakii lahaa:

Inan yahay ma sheegaa
Arrin igu shidnaa iyo
Sheeko aan qarsanayoon
Kaa shisheynnin adigaba
Mise waan shakaalaa
Intaan laygu soo shirin
Shib-baan ka idhaahdaa

Inantiina waxay ugu ku jawaabtay:

Adigoon shiddaba gelin
Hadday kuu shirraban tahay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxba ha u shin tirinnine
Shakigaba ka saaroo
Aan kala shidhaynnee
Ha shaqline ujeeddada
Warka shaaca ka caddee

Ninkii tobanka sano inanta jeclaa

Bal sheekadan aan wada eegno taasoo aad u khusaysa dadka jacaylkoodii lasoo habsaamay ee ka dib dhacay.
Wiil xilligii guurka gaadhay, waxna iska haysta oo aan jeebku welwel ku heyn, ayaa waalidkii iyo ilmaadeerradiiba u sheegeen inuu iska guursado, maadaama oo uu haysto waab uu soo geliyo iyo wax uu siiyo oo Ilaahay labadaba weelka ugu shubay.

Haddaba wiilkan oo haysta dukaan xaafadeed, dadkuna aad ugu xidhan yihiin ayaa wuxuu jeclaa in muddo ahba gabadh ka adeegata tukaanka oo macmiil u ah, laakiin in badan ayaa ninkan lagula taliyey inuu guursado ilaa uu ka gaadhay in uu dhibsado oo uu hadalka ku celiyo. Iyaguna ay dib uga shaaceen inay weydiiyaan mar dambe. Gabadha uu wiilku jeclaa waxay degganeyd guri in door ah u jira dukaanka, guriga iyo dukaanka waxaa u dhexeeyey sees ay soo ag marto marka ay adeegga soo doonanayso.

Wiilkuna wuxuu fadhiisan jiray sees kaa marka ay dukaanka kusii socoto iyo marka ay kasii socotaba, si uu socodkeeda iyo sida ay tallaabada u qaadayso u daawado oo uu indhaha ula sii raaco dhumucda iyo dhererka Ilaah u dhammaystiray. Lama uu hadli karayn inuu daawado mooyaanee, ileen awood baan jirin xaggiisoo afkiibaa juuqda gabay. Wuxuu noqday sidii ninkii lahaa; *"Dabagaale abeeso dushaasuu ka qabaaye inaad daawato mooyee dibnaha ha u kala qaadin"*.

Haddaba wiilkani wuxuu ku guuldarraystay inuu jacaylkiisa usoo bandhigo gabadhan, isagoo muddo ku siman 8-sano halkaasuun inanta ka daawanayey. Wuxuu gabadha halkii ka eegaba maalin maalmaha ka mid ah ayuu go'aansaday in jacaylkan uu ka gami' la'yahay uu gabadha u galgala bixiyo,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

iyadoo laga soo gudbay wakhtigii u jeclaaday ku dhawaad 8-sano,. Intii uu la gabbanayey jacaylkana uu wakhtigii galbaday.
Goor ay fiid ahayd ayuu soo abbaaray halkii inanta gurigoodu ahaa, albaabka oo ganjeel ahaa ayuu dhawr jeer garaacay, dabadeedna inan yar ayaa ka furtay, waxaanu weydiiyey *"heblaayo guriga maku jirtaa?"*. Inantii yarayd waxay ugu jawaabtay *"iyada iyo odaygeedi iyo laba carruura oo ay dhashay waa kuwii safar u baxay"*.

Ninkii waxay ku noqatay af-kala-qaad, amakaag iyo fajac ilaa uu rumaysan waayey (tollow gabadhu ma meeshay ugu xidhnayd). Markii dambe wuxuu isku qanciyey inaanay tan yari waxba ka ogayn ee uu guriga mar labaad kusoo noqdo, inyar ka bacdi ayuu haddana soo garaacay albaabkii. Waxaa ka furtay islaan waayeel ah una sheegtay Qamar iyo odeygeedii inay dhul kale u xagaa baxeen. Ninkii wuxuu ga'aansaday inaanu dib ugu jihan xagga dumarka.

Beer laxawsiga

Beerlaxawsigu waa nooc ka mid ah soo jiidashada qofka aad jeceshahay kusoo xero gelinayso oo aad ugu muujinayso nuglaan iyo maslaxaad. Dad badan ayaa calaacal iyo xod-xodosho aan xad lahayn is yidhaa ku muujiya jacaylkiina.
Ciil-kaambi badanaa ruuxaad carrabka u laallaalidisay oo cammuudda kuu dhexgalay; waa cajiib. Laakiin malaha beer laxawsigu waa hab mararka qaarkood hayinka kuugu fura halkii aad doonaysay. Inkastoo Cilmiba qadaw iyo buuro isku qaaday si uu mar uun Hodan jacaylkiisa u dareensiiyo ileen wixii laysku qoruun baa is helee waakii lahaa:-

Intaan adiga kugu gooni ahaa
Geed haddaan la hadlaayo
Ama aan gawaamo qodayo
May gama sanaadeen

Haddaba ruuxba sibuu wax u beer laxawsadaayee, dadka qaar waxay u sheegaan qofkay doonayaan, in jacaylku kor iyo hoos ku kaamilan yahay jidhkooda, haddii kaaha adduunyada iyo kulli waxa yaalla lasoo hor dhigana aanay isaga ku doorsadeen.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxa gala dhaqmaatiga
ifka dheemman iyo luul
luguu dhaafsanmaaye

Iyagoo ku leh haddaan isu soo dhawaannana:

Sidii ruux dhallaanoo
Hurdo looga dhaartaan
Dhinacyada wadnaha iyo
Laabta kugu dhawayn-laa

Qaar kalana amaan bay ku qarqiyaan oo waxay yidhaahdaan:

Wali dunida may dhalan
Dhabta hooyo kuma qaban
Gabadh kuu dhig maysoo
Isu dheelli tiran oo
Kugu dherer sanaysee

Kuwo kale ayaa iyagu ku beer-laxawsada hantida iyo maalka, iyagoo ugu dur-baan garaaca in giniga lacageed ay ku ganbin doonaan, nolosheedana sare u qaadi doonaan hadday tidhaa marxabba iyo guddoon;

Waxaan ahay maal qabeen
Mood iyo noolba lehoo
Muftaaxa adduun hayee

Anaa mariyo xariir
Mariin dahaba kuu hayee
Ma itidhi marxabbiyo guddoon

Abwaan Hadraawi waakii inanta ku lahaa isagoo ku beerlaxawsanaya inay maamuus iyo sharaf dunida ku mushaaxi lahayd magaceeduna kor uu noqon lahaa wuxuu yidhi:-

Miyireey dhibtaydiyo
Meeraysi gaygii
Dhegahaad ka maratoo
Hadal mooyi keliyaad
Ma huraan ka dhigatoo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Maya baad ku koobtoo
Il muggeed wax joogiyo
Midig baad ka talisee

Hawraar magooshoo
Ubax iyo man bixisaan
Kugu meherin-laayoo
Marriinkaaga hees iyo
Maahmaaho yaabloo
Min magtii ka culus iyo
Murti baan ka dhigi-laa

Mudan baan u noqonlayd
Dumarkiyo marleydoo
Masallaha jacaylkaad
Maamuli lahaydoo
Gabaygaan madhxinayee
Hore ugu masuugaan
Hugu madhin lahaayoo
Cidi kulama maasheen
Maskaxdaydan curatoo
Malyan kula gudboonoo
Muuqaaga aragoo
Maqlay sheekadaadaa
Ku majeeran-laayoo

Inta gabadh is mooddaa
Masayr kuugu iman layd
Murankaagu dunidiu
Maan dhaaf ku ridi-laa
Kuwa maqasha raaciyo
Ma-kastaa ku baranlayd
Jidka waxad ku marilayd
Sacab iyo mashxaradoo
Miyi iyo magaalaad
Maamus ka heli-layd
Midabbada dhabeesha ah
Qurux daadan maydhee

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Rabbi kugu mannaystaan
Hadba meel ka sari laa
Madaxuu ku socon laa
Mar qofkii dhegeystaa
Meexaanahaygoo
Midho laysku baantaan
Kuu marin lahaayoo
Muqdishoiyo Hargaysaan
Madadaalo waayeen
Hadba mahadnaqaagaan
Mirta dhexe la kicilaa
Gacalkiyo mataanaha
Wedka kala muquunshiyo
Haddii mawdka geeridu
Iga kaa hor mariyaan
Kama aad maqnaateen
Maankayga gelin oo
Magac baad ka dhiman layd

Marti soorka Eebbiyo
Inta melag ag-joogtiyo
Marwadii Rasuulkaan (s.c.w.)
Magan kaaga dhigi laa
Qabrigaaga maansiyo
Murugiyo xasuus iyo
Mahadhaan ku qori laa
Maka iyo Madiiniyo
Malka Maxamed yaallaan. (s.c.w.)
Calan kuugu mudi laa

Dhereg awgii subaggaanu ku meydhannaa!

Waxaa la yidhi waa hore waxaa jiray nin iska hanti yaraa, oo aan xoolo badan jeebka ku heyn, deegaanka hablaha joogaana way ka war hayaan oo hadalka kama guraan. Inuu guur u hawaystana iyada hadalkeedaba dhaaf. Maalintii dambe ileen waa guur doonee markuu hablihii ay isku deegaanka ahaayeen hadal iyo hugunba ka waayey ayuu go'aansaday inuu iskaga tago meeshan hablihii hanti yaraanta ku naceen, oo uu degel ka durugsan ka uu joogo uu

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

gabadh u doonto. Issagoo degta kusii qaatey wayso yar oo subag looga buuxiyey, taasoo laga lulay ri'yo dhowr oo caanahooda muddo bil ah la ururinaayay si ay caagadda u buuxiso.

Ninkii wuu socdaalay, markuu deegaankii ka fogaaday ayuu kusoo baxay goor cadceeddii sii dhacayso gashaanti adhi la joogta, wax la is bariidiyaba salaaddii maqrib baa markaa dhaw. Isna wuxuu fadhiistay meel halkan ah oo aan adhiga ka fogayn, isagoo subaggii caagadda ku jiray ku waysaystay, inantiibaa yaabtay oo ku tidhi *"waxaad ku waysaysaneysaa miyaanu subag ahayn?"*.Wuxuu ugu jawaabay;*"haa weysaad ka hadlaysaayee anagu xataa subagga waanu ku meydhannaa"*. Markii dhawr kelmadood la is weydaar sadayba wuxuu u sheegay inuu doonayo inuu la tago oo gurigoodii geysto.

Inantii waxay sawiratay ninkii subaga ku waysaysanaayey talow xoolahoodu intay leegyihiin, dee-waa waxaan la koobi karin, markaa mayaba haka soo celin. Inantii way aqbashay sidii baanay ku raacday. Allaa xaal og.
Habeenkii waxay guura galaanba markuu gurigiisii gaadhay ayuu ku yidhi; *"reerku aad buu u fogyahay markaa halkan baynu ku nasaneynnaa oo aynu kusii aqal galaynnaa"*.
Saddex cisho markay joogeenna waxay ku tidhi *"miyaynaan gurigii tagayn"*wuxuu ku yidhi *"adeer beeni waatii gurigiinna tiil, runna waa ta halkan taal"*. illeen gurigan uu joogaa waa kii rasmiga ahaa ee uu lahaa, iyana wuxuu ugu sheegay inay kusii nasanayaan. Xoolihii faraha badnaa ee ay sawiraneysayna way ka weyday, iyada uun buu ku beerlaxaw sanayey.

Sheekadani waxay ku dhawdahay ninkii isna xoolaha yaraa ee inanta ku beer-laxaw-sanayey in kadinno (boqolaal) geel ahi dhex tuman yihiin xeradiisa

Kontonbaa ka dhalay geelayaga
Kor u hayaankiiyee
Nirgihiisa lama koobi karo
Keyn hadduu galo'e
Koromada dhex qaadaana
Waa kun iyo dheeraade
An karuurka wada doonanee
Kabaha soo qaado
Ama kadabkeed go'yeey
Kuudud qoladiina

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Markii ay inantii sidii ku raacdey, ee ay aqal galeen ayey nirig mooyee wax kaleba xeradii ku arki weyday. Dabadeedna maalintii dambe ayey weydiisay *"waar kadinnadii geela ahaa meeyey?"*. Isna wuxuu yidhi

Geelayagu haddii la tirso waa toddoba
Saddex way takarisay (dhimatay)
Afar baa tuban xeradee
Maxayba iga tasoobaan nirguhu
Waaba taa qudha'e

Intaynaan mawduucan ka bxin, aynu soo qaadanno halku dhigyo ragga iyo dumarku isku beer laxawsadaan, oo ay qortay gabadh da'yar oo la yidhaahdo Farduus Siciid Dirir, kuwaasoo ka kooban 100 halku dhig oo dumarku ragga ku beer laxawsadaan iyo 100 kale oo raggu dumarka ku beer laxawsadaan. Haddaba, labadan maqaal ee midkiiba ka kooban yahay 100 iyo 100, aynu kasoo qaadano 35 iyo 35 ragga iyo dumarku isu isticmaalaan .

Hal-ku-dhigyada Raggu Haweenka ku Beerlaxawsaan.

1. Sida bunkaad ii qabataa
2. Kurus baad tahay
3. Salladhkaan kaa dhex arkaa
4. Waad soo tuurtay
5. Waa laysku kaa jarayaa
6. Dhuc baad tahay
7. Codkaagu waa maan-qaad
8. Bal-yaan lagu cawryin
9. Yaakhii inteed jirtay
10. Abbaayo macaan
11. Adiga waa na waashay yaakhii
12. Qalbi xanuun aad igu ridday noo
13. Aniga cunto ma cuni kari
14. Yaakhii fiiriya say u taallo
15. Anniga sidii tiin-tiin camal aan kugu jiraa noo
16. Heey tani waa khatare
17. Xaggeed ku noolayd
18. Goormay ku dhaleen(inay mar hore ku dhalaan bay ahayd)

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

19.Way igaga kaa dhegtay
20.Dharkan aad baad ugu soo baxday
21.Waa la yaabay
22.Inaabti waan kaa helay
23.Ma is baran karnaa
24.Waabad i cawartay maanta
25.Way iigu kaa dhantahay
26.Gab iyo rax baan kugu ahay
27.Subag Ilaahay baad tahay
28.Ilko caseey
29.Indho deeraalay (indhaha u roon)
30.Wacaney ma ku sii dhaweeyaa
31.Quruxdaad walaalo tihiin
32.Ninkii ku helaa ayaan leh
33.Inaabti miyaa lagu qabaa
34.Shacnigaagaa isoo jiita
35.Tii lay qoraad tahay

Hal-ku-dhigyada Haweenku Ragga Ku-beer-laxawsadaan.

1. Walaal magac macaan baad leedahay
2. Wiil isku dhacaaya ayaad tahay
3. Magacaaga waad u qalantaa
4. Walaal ma xaas baad leedahay (Ilaahay kolay afar buu kuu banneeyee)
5. Kolley ta ku calfataa waa mid nasiib leh
6. Ninkii wanaagsanaa gabadh baa haysata
7. Kolley hooyadaabaa kuu ducaysay
8. Aqoon yahan baad iila eegtahay
9. Meel laguugu diidaba ma lihid
10.Walaalo wiil kuu eeg walaalo maad tihiin
11.Ma dibaddaad ka timid (ma jannaalaad tahay)
12.Walaal waan kaa helay
13.Imikaaban ku hadal hayey gacalliye
14.Yaakhii waa lagu waayee intee ka dhacday
15.Qof la illaawo ma tihid ilayn way iiga kaa haysataayee
16.Tollow miyaad i fashay
17.Horta maxaad isla macaaneysaa
18.Hoodaadu ma xumee hadalka i deeqsii

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

19. Innamadiina ma adigaa u weyn
20. Baryahan miyaanad waxba cunin waad xumaatee
21. Tallow yaa ii kaa xidhxidha waan ku dhaqaalayn lahaayee
22. Gacalka ,muraayad xidho yaan indhaha lagaa cawryinee
23. Waynu isku macaannahay soo maaha
24. Carruur qurux badan baan kuu dhali lahaa
25. Horta ma ogtahay qayrkaa ayaan codsiyadoodii ka hadhsan waayey
26. Alla ani maa ku nool jacaylkaaga
27. Miyaad fikirtay soo kuwan timihi kugu baxeen
28. Walaal reer dhan baa igu indha kuusha
29. Sayloon baad igu xidhay xalay
30. Oo hadday inani ku jamato ma saasaa loola dhaqmaa
31. Car anigoo kale isoo hel
32. Oo inaabti maxaad iila soo hadli waydey
33. Immikaaban ku hadal hayey gacalliye
34. Nin faraha lagaga gubtay baad tahay
35. Ilaahay igama kaa qaado

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qofka jacaylka kuu sheegta qiimee

Dad badan baa jacaylkooda dib isugu celiya oo ka maaga, kana baqa hadday sheegan lahaayeen in lagu gacan saydho oo ay candhuuftooda dib u liqaan. Hees ayaa ahayd:

Ma ogtahay in badan baan
Kaa aamusnaayoo
Afka kaala baqayee

Haddey sheegaan oo lagu shakaalo malaha ha-ku-shidnaatee iyagoo shirrabaa la qaatay. Haddaba qaar badan oo sheegtay jacaylka inkastoo shoodh lagu celiyey haddana aan ka hadhin ayaa badan;

Inkastood lur iyo hawl
Ha lu go'o mar aad tidhi
Inkastood i lumisood
Igu laadday caashaqa
Laabtaydu kuma nicin

Dadka wax jeceli waxay samraanba, naftoodana ku sabaan inay maalin uun sadkooda heli doonaan iyagoo sheegaya in qofka ay jecel-yihiin uu ku beeray baryootanka iyo calaacalka labadaba.

Boholyawga naftayda beerqaadiyo
Balwada oohinta adaa i baray

Iyaga oo ku tiraabaya inaan jacaylka hayaa ahayn dheeldheel, haddii dhinaca lala qaban lahaana aanay sidan u dhibtoodeen una dhakafaareen; waa tan heestii (*joog iyo fadhiba nacay*), ereyadii Cabdalle Maxamed Carraale (Sag-saag)

Jacayl maaha dheel-dheel
Haddaad jimicsi mooddee
Aday jebiyey goortaad
Jeegaanta fuushee

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sidaa uma jallaadeen
Haddaan nabad u jiifee
Joog iyo fadhiba nacay
Halkaan maanta joogee

Waliba dadka wax jeceli waxay u sheegeen dadkii ay jeclaayeen inay iyaga dartood oomato uga go'een;

Sidii weelka caanaha haddii
Laabta loo culayo
Bal aan soo cidaadee maxaa
Cunaha dhaafaaya
Inaan cadaydo mooyee wax aan
Calaalsho lay diidyee

Laakiin kuwa la caashaqay hadday gacmaha ka laabtaan ka waran? kuwii wax jeclaana ay leeyihiin;

- *Go'i waayee ha i dhigin*
  Gego laga hayaamee
  Kaalay gacanta iga qabo

- *Cosobiyo geelu kama maarmo carroo*
  Cirkiyo wuu ogyahay halkii cosobloo
  Caddaystay inaan ku caashaqayee
  Cidliyo ha igu dhaafin ciirsi-la'

Kuwii wax jeclaa wali halkii bay taagan yihiin, iyagoo kuway jeclaayeenna u sheegaya in iyagana waranku maruun kusoo noqon doono, hees ayaa tidhi:

Ruux walaal ku moodaa
Haddii uu ku weheshado
Ood wacad ku diiddo
Waran kaad ku tuurtaa
Kugu weecan doonee

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Aakhirkiina kuwii la jeclaa, anse iyaga jacaylku wali taaban waa la guhaamay ayagoo ku habaaray in Ilaahay ku rido jacayl halis ah oo la mid ah ka isaga loo qabo dabadeed uu ku qasbanaadoo inuu kii jeclaa caafimaad u doonto.

Waxay leeyihiin:

Cishqigan igu ribaday
Kusoo ridayoo
Kuu raray sidii reera geeddiya

Dhawaaqaygu dhaawac kugu noqoyoo
Anigoon ku dhaqtarin laguma dhayo

Taasoo mararka qaarkood dhacda in ruuxii la jeclaa mar dambe uu kurbada jacaylka dareemo, sida ay Xaliimo Khaliif Cumar (Magool) *Ilaahay ha u naxariistee* heestan inoogu sheegayso

Waataad dhib mudatee
Dhursugaysay maalmee
Hawl kaa dhammaataa
Ii dhalatay caawee
Dhuxushaad ku joogtiyo
Dhamacdii dareemee.

Dheegaw danteennii
Anigaa dhaliilee
Ruuxse dhaawac geystoo
Dhayayaa ma liitee
Ruux taladu dhaaftana
Dhaaxaannu aragnee.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Nabsiga

Nabsigu waa arin qof aad ka mudnayd uu garan waayey, oo haddana isagii mutaysto, ka dibna kuu baahdo.

Nabsiga dhawr waxbaa loo adeegsadaa, laakiin wuxuu caan ku noqday jacaylka siiba marka qof axdi lagaga baxo ama qof ku jecel oo kuu heellan adiga, aad u jiidh nixi waydaa, waa mararka la fisho nabsiga.

Dadka wax jeceli waxay dirsadeen fariin gacan qabasho ah
Xubbigiyo naftaydiyo
Adaan dookha kuu xulay
Nafsi lama xambaartee
Intaan xayga nahay
Een xabaasha lay dhigin
Kaalay xadhigga ila qabo

Qofkii la jeclaa markuu waxba ka dhagaysan waayeyna waa kuwii lahaa:
Iskaa siiyey oo si kugu noqotee
Waan kuu samrayaayee
Nabsiga sido

Waa kuwan dadkii wax jeclaa oo sheegaya inaanay qayb u helin inay kaligood dhibta maraan, laakiin waqtigu uu is beddeli doono:
Dhibta qayb umaan helin
Qori iigumuu dhicin
Inaan qulub jacayliyo
Qiiro caashaq awgaa
Nafta kuu qisaasana
Qalin muu saxeexinee
Qaabku wuu is beddelayaa

Nasiibku hadduu hungoobo
Nabsigu waa hiiliyaa.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylka oo kugu kaliyeysta iyo dhibkiisa

Jacaylku hadduu keli kugu helo, saw kadeed maaha? Saw kurbo adduun iyo kaar kugu mudan maaha?

Abwaan Maxamed Cabdi Wabax waa kii lahaa:
Kubkaa lagaga jabay
Jacaylkaan laysla kaalmeynee
Miyuu nafluhu keli ahaantii
Kob iyo reer oodi

Akhriste,
Daruuraha kalgacalkiyo,
Roob weli ma kugu da'ay,
Duufaanka caashaqu,
Daafaha ma kaa maray,
Adigoon dabbaal baran,
Weli "daad" ma kula tegey,
Dalaq mawgu tidhi ceel,
Webiyada ma kugu daray,

Diin iyo yaxaasiyo,
Jeerta daanka weyn iyo,
Dugaaggii ma kugu kacay?
Dani seeto weeyee,
Daalaadhacaagii,
Ruux aan ku dooneyn,
Marka damacu kuu galo,
Innu geedku daran yahay,
Deebaaq inuu yahay,
Dab inuu ka kulul yahay,
Ma ogaatey daalkii?

Reer xamarku waxay yidhaahdaan iyagoo sheegaya inaan jacaylku keli ku fiicneyn:

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Kow labaa ka fiican
Jacaylka iyo kursigana
Kaalmo la'aan waa lagu kufaa

Haddaan leysla kaalmeyn oo aan laysla qaban saw dhibtu qof gooni ku noqon meyso, suurtagalna maaha in qofkaasi uu la silco, aakhirkana naftiisa uu halaago?

Ninkii Abwaanka ahaana waakii inanta ku lahaa, *"jacaylka caynkan ii galay haddaad igu sii eegto, oo aanad ila qaban inaan adduunka iskaga dhaadhaco ayaa ii dhaanta sidan"*. Wuxuu yidhi

Dahabooy jacaylbaa i dilay, oo i daashadaye
Cishqigaaga duullaanka ahi, weygu soo degaye
Haddii aanad daawayn xubbigu, wuu i dilayaaye
Is dillaacin mooyee wax kale, iima soo dagin

Daawo waxaan lahayn iyo sunbaan, duhur cabbayaaye
Anigoon dakano aadmi qabin, ways deldelayaaye
Is dillaacin mooyee wax kale; iima soo dagin

Nin dayuurad haysta yaan odhan, diililta i saare
Waxay sii daryaantaba kolkay, dawyo sare gaadho
Daruuraha markay gaadho yaan, dab iska soo siinne
Is dillaacin mooyee wax kale iima soo daginne

Markab diririgleyn iyo intaan, doonniyaha raaco
Badweynta marka uu ila dardaro, yaan kasoo degiye
Meel aan dabbaal lagu karayn Dahabooy caynkeeda
Iyo daakhilkaan tagayaa, daacadda Ilaahe
Haddii aanad dawayn xubbigu wuu, i dilayaayee
Isdillaacin mooyee wax kale, iima soo dagin

Malaha qofka jacaylka dhibtiisa arkay ayuu dareenkani u khaas yahee, hadduu kugula soo ciirsado inaad doorkaaga ka ciyaartaa miyaanay habboonayn?

Halkuu xiidku ka seexdo
Dhab u laday habeen baan

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hurdo anigu waayee
Soo tuu heedhe caashaqu
I hagee i kaa baday

Horana waa tii loo yidhi:

- Jacaylka suntiisu waa saddex
- Samaantiisu waa laba
- Sugnaantiisu waa samir
- Siliciisuna waa keli

Bal akhriste, taariikhda dib u raac markaad u fiirsato dadkii hore iyo kuwa dambeba inta tawaawaca, baryootanka iyo qayladooda la maqlaa waa dadka uu jacaylku xanuujiyey kuna kaliyeystay naftooda. Malaha dadka jacaylka libta ka gaadhay iyagu way la aamuseen, in yar oo ammaanaysa qofka ay jacaylka la wadaageen ama badhaadhahooda ka hadlaysa mooyaanee.

Dadkii ugu dhawaaqa dheeraa ee jacaylku noloshooda ku jaan go'ay waxaa ka mid ahaa Cilmi-boodhari, Cali-maax, Cantar iyo Qays. Maadaama dadka uu ku keliyeystay Cilmi-boodhari ugu caansanaa, uguna saamayn badnaa.Bal aynu gabayadiisii mid iyo laba kasoo qaadanno;

Allahayow afkaygiyo sideen aadmiga u eeday
Iftiinka uma soo baxo ninkii, iilka jiifsadaye
Wixii kaa adkaadaaba waa, akhiroo kala e
Waa laygu eemaray cishqiga, inaan ku ooyaaye
Allahayow afkaygiyo sideen, aadmiga u eeday?

Mad-habtaba ma galo ruux hadduu, aammin gooys yahaye
Axdigaad ka booddaa jannada, oodda kaa xidhiye
Adigiyo ashahaaddaadu ways ku, Alla seegteene
Haw oonsan aakhiro waxaad, urursataa yaalle

Nimanyahow dharaar iyo habeen waan dhadhabayaaye
Dhulkuun baan xarriiqaa siday dhiillo ii timide
Sida qaalin dhugatoobayoo geelii wada dhaafay
Dhallinyaro ma raacee kalaan dhaxanta meeraaye
Dhaqtarkaa la geeyaa ninkii dhaawac wayn qaba e
Iyana waygu dheeldheelayaan dhamacda Daa'uude

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Barashada iyo Qoomamaha Jacaylka

Cakuye ciil badanaa
Intaan ciirsanaayey jacayl
Sidii bukaan cudur daashaday
Waanigan cataabee

Ma-yara inta jacaylka is lahayd midhihiisa gooso, ee gacmo madhan uu diray oo ku hungoobay. Sidii ninkii neefkuu qashay siduu ka filaayey markuu noqon waayey yidhi *"waar waxa haraggiisii yaa nagaga cesha"*.

Waa hore waxaa jirtay hooyo wiil ay dhashay hadalkii laga xidhay oo xanuun ka asiibay, waxay Ilaahay u baridaba bal inuu maruun uga hadliyo. Aakhirkii waxay Alle tuugtaba waa uu hadlay, isagoo islaantii dhashay ku leh "Baastarad", islaantiina af-kala-qaad baa ku dhacay ileen waa waxaanay filaynne, ninkii inta badan hadalkiisa ay dhawreysay inuu maanta kelmaddaa ku yidhaa.

Waxaan uga socdaa haddii jacayl muddo aad korinaysay oo ha-jabin ha-dhicin aad lahayd, markuu midha-dhalkiisii gaadho haddii uu jaantaa rogan kugu noqdo saw qodoxi kugu jabtay maaha? Waa halkii fannaanaddii codka tolmoonayd ee Sahra Axmed:

Haddaad geed meel ka beerto
Garaac iyo gudin u diiddo
Gu'yaal badan aad sugayso
Hadduu gooni isu taago
Hadduu guudka midho ku yeesho
Adoo gurashada u baahan
Misana gacantaadu gaadhi weydo

Waxaynu taariikhda ku haynnaa dad badan oo hal mar wax jeclaadey, dabadeedna taayirradii jacayku jar kala laallaadsameen. Hees ay Saado Cali Warsame qaaddo ayaa ahayd:

Jir baa igu helay bannaan

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jar baan ka lushaa khatara
Talaa igu jaah wareersan

Dibna aan u jaman ruux kale qofkii soo jaleecana dib uga jeesta. Fannaan kale ayaa ku heesay:

Haweenkiyo jacaylkaba
Waataan jidh diidayee
Nafta waan ka jarayee
Ha ila jiidhinnee, orod
Kuuma jeedee jaanta qaad

Ninbaan isna sheeko ku hayaa hilibka adhiga ka jeclaa legga, ninkan aad baa looga yaqaannay meel sariibad ah oo uu hilibka kasoo iibsan jiray.
Maalin ayuu soo dhex maray islaamihii sariibadda, isagoo leg doonaya, laakiin islaamuhu maalintaas waxay u hayeen leg wada baruura oo bururaya, iyagoo ku leh *"halkay u dhimataybaan kuu haynnaa maanta"*.

Leggii markii uu iibsaday ee loo kariyey ayuu ku laqan yooday, inyar ka dibna hor iyo dabo ayuu noqday, dhawr cisho markii uu guriga jifay ayuu subax dambe sariibaddii soo ag-maray. Islaamihii ayaa sidii caadada ahayd lagii ugu yeedhay isna wuxuu ugu jawaabay;

Wixii Caateeye leggii ka qabsaday
Wallee cad dambaanu baayicin

Ninkaasi hilib oo dhan leggaasuu u nacay

Haddaba qaar badan oo inaga mid ah ayaa hal qof oo ay jacaylka la jileen dhaawac kasoo gaadhay, dhadhansiga jacayl dambe oo ay dhisaan ay dhib ku noqotay, halkaana iskaga dhaafa jacayl dhammaantii. Sida ay inoo sharaxayso heestan ay qaado hobolada codka tolmoon Binti cumar gacal.

Sidaan uga booday caashaqa
Haddaan nin dambe ba u booyo
Haddaan dib dambe u baroorto
Haddaan Baxsanaw idhaahdo
Aniga belaayaba ha iga raacdo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hees kale ayaa iyana lahayd.
Jacayl waa dhibaato,
Waa ka dhiigga kaa jaqa,
Kuuna diida dheeftee,
Hawlahan ku dhaawacay,
Hawlahan ku dhega tirey,
Hawlahan wax kuu dhimey,
Ha dhibine naftaada, dhaqaalee,
Ha dhoweysan caashaqa

Waa sidaasee dadka qaar ayaa isku dhiibay oo naftooda gacanta u geliyey caashaqa iyagoo leh *"adigu sidaad doonto iigu tali"*. Fannaanaddii codka baxsaneyd ee Kinsi Xaaji Aadan (AHUN) iyadoo u hoggaansamaysa caashaqa, waa tii lahayd:

Caashaqu belo iyo kheyr
Midkuu doono ha i bado

Ruun Xaddi Sabban iyana waxay ku luuqaysay heestan:

Mar hadduu i saanyaday
Halkuu doono caashaqu
Ha i mariyo waa xore
Ana maarmi maayee
Macbuudkaan u magan ahay

Dadkani aakhirkii way ka qoomameeyeen markuu waddo qalloocan oo qarfo ah la maray qadaw iyo buurana ku soo ooday, sida uu ku andacoonayo abwaan kaariye (AHUN) oo erayadan tawaawaca ah ku cabiraya dareenkiisa.

Intii aan bad qabayee
Hawshiisu igu badan
Ha u bixin lahaayaa
Haba baran lahaayaa
Immikoon bestay ahay
Miyeey baroori wax ii qaban

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylka Iyo Xilliyadii Asxaabta.

Jacaylku weligiiba dunida wuu ku lifaaqnaa, dhibaatadiisa iyo dheeftiisuba waxay ahayd mid maalin walba taagan oo la arko. Laakiin xilligii Nebigu noolaa (s.c.w) iyo wakhtiyadii ka dambeeyey, oo dadku diinta hirgalinteeda u heellanaayeen ma odhan karnaa jacaylka ay wiil iyo gabadh is jeclaadaan wuxuu ahaa wax jira oo dadku ku baraarugsan yihiin?

Nin ka mid ahaa fuqahadii toddobada ahaa ee reer Madiina oo la odhan jiray Cubaydillaahi Binu Cabdillaahi ayaa wuxuu jeclaaday gabadh, ilaa warkaasi faafay lana wada ogaaday. Cidina kumay inkirin oo kula may yaabin jacaylkii ku dhacay, qofkii kula yaabana waxaa loo arkay inuu yahay qof qaldan.

Islaamkuna ma xaarantinnimayn jaceylka. Cumar Bin Caas (RC) Waxa uu weydiiyay Rasuulkii Ilaahay (N. N. K. H) *"Yaad dumarka ugu jeceshahay?"*. Waxa uu yidhi *"Caa'isha (RC)"*. *"Raggana yaad ugu jeceshahay?"* ayuu weydiiyay. Waxa uu yidhi *"aabbaheed Abuubaker (RC)*. Sidaa daraaddeed Caa'isha waxa jeclaa kii Ilaahay jeclaa (Xabiibu Alle) waxa uu ahaa markay, caa'ishi xaydka leedahay mid biyaha la caba oo waliba ka cabba halka ay ka cabto isla markaana la ciyaara. Sidaas, ayaanu islaamku jacaylka xaaraan uga dhigin. Laakiin waxa uu diiddan yahay xidhiidhka aan sharciga ahayn.
Rasuulkeennii suubbanaa (NNKH) waxa uu caa'isha ku odhan jiray *"sidaan kuu jeclahay waa guntin xadhig oo kale"*. Way qosli jirtay markasay odhan jirtay *"ka warran guntintii?"*

Waxaa lagu yidhi caalimka weyn ee Yaxye Binu Macaad Alraasi, *"Inankaagu wuxuu jeclaaday hebla"*. Isna waxa uu yidhi *"waxaa mahad leh Ilaaha ku socodsiiyey dabeecaddii aadmiga"*.

Ninbaa isna u yimid Cumar Binu Khaddaab isagoo ku leh *"gabadh baan arkay markaasaan jeclaaday"*. Cumar Binu Khaddaabna Ilaahay raalli ha ka ahaadee wuxuu ku yidhi *"kaasi waa dareen aanad maamuli karin"*

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Diktoor Axmed Al Rabiici oo ahaa caalim reer Kuwayd ah ayaa is barbar dhigaya geerida iyo jacaylka isagoo leh:

"Geeridu waxay timaaddaa iyadoo gantaal oo kale ah. Qofkuna gaashaan kama samaysan karo inuu isu dhiibo maahee.

Jacaylkuna wuxuu yimaaddaa isagoo iska daba-dhacaya sida onkodka. Mana kari karno iska caabbintiisa inaynu isku dhiibno mooyaane".

Markaa akhristiyaal, jacaylku wuxuu ahaa wax saamayn ku leh dhammaan dadyawgii dunida soo maray. Saban kasta iyo saacad kastana la arki jiray ruux la sillan jacaylka iyo mid uu ku xidhay suryo oo la sakaraad ah.

Waxaa lasoo weriyey qisadani inay dhacday xilligii rasuulka (s.c.w). Waxaa jirtay gabadh la odhan jiray Bariira waxayna ahayd addoon, waxaana qabay ninkii la odhan jiray Muqiith oo isna ahaa addoon. Laakiin waxaa dhacday markii dambe in Bariira la xoreeeyo. Kaddib maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa dhacday in rasuulku s.c.w uu arko Muqiith oo daba socda Bariira, ilmaduna ka daadaneyso, ka dib markii uu furay. Sababta inuu furo keentayna ay ahayd markii ay xorowday ayey garatay in uu nin addoon ahi qabo. Markaas buu rasuulku (NNKH) ku yidhi *"kala dooro in aad ninkaaga la joogto iyo in lagu furo?"*, waxaanay dooratay in la furo.

Markii uu rasuulku (NNKH) uu arkay illinta ka qubaneysa Muqiith ayuu ku yidhi saxaabadiisii, waliba Cabdillaahi binu Cabbaas, *"saw lama yaabbanid jacaylka Muqiith jecelyahay Bariira iyo sida ay Bariiri uga qancayso ee ay iskaga fogayneyso?"*. Markaasuu rasuulku (SWT) ku yidhi Bariira *"maad iskaga noqotid?"* Waxayna ku jawaabtay *"amarkaaga miyaa?"*. Rasuulku wuxuu ku yidhi naxariis iyo nabad gelyaba korkiisa ha ahaatee *"amar kuma amrin ee waa iga nasteexo"*. Bariira waxay tidhi *"dan kama lihi Muqiith"* markaa tani waxay daliil u tahay dhibaatooyinka jacaylka.

Waxaa kaloo rasuulka (s.c.w) laga soo weriyey in uu nin u soo dacwoodey isagoo leh *"xaaskeyga ma diiddo oo ma iska celiso qofkii doona inuu taabto waa iska albaab furan"*. Markaas Rasuulku wuxuu ku yidhi *"iska fur"*, wuxuu ninkii ku jawaabay *"waxaan ka baqayaa in ay naftaydu raacdo"*. Wuxuuna rasuulku (s.c.w) ku yidhi *"isaga raaxayso iyada oo sidaas ah"*. Sidaa daraaddeedna waxaynu odhan karnaa jacaylku wuxuu leeyahay halis aad u ba'an oo aan la soo koobi Karin.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Abuubakar Daauud Daahir oo ahaa caalim la wada yaqaan, oo ku caan baxay fiqiga, xadiiska iyo tafsiirka ayaa waxaa ku dhacay jacayl caanbaxay. Wuxuu yidhi Nifatawayhi ninka la yidhaa, *"waxaan u soo galay caalinka oo ku jira xanuunkii uu ku dhintay, waxaan ku idhi ka warran xaaladdaada?". Waxaanu iigu jawaabay "jacaylkii qofkii aad ogayd ayaa sidaa iga dhigay". Ka dibna waxaan ku idhi "oo maxaa kuu diidaya inaad ku raaxaysato adoo karaya?". Isna wuxuu yidhi "ku raaxaysigu waa laba nooc eegmo bannaan iyo ku raaxaysi xaaraan ah, eegmo bannaan miyaa, waa ta sidan i dhaxalsiisay, ka dambana waxaa ii diiday xadiiskii nebiga laga soo wariyey "qofka qof caashaqa ee qariya ee dhawrsanaada sabrana Ilaahay wuu u dambi-dhaafaa jannadana wuu geliyaa".*

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dhambaalka Iyo Jacaylka

Qaybtan waxaynu ku milicsan doonnaa habkii iyo hannaankii ay lahaayeen dhambaalladii la isku diri jiray.

Noloshii hore tilifoonadda iyo aaladaha casriga ah ee kuu sahlaya inaad daafaha dunida la xidhiidhaa may jirin,. Wakhtiyada qaarna waxaa dhici jirtay in qofkii aad jacayl-wadaagga ahaydeen uu meel fog kaa aado sidaad xidhiidh ula samaysaana ay adkaato

Waakan Cabdi Iidaan Faarax Ilaahay ha u naxariistee, oo inoo sheegaya maadaama aan taar loo diro iyo tab kale oo loogu tago, aanay jirin in malaha adigoo dabayl noqdaa ay fiicnaan lahayd:

Haddaan baaxad leeyahay
Badda saw ma jiidheen
Haddaan baalal leeyahay
Berri soow ma duulleen
Soo billic haldhaalay
Barta ay ku nooshahay
Kuma waa bariisteen

Haddaba, si kale oo loola xidhiidhaa maadaama aanay jirin dantu waxay kugu qasbeysaa inaad dhambaalkaaga warqad ugu gudbiso, uguna dhiibto qof tagaya halka ruuxa kale joogo.

Habkan, warqad-qorista aad baa loo xiisayn jiray taasoo mucaashiqiinta ku reebi jirtay xusuus aan sal-guurayn siiba ta qofku fartiisa kusoo qoro oo xiisa gaar ah lahayd. Markay warqaddu qofkaa soo gaadhana si laab furan ayuu u akhriyi jiray isagoo gooni ula baxaya si aan looga soo dhex gelin markuu furo ee uu akhriskeeda bilaabo.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Laakiin mararka qaarkood waxaa jira adigoo dhadhankii iyo xiisihii warqadda u dhaadhacay in ay dadku dhexda kaaga soo dhacaan. Sida ay ku heesayso Fannaanaddii Xaliimo Khaliif Magool Ilaahay ha u naxariistee:

Duhurkii shalaytana
Dunidaan dhib waayinee
Warqadihii lasoo diray
Durbadaan furfuraybaa
Dadku igaga kadiyeen

Ninbaa isagoo ka sheekaynaya wakhtigii hore iyo habka warqadda loo qori jiray iyo sheeko isaga soo martay, wuxuu yidhi:

"Inan/gabadh aanu isku fasal ahayn ayaa waxa ay iisoo qortay warqad. Waxaa warqadda ku sawirnayd shimbir ilmaynaysa oo illini ka qubaneyso dabadeedna waanu la yaabnay.

Markaa waxaan galay sidii aan uga jawaabi lahaa ee aan warqad u qori lahaa laakiin miyaan qori karayaa waxaa la doonayaa in erayo xul ah oo xawaashku ku badan yahay la qoro, isha iyo qalbiguna isku si ugu qushuucaan. Inamo aanu isku galaas ahayn ayaan la kaashaday, markii aanu warqaddii dhammeystirnay ayaanu u gudbinnay inantii.

Iyana jawaabtii dambe hablihii galaaska ayey kala tashatay sidiibaana sheekadayadii galaaskoo dhammi ku ogaaday'.

Haddaba dadkii isku boholyoobay ee kala baaday, meel ay iska beegsadaanna aan wada joogin ayaa ugu badnaa dadka waraaqaha isku gudbin jiray.

Ilaa heer ay gaadheen in ay si riyo ah dhambaalkii jacaylka ugu dhiibaan shimbir, taasoo baalasha kala baxsaneysa una boqoolaysa ilaa baraday inantu ama inanku ku noolaa. Iyadoo dhambaalkii si baxsan ugu dhiibaysa:

Waxay leeyihiin:-

Hud-hudyahaw adigaa hawada marayee
Haweeya hadal ma iga gaadhsiin

Shimbiryahaw dabaylaha
Daruuraha dhex marayaa

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Daayinkii ku uumaa
Orod kungu daw galay
Anna inaan dilanahay
Dakharradii jacayl qaba
Deyr kaama saarnoo
Dushayda waad ka ragtaa
Abidkaa ha iga dagin
Ku dagaali maayoo
Waxbaan kuu dirsanayaa
Warqaddaa daboolanne
Dusha sawirku kaga yaal
Dawadii qalbiga
Degdeg iiga gaadhsii

Abwaan Maxamed Cabdi Wabax waa tii inan uu jeclaa ka dhooftay, in muddo ah waa kii aan tilifoon ka helin. Wuxuu dhawraba habeenkii dambe ayuu ku riyooday shimbir dul taagan oo ku leh *"iska warran?"* Isna wuxuu is yidhi *"waar shimbirkanba maad inanta dhambaalka ugu dhiibtid illeen isagaa dhul fog iskaga gooshee?"*.

Waxaanu u dhiibay warqaddii isagoo sii taban-taabiyey. Markuu u tilmaamayey sifaha inanta iyo farriinta uu tebinayaa caynkay tahayna waa kii lahaa:

Middii dhiigga miirtee qalbiga, iga dhex maaxaysay
Dhaawaca middii aawadeed, dhuuxu iga daatay
Dheydiyo middaan aawadeed, dhuuniga u diiday
Goortaan u dhuubtoo cuntadu, ii dhadhami wayday
Iga dhooftay inantii wadnaha igaga dheehneydee

Adigaa dhul dheer tegi karayiyo meel aan loo dhixinee
Daruuraha adigaa dhaafa oo miig ka orod dheere
Adigaan dhaqsaba kaa rajayn, dhaymo daawo lehe
Shimbiryahaw dhambaalkayga qaad dheygag bay dilaye

Afrikada tan dhaw maaha iyo Yurub dhankeediiyee
Dhabbihii new York yaad baalka sii dhiganee
Sawirkeedii Ddhool waa codkoon kuu dhammeystiro
Dhoombir naaxday iyo lama doonto dhererka qaarkiise

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dhumucda iyo jidhkeeda waad, dhidid toontaayee
Waagoo dhalaaliyo cadeed, dhalatay weeyaanne

Dhabannadoo hillaaciyo afkoo, dhuxulo meygaaga
Dhexdoo madaga timahoo dhegtiyo, dhaafay dheberkeeda
Suniyaha sidii loogu dhigay, waygu dheertahayee
Dhan loo dayaabaa Laylaa ka dhigan, dheemman iyo luule
Haddaan dhagarta gaaladu beddelin, dhawrsan waad heliyee
Dhaayuhu markay kuu qabtaan, dhiirri hadalkaaga
Dhunkashada salaantiyo markaad, booqashada dhiibto
Waxaad odhan dhambaalkaan wadaa, dhaxalgal weeyaanne
Bal dhagayso Laylaay warkaan, kuu dhammaystiriye

Dhagahana u furo hadalku waa mid aan la dhaadaynee
Nin baa dharaarahan cishqigu awaadaa dhibay dheh
Ninbaa u dhaw oo qabriga dhinac ka saarnaa dheh
Dhawr bari ninbaan aawadaa dhuunigii cunin dheh
Dhab markuu u seexdaa, hurdada laga dhirbaaxaa dheh
Naftii dhimashada laga baajiyaa maaha dheel dheel dheh
Dhaqtarradu ma daawayn karaan, ruux jacayl dhibay dheh
Maxaan Maxamed ugu dheef ceshaa dheygag baa diliyee

Shimbirkii markuu farriintii geeyey ee uu inanta u dhiibay ayuu soo noqday isagoo leh:

Maxamadaw dhambaalkiyo, warkaad aniga ii dhiibtay
Markaan dhuuxay maansada qalbigu dheeli laba jeere
Dhafoorrada adoo haysta oo, dheygag ladi waayey
Waataan dhaqaaqoo hawada, dhiibshay baallaha'e
Dhalan dhoolka awgaa u tagay, dhulaan la gaadheyn'e
Dhabbihii New York markaan, dhab ugu laafyooday
Dhinacyada markaan eegayeen, uunka wada dheehday
Midda dhiiga miirtay indhuhu, dhab u jalleeceenee

Waa dhool guyoo hooray iyo, dhibic daruureedee
Wali dhaqankii gaalada mabaran, dhaban wanaagley'e
Dhaayaha intaan saaray dumar, waa u dhag roontahay.
Dhunkashada salaantiyo markaan, booqashadii dhiibay
Iyadoo sideedii u dhigan, xarafna ii dhuuban

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dhab ku siiyey sheekada qof xuni, kuuma dhiidhiyo'e

Dhayal hadalkii uma qaadan iyo, waliba dheeldheelee
Waxay tidhi dhambaalkaad waddaa, waa mid igu dheere
Dhuuxiyo laftuu iga galoo, dhaawac igu reebye
Haddii aanan dhiman oo xabaal, dhinaca lay saarin
Dhoobada haddaan laygu ridin, Maxamed ha i dhawro

Abwaan Axmed Aw-Geeddi isna waa kii tukaha ka waraysanayey inan joogta jabuuti oo markaa uu jeclaa:

Adigaa Tukayahow, Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey, Turuwaa,
Toorin bay u qortoo, Naftaydii toshoo,
Sidii tooja geela, Waan tig-tignee,
Ballanbay ku tagtee, Ha taabo gashee,
Inaad toyotaa, Tu waajiba,
Adigaa tukeyahow, Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey, Turuwaa,
"Qalbigaa tebeyoon, U taag la' ahoo,
I tus buu i yidhoo, i taabsii,
Tagoogta shanshadda, Laf taageertiyo,
Tiir bay ii ahayd, i taakulisee,
Adigaa tukeyahow, Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey, Turuwaa,
Toogadaan qaba iyo, Warkey tebiyoo,
Toolmoon bal u sheeg, Tabtaan ahay,
Adigaa tukeyahow, Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey, Turuwaa,
Tolbaynu nahee, i tabaan taboo
Tunkaad sidatiyo, Laftaba tuuroo,
Adigaa tukeyahow, Jabuuti tagee,
Tiriig ma ku aragtey, Turuwaa,

Abwaan Hadraawina waa kii lahaa:

Jacaylku muxuu i wiiqay
Muxuu wadnahayga shiilay
Maxaan shimbiraha waraystay
U dhiibay waraaq daboolan

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Haddii wacdigayga qaadday
cid weeye tidhaahda wayday

Inkastoo labadii is jecel hadday bad iyo barri u kala jarmaadaan uuse jaliilku isku qoray ay subaxuun isa soo hor joogsan doonaan. Saw tii lagu heesay:

Dadkaba laba beerkiyo
Boggiyo laabta iska jecel
Hadday beryo kala lumaan
Bad iyo barri kala tagaan
Calafka lama baajiyoo
Berriba waa kuwaa kulmee

Laakiin fadhi iyo fuud yicibeed laysla waa, qaybkuna waa halkiisee aynu eegno sida ugu habboon ee warqad jacayla loo qori karo iyo hababka la raacayo.

Sida warqad jacayla loo qoro

Warqad jaceyl ah sida loo qoro ma aha wax sahlan oo waxa ay u baahan tahay hab dejin la xidhiidha gudbinta dareenka dhabta ah ee ka dhex aloosan qalbigaaga, tusaale ahaan: Waan ku jeclahay (I Love You) haddii aad durbaba ka bilowdo macne ma yeelanayso. Sidoo kale soo gudbin mayso nuxurka warqaddaada ilaa aad soo araarato, hadalka aakhirkana aad ku keentaa Ereyga waan ku jeclahay.

Ereyada gaagaaban oo wata calaamadda la yaabka (!), waa jumladaha ugu badan ee ku habboon adeegsiga habka warqad jaceyl loo qoro, oo maxay tahay ujeedada looga gol leeyahay? Waa in aad qofka dareenkiisa kasbato oo soo jiidato si aad u hesho niyaddiisa oo idil.

Ka Feker ka hor inta aadan qorin...muddo hal asbuuc ahi ugu yaraan waa waqtiga aad kaga baaraan degi karto in aad qorto warqad jaceyl adiga oo jaan goyn ku sameenaayo mowduuca aad dooneysid in aad warqada ku qorto.

Go'aanso In aad ku qorto warqad cad iyo qalin.. Dedaalaa wuu gaadhaa waa tusaale gaaban oo la xidhiidha qodobkan sidoo kale howsha aad u marto dhibaato badan waa arrin leh miisaan culus oo aad ku kasban doonto amaan, dadaalka aad u gashay soo iibsiga warqad, bayaad iyo qalin taas beddelkeeda filo dareen farxadeed kolka dhiggaaga gacanta loo geliyo, in uu furo ku

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

dhaqaaqo bayaadka/bashqadda, xornimo goobta uu doono in uu la tegi karo kuna aqrisan karo iyo ugu danbayn in markii la doono dib loo heli karo si fudud, halka marka aad ku dirto E-mail ka uu u baahan yahay waqti dheer in loo huro.

Dhageyso Guuxa Qalbigaaga. Qoraalka aad ka hesho qalbigaaga ma aha wax sahlan, mana aha wax la dhayalsan karo. naftada ereyada aad ka dhex hesho waa wax yeelanayo macno weyn waa wax yeelanaayo gudbinta waxa ku xambaaray in warqad jaceyl qorto laakiinse haddii aad soo minguuriso maskax kale: sida gabayada, geeraarrada, ereyada heesaha iyo warqad jaceyl horay loo qoray naftaada kuma hadlin ee waxaad ka hadashay naf kale Xikmaddan ayaa ina kaafinaysa "Jaceylka geed looguma gabbado ee goobtaa la is geeyaa, si aad u gacanta ugu dhigto guushana aad u gaadho"

Ammaantaada oo badata Micno kale ayeey yeelanaysa. Gacaliso, macaanto, Sharafow, Qalbi, Naftayda, noloshayda, iftiinkayga dhammaan ereyadan waa kuwa leh dareen naxariis waa kuwa loo baahan yahay. Waa kuwa muujinaaya heerka jaceylkaagu gaadhsiisan yahay. Haddaba inta aad qoreyso warqad jaceyl si xaddidan u isticmaal derejada aad ku hal qabsanaysid, haddii aad ku sii dheeraato ammaanta waxa ay noqonaysa ka badbadin oo keeni doonto is mahadin.

Seddex Arrimood Qorshayso. seddexdan arrimood ee muhiimka ah qorshahaaga ku darso kuna xisaabtan in aadan qorin warqad ka badan 8 sadar oo gaaggaaban. Adiga oo ka fogaanaya hadallada jahwareerka leh ee aan la fahmi karin iyo ugu danbayn adeegsiga calaacalka, eedaynta iyo hadallada waqti-lumiska ah.

Warqaddaada jaceylka hadba waxay ku xiran sida aad u heli karto ereyo xul ah adiga oo maalaayo maskaxdaada si aad u hesho natiijo miro dhal ah oo la isku haleen karo.

Maxaad ka Ogtahay dhambaallada Jacaylka ee Waaray

Aynu qaybtan farriimaha iyo jacaylka kusoo qaadanno mid ka mid ah dhambaalladii jacaylka ahaa ee dunidan aynu ku noolnahay mahadhooyinka ku reebay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dhambaalkan waxaa qortay gabadh yar oo u dhalatay dalka Spain oo naafo ka ahayd qaybta danbe ee jidhkeeda, waxaa lugo u ahaa kursiga curyaamiinta oo alwaax kasamaysan. Gabadhan yar gurigooda waxaa hormarta waddo dadku ay maraan xilli walba, gabadhan yari maadaama ay curyaan aan meel fog tagi karin ay tahay waxay horfadhiisan jirtay guriga hortiisa, halkaasoo dadka maraya dariiqa ay daawan jirtay. Waxay caashaqday wiil kamida dadkii waddada goor walba soo mari jiray. Wiilkani waxa uu ahaa wiil aad u filsan islamar ahaantaana ay ladhacday quruxdiisa iyo lebbis wanaaggiisa. Wiilkan waxaa la odhanjiray Romana. Wiilkani waxa uu marka uu soo maraba si xushmadi ku dheehan tahay usalaami jiray inantan curyaamadda ah.

Gabadhani maadaama ay jeclaatay wiilkan waxay bilowday feker iyo talo inay rogrogto, waxaana ay istustay inaanay buuxinkarin rabitaanka Romano. Maadaama oo waxa ay raggu dumarka ka rabaan aanay haynin iyadu, balse waxay go'aan ku gaadhay inay dhambaalkeeda jacayl u gudbiso iyada oo aan wax dan iyo hammi ah ugu jirin inuu ka aqbalo duruufta rabbaaniga ah ee jirta awgeed. Haddaba erayadii ay gabadhaasii wiilkan u adeegsatay ayaa waxay noqdeen qaar mahadhooyin reebay, waayo waxa ay erayo sixira ku tuurtay qalbigii iyo maskaxdii Romana.

Dhambaalkii ay uqortay waxa uu u dhignaa sida tan:

"Hala yaabin Romanow in gabadh curyaamad ah oo qaarka hoose naafo ka ahi ku jeclaato, waraaqna ay kuu soo qorto. Haddii naafo aan jidhka ka ahay ogow maskaxda iyo caqliga kama ihi, teeda kale kuguma diiddani in xubinta taranku tahay tan ugu muhiimsan marka lasoo hadal qaado kalgacayl dhexmara wiil iyo gabadh, waayo jaceylka nin iyo naag kastaa waxa uu ku arooraa oo saldhiggiisu noqdaa, falgalka gogosha aniguna taas taag uma hayo. Waayo anigu dhinacaas naafo ayaan ka ahay, waxayse Romanow ujeeddadaydu tahay inaad maanka ku hayso in waa waayada ka mid ah gabadh curyaamad ahi kuu hayso jaceyl dhaba.

Romanow waxaan intaas kuugu darayaa adigoo tix galinaaya duruufaha igu xeeran iyo qaybta ugu muhiimsan macaanka nolosha oo iga maqan fadlan igu xurmee jacaylka dhabta ah ee aan kuu hayo, igana ogoloow inaad gabadh kale guursato anigana aad ila gasho meher macaansi la'aan ah oo nolosha ila qaybsato adiga oo aan dharka iska siibin, kuna iimaanso qaddarka rabbaaniga ah. Romanow jacaylkana tix gali, habeenka aad ii soo hoyonaysana Romanow

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

salaanta dhunkashada leh igu kaalmee, subaxii marka aad baxaysana ii niyayso sagootinta kalgacalka leh, qosolka, farxadda iyo fara-kaciyaarkana haygala bakhaylin, xilliga aad sariirta timaaddana waxaan Romanow kaa codsanayaa inaad i niyaysato oo qudha. Taasi ayaan Romanow kaga boganayaa jacaylka baaxadda leh ee aan kuu qabo".

Gefka hayb-sooca looga galey guurka

Bal akhristayaal, qormadan dareenkiinna kusoo dambaaba xidha, kollay maskaxdii wax fahmeysaa ma mooggana inay jiraan dad guurka lagala maago jacaylna aan loo muhan, haddana magaalada kula deggan, maamul iyo magac Soomaaliyeedna aad wadaagtaan

Waa dadka la haybsoocee, in badan oo maan-gaaba inagana mida ayaa waxay aamminsan yihiin in dadka la hayb soocaa ay leexdeen wakhti abaar ba'ani dhacday, kuna dhiiradeen wax dadkii kale ka maagey. Sida gabeygan meeqaamkiisu liitaa uu sheegayo:

sabta midgaha waxa looga dhigay
saban abaareede
kol-kay sabadu wacneyd
way inala sinnaayeen

Laakiin, waxaasi waa waxaan xaqiiqada ku dhisneyn, sal iyo raad toonana aan lahayn. waakan Hadraawi oo sharaxaya beentan ay soo dhabdhabeen inaanay waxba ka jirin:

Dhaf-dhaf iyo hal hays been ah baad
Soo dhabdhabateene
Dhugatiyo cad xaaraana iyo
Dhoohan may cunine
Dhamaas lagu takooriyo ma jirin
Caado dhaaf kalee
Dhab cad iyo ma haysaan daliil
Meel lasii dhigay
Dhaqankaas cambaaraynayaa

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Saaray dhiillada

Isagoo, haddana gabayga sii wata waa kii lahaa:

Intii aad dhisneydeen
Iyagu waa dhur sugayeen
Dhufaannimo hagooglay
Intaas kula dhex joogeen
Dhagahay intaas la hadlayeen
Waa dhab may odhan
Dharaar uun in waa kale baryeey
Dhawrayeen abid

Akhriste taasina waxay dhaxalsiisay dhallinyarta Gabooyaha, inay dareenkooda iyagu dib isula noqdaan oo hadday ruux kale jantaan ama jacayl u galo ay jirrab kala kulmayaan, xataa haddii ruuxa kale dareenku uu jiito xubbiguna ku jaan go'o oo xaggiisa usoo janjeedhsamo ay tahay ta caqabadda ku noqoneysaa waalidka, xigaalka iyo qaraabada oo kala hor imanaya *"maynakaa is geynaba iyo gayaankaa maaha?"*. Tolow yaa u diiday? bal dadku diinta dib ha ugu noqdo, ileen dadka dhulka lagama soo qodinnee Aadan baa dhalayee.

Bal maansadii Hadraawi ee Dhulgariir, markale aan dib ugu laabanno:

"Cishadey dhannaan tahay
Haddii laysu dhallol fayto
Dhab u dirirka waa lagu yiqiin
Dhaanto iyo shiishee
Raggu hadduu dhabiiltamo
Naftay dhigi yaqaanniinee
Mar haddaan dhaliil lagu gudbayn
Dhalasho mooyaane
Dareenkiisu wuxuu dhaadayaa
Hoos in loo dhigayee
Dhar-dhaaray lahaayeen
Intaad dhari lahaydeen
Dheddig iyo labkoodaa kan kale
Dhinacyo taagnaa
Ninka ay dhisaan baan
Isagu tooda dheydhayin"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Inan gashaanti ah oo aad u qurux badan kana mid ah dadka la hayb sooco ayaa iyadoo ka sheekayneysa sida ay ugu calaf la'dahay dadku waxan ay ka aamminsan yihiin, waxay tidhi:-

"Waxaanu degganeyn guri u dhaw meel waddo ah. Maalin kasta guriga waxaa soo hor mari jiray wiil mooto wata, ana marka aan maqlo guuxa mootada waxaan usoo bixi jiray dibadda illaa inta uu kasii libdhanaya indhahaan lasii raaci jiray, dhawr cisho ka bacdina waxaan dareemay in laygu dhan yahay oo dareen jaceyl dhuuxayga taabtay.

Maalintii dambe ayaan u qoray warqad, sidii caadada ahayd markuu waddadii soo maray ayaan u dhiibay warqaddii. Kaddib warqaddii wuu akhriyey jawaab aqbal ahna wuu soo celiyey laakiin maxay iigu taallaa markii aan u sheegay qabiilkaan ahay soo shoodh igumuu celin isagoo leh- *"Allahay ka Alle, maya kuguma gali karo"*

Markasta saa'saan u niyad jabi jiray in badan baan ooyey, laakiin yaa isku kaaya soo celin karaya. Ciilka iyo murugadu waa mid ila cimriya, laakiin sidaa maxaa naloogu caddibayaa miyaynaan isku caqli iyo caqiido ahayn, cari qudha miyeynaan wada degganeyn?
Inaguna akhristayaal inantaa murugaysan waxaynu odhan lahayn

"Dadka dhulka lagama soo qodinee
Aadan baa dhalay
Adigiyo hablaha dhinaca kale
Waysu dhigantaanne
Dhudqudhaad kawada beeranteen
Dhaadashada guude"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Taj-Mahal oo marka la macneynayo af-soomaaliga ku noqonaya qasriga taajajka, ayaa ah dhismaha adduunka ugu caansan uguna quruxda badan, wuxuuna astaan u yahay cilmiga ingineeriyada dhismaha islaamka dalka Hindiya iyo waliba qiimaha jacaylka.

Waxaa dhisay boqorkii qoomiyadda **Mughal** ee lagu magacaabi jiray **Shag-jahan**, isagoo u dhisay xaaskiisii saddexaad oo uu aad u jeclaa, kana dhimatay, taas oo la odhan jiray **Muntas Manhal**.

Waxaa la sheegay in dhismaha gurigan la bilaabay sanadkii 1632 uuna dhammaaday 1653kii, iyagoo ay ka shaqo galeen kumannaan qof oo fuundiyo iyo nijaarro isugu jira.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jinku Ma Jeclaan Karaa Insiga?

Sida aynu ognahay jinku wuu jeclaan karaa insiga, taas maaha wax in badan laga hadlo, dadka badankiisu wuu arkaa qof la leeyahay waxaa ku jira jin, hase ahaatee waxaa is weydiin leh sidee jinku ku jeclaan karaa bini-aadamka?. Haddaba, waxaa jira sababo jinku ku galo qalbiga iyo ruuxda qofka, tusaale ahaan iyadoo dumarku faydaan cawradooda iyaga oo aan is ogeyn sida bawdyaha, isla markaana aan qofku afka ku hayn xuska Alle iyo iyadoo inantu xidhata dhar aad u khafiifsan misana soo jiidanaya indhaha dadka ka dibna ay istaagto muraayadda guriga, iyadoo soo bandhigaysa quruxdeeda, waxaana markaas dhici karta inuu jinku ku jiro qolka iyaduna aanay ogayn,sidaana uu ku jeclaado. Waxaa kaloo keena inuu jinku jeclaado insiga, in uu qofku uu ku seexdo dhar khafiif ah xilliga xagaaga isaga oo aan aqrisan wax quraan ah .

Jinku wuxuu ka maseyraa marka uu arko inanta uu jecelyahay oo la hadlaysa wiil kale, waayo jinku waxa uu ka maseyr badan yahay insiga mana yaqaanno qofku inuu jecelyahay. Wuxuu mararka qaarkood moodaa in qof la hadlay oo kale, wuxuu jinku adeegsadaa cabsi galin iyo in uu u hanjabo qofka uu jeclaaday. Sidaa daraaddeedna waxaa ka muuqata wiilka ama gabadha uu jeclaaday murugo iyo walwal badan oo aan haysan dadka kale waxaa dhacda in qofka uu jeclaado lagu sallido hurdo badan, waayo jinku waxa uu jecelyahay inuu ku hurdo dhabta qofka uu jeclaaday.

Jinku waxa uu diidaa inantu inay guursato isagoo usoo maraya dhawr wado oo ay ka mid yihiin in uu wajiga inanta ka dhigo wax aad u fool xun mar kasta oo ay inamadu is yidhaahdaan la sheekaysta, waxaa dhacda in haddii nin soo doono ay tidhaahdo waan diiday mana doonayo ninkan iyada oo aan la garan waxa ay ku diidday, waxa kaloo jinku beddelayaa dabeecadda gabadha waxaana laga yaabaa inay ka xanaaqdo waxyaabo iska fudud, oo ay qayliso inta uu joogo ninka soo dooney.

Waxaa kale oo dhacda inay diiddo oo iska soo taagto inay nin kala sheekaysato ama uu lasoo hadal qaadaba arrin guur, taasina waxay sababtaa inuu iskaga tago nin kastoo damcaa oo aanu kusoo laaban. Waxay u arkaysaa inanta jinku ku jiraa in uu nin waliba ceeb leeyahay. Jjinku waxa uu dhaqan u leeyay inaanu ka maqnaan gabadha uu jeclaaday il bidhiqsi waayo wuu weheshadaa, waxaanu dhibaato weyn u geystaa haddii gabadhu tahay mid

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

reer leh waxa uu qabtaa ninkeeda xiniinyaha si uu cadho uga dhex abuuro lammaanayaasha is jecel, halkaasoo niyad jab iyo dhibaato aad u weyni kasoo wajahdo labadii lamaanaha ahaa. Iyadoo gabadhu ka cabaneysa dhanka galmada kuna eedayneysa ninkeeda in aanu gudan kari waajibaadka ni'nimo. Dhibaatooyinkaasina ugu dambaynta waxay sababaan in ninka iyo naagtiisu kala tagaan taasina ay noqoto fursad jinku uu ku helo gabadhii oo keli ah ka dibna uu raaxaysi la yeelan karo.

Maahmaahyo Ku Saabsan Jacaylka

1. Beer oo dhan tabcasho kuma wanaagsana, dadka oo dhanna jaceyl.
2. Calafku waa sida midho geed saaran oo kale oo ma dooran karto halka ay dhulka kaga dhaceyso.
3. Faqriga marka uu albaabka ka soo galo jaceylkana daaqadda ayuu ka baxaa.
4. Gacal isma cadhiidhsho.
5. Haween ilaahow yaaney na jeclaan nalagama karee, oo yaaney na nicin nalaguma karee.
6. Hawo guur iyo hammi jaceyl nabad baa leh.
7. In wax la jeclaado waa in nafta dhib la geliyo.
8. In wax la jeclaado ayaa ka fudud in qof ku jacel la ogolado.
9. Indho is jecel isma eegi karaan.
10. Is arag aqoon kama horreyso, wax isa siinna kalgaceyl kama horreeyo.
11. Jaallahaa kuma jabiyo.
12. Jaceyl aan dhunkasho laheyn waa sida shaah aan sonkor laheyn.
13. Jaceyl aan hanti laheyn hawada ayuu guursadaa.
14. Jaceyl aan lagula wadin waqtigaaga yuu lumin.
15. Jaceyl maqeybsamo.
16. Jaceyl odhaah maahee waa ficil.
17. **Jaceyl wiil lagu madhalo.**
18. Jaceylka dhabta ahi ma duugoobo mana daxaleysto.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

19. Jaceylka waa sariirta runta.
20. Jaceylka waa cudur qofka la jacelyahayna waa daawo.
21. Jaceyku waa hadba aragtida qofka.
22. Jaceylku waa indho la'yahay.
23. Jaceylku waa naar.
24. Jaceylku waa sida midho geed saaran oo ma dooran karno qofka aan jeclaaneyno.
25. Jaceylku waa jin.
26. Hooyo la jacelyahay ilmaheeda lama tumo.
27. Maseyr badan jaceyl badan.
28. Midho qurxoon oo aan la goosaneyn waxa ay leedahay cillad.
29. Ninka wax jacel waa indho la'yahay, naagta waxa jacelse hal il bey la'dahay.
30. Qalbigu labo ruux mawado qaado.
31. Qof aad necebtahay qof aad jaceshahay ayuu ku dhaafiyaa.
32. Qufac iyo jaceyl ma qarsoomi karan.
33. Qofka aan jecelnahay waa naqaan balse qofka inna jecel ma naqaan.
34. Qofka la jecel yahay waa sax markasta.
35. Sirta farxadda nolosha waa in wax la jeclaado.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waa Maxay Maalinta Jacaylka Adduunku (Valintine's Day)

(Maalinta Jacaylka) 14th February, Sannadka.

Hordhac

Maalinta 14 ka February oo loo yaqaanno Maalinta Valentine oo ay dadku u yaqaannaan "Maalinta Jacaylka Adduunka" ama Valentine's Day Dalalka reer galbeedka maalintaas waxaa la is dhaafsadaa farriimaha jacaylka xambaarsan, dadka is jecelna way isla xiriiraan ayagoo muujinaya in la joogo maalin ku wayn jacaylka, ayna qasab tahay qof walba oo wax jecel in maalintaas laga dareemo. Waxay u arkaan inay tahay maalintii uu dhashay jacaylka! ama uu xornimadiisii helay sidaa darteedna ay waajib tahay in la xuso oo xushmaddeeda la siiyo.

Maqaalkan waxaan ku sharrixi doonaa waxa uu yahay Valentine's iyo halka uu ka soo bilowday iyo diintu waxay ka qabto.

Taariikhda Valentine's Day

Maalintaas waxay bilaabantay xilligii boqortooyada Romans-kii hore, 14 ka Ferbruary waxay u ahayd maalin ay weyneeyaan Juno oo ahayd boqoradda Ilaahyada Romans-ka. Waxay kaloo u aqoonsanaayeen Juno Ilaaha haweenka iyo guurka '. Maalinta ku xigta oo ah 15 a February waxaa bilowda xuska Lupercalia oo isna ahaa wax ay caabudi jireen.

Romanku waxay aaminsanaayeen in Lupercalia uu yahay Ilaah mararka qaarna waxay ugu yeedhi jireen Ilaah Faunus. Nolosha wiilasha iyo gabdhaha waa ay kala fogayd xilligaas. Dabbaaldegidda Lupercalia intaanu bilaaban saacado kahor ayaa magacyada gabdhaha Roman-ka waxaa lagu qori jiray warqado, sanduuq ayaana lagu ridi jiray si loo xusho nasiib ahaan. Wiilasha dhallinyarada ahina waxay dooran jireen gabadha ay nasiibka u helaan waxayna haysan jireen inta uu socdo dabbaaldeggaas. Waxaa laga yaabaa in ay ilmo ka dhex dhashaan wiilashii iyo gabdhihii habeennadaas isla

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

tumanayay ayadoo laga yaabo inay kaddib is jeclaadaan ama is guursadaan, sannad walbana mid cusub ayaa la qaadan jiray.

Boqortooyadaas oo la odhan jiray boqorkeeda Emperor Claudius II ee Roma wuxuu geli jiray dagaallo dhiig badan uu ku daato. Boqor-ka Claudius wuxuu ku dhibbanaa in uu helo askar si uu u xoojiyo ciidankiisa iyo dagaallada uu galayo. Wuxuu rumaysnaa in aysan nimanka Romans-ka aynan rabin in ay ka tagaan jeceylkooda iyo qoysaskooda. Boqorkii Claudius wuxuu ka joojiyay Boqortooyadii Rome guurkii oo dhan, wuxuuna mamnuucay in la is guursado si ninku uunan u yeelan qof uu ku xidhnaado beddelkeedana sida dabbaal-deggii Lupercalia ay iskula raaxaystaan, ragga iyo dumarka guurkuna uu meesha ka baxo.

February 14

Valentine xilligaas wuxuu qaatay diinta Kirishtanka xilli Rome ay ka talinaysay dowladdii Claudius II, waxayna caabudi jireen Ilaahyo ay sameesteen iyo asnaam. Valentine waxaa lasheegaa in ay dowladdu xidhay xilligaas kaddib markuu qaatay diinta Kirishtanka

Valentine iyo Saint Marius waxay taageereen dhibbanayaashii Kiristanka (Christian) ahaa oo loo diiday guurka, dhowr qofna si qarsoodi ah ayay isugu dareen. Arrintaas daraaddeed ayaa Saint iyo Valentine loo xiray waana la garaacayay ilaa uu ka dhinto Valentine, waxayna u yaqaannaan Kiristanku "Shahiidki Jacaylka".

14th February ayaa waxaa dhintay Valentine. Waqti kaddib taariikhdaas Rome waxay ka noqotay mid khaas ah oo la xuso sanadwalba bisha February (Lupercalis), waana la faafiyay ayadoo lagu weynaynayo wadaadkoodi Valentine oo ay sheegaan inuu u shahiiday jacayka dartiis iyo Ilaahoodi Lupercalis oo isna laxusi jiray maalinta xigta. Habeenka ka horreeyana oo 14 ay tahay bisha February waxaa la qeybin jiray gabdhaha si ay ugu dabbaal-degaan.

Sababta ay u xusayaan waxaad ka fahmi kartaa taariikhda aan kor kusoo sheegnay iyo dhacdooyinku sidii ay u dheceen. Waxaana sababahaas ka mid ah:

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

• Ilaahoodi Lupercalis oo maalintiisa dabbaaldagga ahayd galabta 14ka February iyo maalinta xigta, gabdhaha iyo wiilashuna ay xor isku ahaayeen ninkuna uu wadan jiray gabadha usoo baxda si uu ula raaxaysto Ilaahoodaas daraaddiis.

• Sababta labaadna waa ninkii Valentine oo maalinkaas 14aad ka shahiiday kaasoo ahaa sheekhoodii, isla markaana ka xoreeyay mamnuuciddii guurka laga mamnuucay Rome xilligaas.

Baadariga Pope Galasius ee Madhabta Kiristanka ee Protestan (Protestant Christian Church) ee Rome, ayaa sannadki 496m markii ugu horreysay taariikhda si toos ah u dooratay ama aqoonsaday Valentine's Day (Maalinta Jacaylka) in la dabbaaldego sannad walba 14ka February.

Ciidda Valentine Yaa Xaq U Leh?

Wax waliba waxay leeyihiin asal iyo meel ay ka yimaaddeen, dunida maanta wadan walba maalin ayuu u dabbaal degaa sida Somaliland ay ugu dabbaal-degto 26ka Juun oo ah maalmihii xornimada, sidaas oo kale Mareykanka (USA) waxay u dabbaal degaan 4ta Luulyo (4th July) oo ah maalinta xornimadooda. Ma is weydiisay maxaa 4ta Luulyo looga dabbaal degi la'yahay Soomaalida ama ay Mareykankuba u dabbaal degi la'yihiin 26 Juun? Sababtu waa qola walba waxay leedahay maalin u gaar ah oo ay xushmeeyaan, sida uu Islaam-kuba u leeyahay maalmo u gaar ah Kirishtankuna u leeyahay maalmo gooni u ah.

Maxay Diintu Ka Qabtaa Xuska Valentine's Day

Waxaa layaab ah in manta dad Muslimiin ah ay xusayaan maalintii gaalada u weynayd, asal ahaanna ka timid Baadari Christan ah geeridiisa iyo wax ay caabudi jireen Roman kii hore!. "*Waxaad galaysaan kulan walba oo ay galaan xataa god*" sidaa waxaa ahaa xadiiski Nabi Muxammad SCW. Waa sax oo waxaan galaynnaa meel walba oo ay galaan waxaana samaynaynaa wax walba oo ay gaaladu sameeyaan, xataa waxaan la galnay maalmihii iyo xusaskii ay ku weynaynayeen dad ama wax ay caabudi jireen. Bal isweydii annagu waxaa marwalba weynaynnaa Nabi Muxammad SCW oo aan xusnaa ee gaaladu mana raaceen oo manala wayneeyaan Nabigeenna Muxammad SCW? Waa maya! !. Haddii ay maya tahay annaga maxaa na helay haddii aan Islaam nahay, oo maxaan gaalada iyo Mushrikiinta ugu dabbaal-degaynnaa?

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxaa laweydiiyay culimada iyo shuyuukhda islaamka su'aasha ah: waa maxay xukunka dabbaaldegga Maalinta Jacaylka (Valentine Day) iyo in la iibiyo waxyaalaha ciiddaas loo isticmaalo? Waxay ku jawaabeen sidan:

Kitaabka, Sunnada iyo Culimadi Salafka intaba waxay daliilinayaan ama caddeynayaan in Islaamku uu leeyahay laba ciidood oo ah Fitri iyo Adxa, wixii kasoo hadha ciidahaas waa bidco ayna u bannaanayn Muslimiinta inay ka qayb qaataan, muujiyaan ama ay ku farxaanba "*qofkii tallaaba xadka Ilaahay naftiisa ayuu dulmiyay* ". Waxaa intaas dheer tan inay tahay ciid ay gaalo sameysatay taasna waa dembi loo geeyay dembi kale. Waxaa ku jira gaalo isku-ekeysiin iyo wali-kadhigasho, Ilaahna taas wuu ka reebay Mu'miniinta. Nabi Maxamed SCW isna wuu caddeeyay wuxuuna yidhi "*Qofki isku ekeysiiyaa ummad iyaga ayuu ka mid yahay*". Ciidda jacaylkana waa nooca lasheegay; waana ciid sanam-caabud iyo Kirishtan, qof muslin ahna uma bannaana inuu ka qaybqaato.

Waxaa kaloo qofka Muslinka ah ka xaaraan ah inuu caawimaad ka geysto Ciiddaas ama ciidaha kale ee gaaladaba nooc walbaba sida ka cunidda, cabidda, gadashada, iska gadidda, u sameynta, hadiyaynta, la xidhiidhka ama ogaysiinta dadka kale wax khuseeya ciiddaas ama ciidaha kale ee gaalada.
Ma bannaana dabbaaldegga ciiddan bidcada ah sharcigana wax asal ah kuma laha. Waxayna soo gelaysaa xadiiskii Nabiga SCW ee ahaa "*Qofkii ku dara arrinkeennan wax aanan ku jirin waa celis*" micnaha qofkaas.

(Waxaa soo saaray Bukhari iyo Muslin)

Valentine Day Waa Ciid: Kiristan ama Sanam-caabud(Mushrikiin)

Waxaa laweydiiyay baadari Kirishtan ah su'aal ahayd: ciidda Valentine's Day ma sanam caabud baa? Maalinkaasna ma yahay ciid Kiristan sax ah? Wuxuuna ku jawaabay: haa, waa ciid ama dabbaaldeg sanam caabud ah, sida dhabta ahna maalinkaas waxaa loo dabbaal-deggaa ciidda Ilaaha Jacaylka ee Romanka.

Dhanka kale Calendar -ka(Jadwal-taariikhiga Sanam-caabud-ka) boggiisa uu ku soo bandhigo taariikhda sannad walba ee ciidaha iyo xusaska muhiimka u ah waxaa ugu jirta wax loo yaqaanno Feast of Vali, St. Valentine's Day (ama waliimada Vali, Maalinta Jacaylka) oo ku beegan 14 ka February. Taasi waxay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

ku tusaysaa inay tahay maalin u tirsan sanam-caabudka oo ay xusaan una xoola qalaan Vali.

Gunaanad.

Waxaas oo idil waxay ku tusayaan in qof Muslin ahi aanu shaqo ku yeelan karin ciidda Maalinta Jacaylka adduunka. Sidaas darteed waxaa waajib nagu ah inaan iska ilaalinno ka-qeyb-qaadashada ciidahan oo kale oo dadkeena ay fududaystaan, laakiin ay yihiin wax aanan sahlanayn kana soo horjeeda dhaqanka iyo sunnada Nabigeenna SCW dhammaan culimada Islaamkana waxay isku raaceen inay tahay xaaraan.

Waxaa kale oo na saaran inaan qof walba oo Muslin ah oo aanan aqoon u laheyn arrimahan oo kale, sidaasna ku dhex galay dembigaas aan u sheegno ugana digno khatarta ku sugan in loo dabbaaldego sanam ay gaaladu caabudaan. Diinteennu waxay na faraysaa inaan wanaagga is farno xumahana aan iska reebno, waana waxa aan uga duwan nahay ummadaha kale loona baahan yahay in ladabaqo.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Haasaawaha Iyo Dhallinyarada.

Qormadan waxaynu ku soo qaadanaynnaa qaabkii ay dhallinyaradii hore u wada hadli jireen ama habkii iyo hannaankii, hibadii haasawihii hore, kulankii, geeddi-socodkiisii iyo waliba gobonnimada, dhaqanka iyo dhismihii noloshii hore iyo teenan danbaba haddii aan laga tegaynin. Laakiin, ugu horrayn bal aynu qeexno kelmaddan haasaawe.

Ereyga haasaawe marka aynu si guud u macnayno, wuxu noqonayaa hadal ujeedadda uu doono ha lahaado'e, dhex mara laba qof cidda ay doonaan ha ahaadaan da' ahaan, aqoon ahaan iyo jinsi ahaanba.

Wejiga labaadna marka aynu tilmaan ka bixinno, haasaawe waa hadal macne xambaarsan oo si gaar ahaaneed u dhex mara laba qof oo kala jinsi ah, waa wiil iyo gabadh'e. Haasaawuhu waa tallaabada kowaad ee ay doobka iyo gashaantida guur-meerka ahi ugu xadhko xidhaan safarkooda ay ku yagleelayaan guri iyo reer lagu diirsado; haddii la isa siiyo iyo haddii ay iyaguba iskood isku ilaaqdeen, waxa hubaal ah in aanay marnaba furaha noocan ah, waa haasaawaha e aanay ka maarmi karaynnin.

Haasaawuhu ma af la bartaa?

Haa waa af la barto.Waxa suuragal ah in dadka qaarkii yidhaahdo oo haasaawuhu ma aqoonbaa maxaa laga baranayaa?
Wali ma is tidhi la hadal qof uu damac kalgacal ahi kaa galay oo laba eray ma isku hagaajin waydaa xataa iska warantu ma kugu adkaataa
Haddaba dadkan hadalka isku dhex daadinaya ee kayr karaya ee aan qofka ay doonayaana laba eray iskugu toosin karin, malaha waxa fiican inuu sameysto doonyaqaad qof u kala adeega isaga iyo ruuxan uu u rabaalaysan yahay.
Wakhtiyada qaarna waxaaba jira dad is xilqaama oo laba aan hore isku arag kala haabna jooga haasaawe ka wadaajiya dhexdooda iyagoon hoggaanka usii deyneyn bilawga hore ee haasaawuhu ugubka yahay

"Wali gabadh /wiil ma sheekaysateen
Intaad la gorfaysay xaajo
Ma gardaadiseen haasaawe

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Gunta iyo gunaanadkii gudoon wacan
Maku gabagabayseen"

Bulshadii wakhtiyadii hore baladka ku noolayd, haddana wali baaqiga kusii ah baadiyaha ha ahaadeen, kuwa reer guuraa ah iyo kuwo Bandarka degganba'e wuxuu ahaa xishoodku lingaxa waxyaabo badan dib uga celin jiray xagga haasaawahana marka gabadh iyo wiil wada haasaawayaan waxaa u dhaxayn jiray geed iyadoo midba dhinac iska taagayo kana xishoonaya inay qumaati ishoodu iskugu dhacdo oo dherer iyo joog, kor iyo hoos isu eegaan.

Gabadhu waxay ku caan ahayd oo Ilaahay ku abuuray xishood, codgaabni, hadal yaraan iyo waliba inay in badan wax dhagaysato hooyooyinkuna markay habluhu dhallaanka yihiin ee qaydka lagu sido hadday goob rag geyaan ahi joogo ka dhex ooydo waa kuwii ku odhan jiray

"Naa hoogtooy gaaggaabso
Gayaankaaba goobta fadhiyee"

Inantu aalaaba way iska af gaabneyd raguna kuwa iyagu daandaansiga hore bilaaba ayey ahaayeen ileen waatii hore loo yidhi :-

inani waa sugto,
wiilna waa sahan.

Goobaha Ay Isku Arki Jireen Wiilasha Iyo Habluhu.

Afarta goobood ee ay aalaaba ku kulmi jireen waxay ahaayeen:

- Inan meydhax galool ka diiraneysa oo wiilku kusoo baxo.
- Ama iyadoo adhi la joogta.
- Ceelka biyaha oo laysku arko marka xoolaha la aroor gaynayo ama reerka loosoo dhaaminayo iyo
- Iyadoo goobaha ciyaaraha leysku arko.

Inanta oo maydhax soo diiranaysa ama goor fiida awr soo carraabinaysaa waxay wiilka u ahayd fursad inuu ka faa'idaystaa ay mudan tahay.

Wiilku aalaaba wuxuu la kulmaa inanta iyadoo goor fiid ah awr soo caraabinaysa, maqasha iyo xooluhuna halkan iskaga ciyayaan. Isagoo isla markiiba haasaawaha ku bilaaba:

"Is arag aqooni kama horrayso

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Wax isa siina kalgacal kama horreeyo"

Halkaana leysu toydo oo dhawr kalmadood istaagga laysku yidhaa, inkastooy Soomaalidu tidhaa saddex saddex bay ku fiican yihiin;- salaantu suxulkay ku fiicantahay, sheekaduna salkay ku fiicantahay, ayaa haddana wakhtigaan ku simaynne, markay cabbaar taagnaadaan ayaa ilayn inantii hawlo badan baa sugayee odhanaysaa; walaal goor gaaban eraygeedna gaaban ee inaga dhaqso isna wuxuu odhanayaa;

"Naa kadaf kadafna waa loo socdaa
Kadaluubna waxbaa lagu cunaaye
U kaadi aynu sheekada karuurkiyo
Caanaha koob kuwada shubnee"

Inantiina may suginee way iska dhaqaaqday, iyadoo kalmado kusoo tuuraysa inankiina wuxuu leeyahay *"naa dhagax baa la tuuraayee hadal lama tuuree u kaadi"*Sidaasaaney ku kala carraabeen.

Haddaba galabtii ku xigtay ayuu haddana la kulmay isagoo ku leh inaad caawa i raacdo ayaan doonayaa

"gabadhyey inaan kula jarmaadaan rabaa
Oon Jarar ku geeyaayee ,caawa i raac"

Iyana waxay o dhaneysaa

"Waar inan yahaw Jamaad hooyaday
Jirato weeyaan
Jeeraaraday labada goor igu jalleecdaa
Markuu reerku wada jiifsadee
Ruuxna soo jeedin
Jidka aynu sii wada marnee, jaahayga kaalay"

Isna wuxuu odhanayaa

"Inanyahay joogjoosigaa kuma galo iyo
Jaalaw soo noqo
Ee Jinaweey i raac hawl kale ha u jimiimicinee"

Odaybaa isna inan maydhax diiranaysa kusoo baxay oo is yidhi la haasaw markuu hadalkii u bilaabay ayey inantii ku tidhi horta saddexdan kaa laalaada dib u cesho, odeygii wuu yaabay, laakiin inantu waxay u jeeday oo ku lahayd dib u laabo waa go'a, bakoorrada iyo waysada

- Wiilka oo kusoo baxa inan gashaanti ah oo adhi la joogta halkaana haasaawaha ka ambaqaadaa waxay ahayd mar la hel

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

"Soo jamaad oo adhi la joogta
Jeedaala eegmada
Indhuhu may jaleecin
Soo haasaawe la jil mooyee
Halkii aan u jeediyo
Jihadii igamay lumin"

- Marka adhiga la soo arooriyo ama reerka loosoo dhaaminayo waxay ahayd mararka doobabka guur doonka ahi dardar haasaawe lasoo gali jireen.

  "Cawistii irmaanayd anoo ceelka qabadsiiyey
  Soo tuyaroo cadceedaa u eeg
  Caadil igumuu saarin
  Ay igu tidhi ciddeebaad ahayd
  Waan ku caashaqayee
  Ana aan ku idhi cidaa waxaanu nahay
  Curaddadii Daa'uud
  Cuudkana waxaanu daaqsanaa
  Caynta Sugumaha
  Ee Canabay na raac
  Gobaa lala caweeyaayee
  Ay tidhi inanyahaw cuddooni
  Ribaan buur ku celiyaa
  Casarkaan kasoo dhaamiyaa
  Laaskaa ciida lahee
  Carri lagu harraadiyo maxaa caado iga yaalla"

marka dhaanka layskugu yimaaddo raggu waxay caawiyaan dumarka iyagoo la tabantaabiya oo la rara dhaanka, haasaawahana halkaa kaga faa'ideysta

Fannaanadda codka tolmoon ee Faadumo Cabdillaahi Kaahin (Maandeeq) mar ay hees la yidhaa Riyo oo ay talan-taalli kula qaaddo marxuun M.I.Qalinle (AHU) waatii lahayd

"Maraan u raray dhaan
Meel hara ahoon tagay
Miisaalka sheekada
Oo maalka joogiyo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Dadka Maanku koobayn
Maaduu ahaa kii
Rarka ii miciinee
Hawshayda maamulay
Mise waa is moodsiis
Maqalkiyo dhawaaqaan
Anna sii macaansadey"

❖ **Ciyaaraha oo laysku arko**

Tubta ugu fiican ay ku tiraabi jireen dhallintu waxay ahayd ciyaaraha oo alaaba la qaban jiray marka tusku dhulka wada helo, tigaada iyo tima haweeluhu baxaan, xooluhuna dhereg la tiicaan, dadkuna ka nastaan tawstii jiilaalka ee reerihii wada yaallay midba meel ku tuurtay

Iyagoo reer miyigu sheegaya sida marka jiilaalku bilaabmo loo kala cararana waa kuwii lahaa:

Sida loo baraxan yahay
Ee beledka loo yaal
Ayuumbuu jiilaal bilaabaa
Jeesba meel u guuraa

Marka jiilaalka laga soo doogo ee naqa iyo nimcada la durduurto, ayaa tiririgta durbaanka iyo talqanka ciyaartu yeedhaa, dhallin yartuna jiibta jaanta iyo orinta isku daraan halkaana dhallinyartii abaartu kala tallaabisay ay dib isu arkaan ileen waa kuwii intii abaartu jirtay ku taami jiray ee odhan jiray

Guga roob hadduu da'o oo
Geeduhu bislaadan
Anigiyo da'daydani
Dilkada ciyaareed
Waa u dabbaal degaynnaa

Markaana dib laysu toydo oo ay yidhaahdaan

Waa taynu kala baadnee
Bari iyo galbeed kala aadnee
Barinayee ma barideen

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Ma badbaado joogtaan
Beeshii ma nabadbaan

Aakhirkana ay Jaliilka ka tuugaan in da'yartan isla jaan qaaday aan abaar kala jartaa u iman, ayagoo leh

Allahayaw isleegtayadan
Islayliday yaan heeg dheere jiilal iyo
Abaari kala jarin

Haddaba ciyaaraha iyo goobaha dhallinyaradu ku sacabtuman jireen waxay ahaayeen masrax dadka xiiso galin jiray, gole haasaawe iyo goob lagu caweeyo oo lagu kaftamo, wiilasha guur meerka ah iyo gashaantimahana waxay u ahayd gegi ama meel guurdoonku sheekada iyo gogol-dhiggeeda uga gawaamo xidho

Wiilkii goobtaa ciyaartu ka dhacaysay siduu inanta ugala soo baxay sheegayeyna wuxuu yidhi

Gashaantimo kasoo baxay
Intaan hadal u gaagaabshay
Geenyo faras la moodyeey
Yartaan gooni uga saaray
Een go'aamadeedii xidheen
Ururka gaadhsiiyey

Barigii hore habluhu sidaa muush umay ahayn sida loo arkaana way adkayd. Markaa waxaa jiray koox qalan-baawiyiin ah kuwaas oo habeenkaa reerkay hablo ku ogaadaan ciyaarta ka dul qabsan jiray, iyagoo marka ugu horreeya reerka ay hablaha uga martida yihiin iska hubinaya inay balo jirto iyo inay badhaadhe kusoo hoyden, hadalkana waxay ku bilaabi jireen:

Waa dhagoo war kama dharagtee
Waa dhuloo wixii jira mooyee
Reerku nabad masoo galay?

Markay intaa yidhaahdaan ayaa haddii la nabdoonyahay reerkii ugu soo jawaabayaan:

Cawdo bile balooy baydh
Cawro daran ka yaasiin

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Tusaale ahaan hadday hablihii raagaan oo ay ciyaarta usoo bixi waayaan waxay odhanayaan:

Aamina ilwaad qurux
Way soo bixi lahaydee
Aar baa hor yuurura

Haddana mid ka mid ah raggii ciyaarta tumayey ayaa odhanaya isagoo xaaladda dejinaya:

Waar waa gabadh suldaan dhalayoo
Sallibay ku hurudaayoo
Sureeray la odhan maayoo
Waa lasoo sasabayaayee
Ha u sabir dar-naanina

Hadday gabdhihii usoo bixi waayaan oo ay goobta kasoo daahiri waayaan waa lagu kala dareerayaa, ileen waakii Hadraawi lahaa

Haddaan gabadhi boodeyn
Illeyn gegi cayaareed
Wax ma dhaanto gariyaad

Badanaa ciyaaraha waxaa usoo guda oo usoo guureeya dhallinyarta laakiin mararka qaarkood waxaa dhacda in rag guryo lihi ay yimaaddaan oo ay kasoo xaadiraan goobta ciyaartu ka dhacayso.
Ninkii xaaska lahaa ee ciyaarta yimid markii ay hablihii botorka boodayey arkeen waa kuwii ku lahaa:

Doob soo gudyoo garanay
Gabdhana loo guryoo garanay
Ee gadh-madoobahaagan soo guday
Gadamaad u jeeddaa?

Ninkii oo leexda iska gabayaa wuxuu ku jawaabay:

Naa hadday mid qudha tahay
Ooy mar diiddo leedahay
Marna daacaddeed tahoo
Uurku digaxa leegyahay
Marna deyma-deymootoo
Ha iga dilin ku leedahay
Inaan soo dilaal tago
Daw miyaanan u lahayn?

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sidaasoy tahay haasaawaha dhex mara ragga iyo dumarka ciyaarta dhexdeeda oo gantaal ku ahaa ruuxii lagu gano haddaanu markaa ka gilgilanna laga guulaysan jiray. Haddaba marka lagaaga heeso ciyaar goob joogna aad tahay waa in aad halkaa kaga jawaabtaa oo aad doobbta soo tuurtaa ileen horaa loo yidhi geeso lo'aad kulaylkaa lagu kala gooyaayee

Nin la odhan jiray Cawil hadal dhacay; ayaa ciyaar uga heesay inan isagoo inantii afarta jihaba kasoo ooday oo leh xageed ka bixi

Xaggangabi, xaggani geed
Xaggan waa mus iyo reer
Xaggani waa mas iyo halaq
Xaggani waa maraa dhacay
Surrinkii anaa dagee
Caawana xaggeed degi

Laakiin hadalka waa la kala heli ogyahee inantii markiiba waxay garatey in cirku u bannaanyahay waxayna ku jawaabtay:-

"Wallee inaan sida haad cagaha lalin
Oon cirka sare u bixin
Oon ceeryaamo kugu noqon
Oo ciddaad tahay ku deydayi
Oo Cawilawda lagu guri"

Ninkii isna inantuu hadal kaga badin waayey shardiyeeyey waakii lahaa:

"Siisawga shaaximanee inkastoo uu shareer maro
Aan shaagba loo banjarin haddaad sheegto
Shaacirbaad tahay haddii kale sheekada ii daa"

Shabbad inana oo ladanoo
Wiil shabaab ahi guursaday
Sheekh wacana ka mehersaday
Wuxuu shuhuudkani taro haddaad sheegto
Shaacir baad tahay haddii kale sheekada ii daa

Shan jeer meeluu roob helay
Oo shuux yari ka wacan yahay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Haddaad sheegto shaacir baad tahay
Haddii kalana sheekada ii daa

Inantii waxay kaga jawaabtay hal xidhaalihii:

"Siisawga shaaximanee inkastoo uu shareer maro
Aan shaagba loo banjarin sheegayoo anaa furayee
Waa awrkayaga ina sharaf"

"Shabbad inana oo ladanoo
Wiil shabaab ahi guursaday
Sheekh wacan ka mehersaday
Wuxuu shuhuudkani taro
sheegayoo anaa furayee
Waa shay markhaatiyoo
sharcigaa saa dhigay"

Shan jeer meeluu roob helay
Oo shuux yari ka wacan yahay
Taana sheegi maayee inta
Aad u sheekha tahay iyo
Shaydaanka weydii"

Hal-xidhaalahani waxay is masaalaan kii abwaan Hurre Ibraahin Warsame (Walan-wal) uu Cambaro ku xidhayey markay dhanna u qaadi wayday waa tii ku jawaabtay:

"Hadal wixii shareecaa ama shuqul magaalaa
Ama gaalku shaabahee
Shaydaan buug kusoo dhigee
Aan shaahid loo arag ka shakiyey ka hadalkoodoo
Waxbaad suubinaysaayoo shabakad baad dhigaysaayee
Sheekh baan u leeyahay"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Suugaanta Jacaylka Iyo Dadkii Hore.

Jawigii dadkii hore iyo gayigay ku noolayeen siduu ahaa iyo faalladii laga bixiyey aynu dul istaagno.

Wuxuu ahaa gayi aan nasasho laga aqoon oo halgankii ay jiritaankooda ugu jireen aanu kala go'lahaan jirin, colaada iyo cabsida ayaa joogto ahaa, haddii waa baryo iyo haddii habeen dumo gor walba ragu kii xilka gutuun buu ahaa, wuxuu ahaa xilli si ba'an ay geella u kala qaadi jireen kolkaasoy ahayd xilli ay kala qaadayaan iyo xilli ay soo dhicinayaan.

Haddaba, soomaalidii geyiga sidaa u dheer ku dhaqneyd waxay ka dhaxashay dabeecado ilaa maanta qaar badani kala socdaan, waxaana dabeecadahaa ka mid ahaa kol walba inuu ninku ku tilmaanaado ad adayg, inuu qarsado dareemaddii qof ahaaneed iyo waxa laabtiisa ka guuxaya si aanay dad badani sidaa waxba uga ogaan oo uu in kiro, oohin iyo ilmeyn iska daayee jiljileeca iyo dabacsanaanta ayaa waxay ahaayeen dabeecad ninkii lagu arko lagu liido, sidaa daraadeed bulshadii sidaa u fikiraysay dhexdeeda maansada jacaylku kuma bulaali karin. Sidaa daraadeed inta dambe waxa uu xeer waliba yeeshaa cid ka baydha oo iska indha tirta, waxba yaanay tiro badnaaninee, waxaa jiray maansayahanno u badheedhay inay ka maansoodaan jacayl dumar oo soo maray, tixo macaan badanna ku muujiyey.

Waxaa ka mid ahaa gabadhii Ijo la odhan jiray gabayaagii aadka u jeclaaday dabadeed mar qudha inuu la hadlaa ay u suuroobi weydey.

Kolkuu quusan waayey gabayaagii ay dadkii xigtada ahaa kula taliyeen inuu Ijo faraha ka qaado inan kalana uu deegaanka ka raadsado, gabayaagii ay u ballan qaadeen haddii uu taladaa ka yeelo inay ka yarad bixin doonaan, xoolana xeryihiisa uga buuxin doonaan, gabayaagii markaa ku jawaabay:

"Tiscin farasa xamar tawlan iyo tuurcaddiyo meydal
Markab tiirsan lacag ley tirsho iyo dahab la ii tuulo
Lag toddoba jir ah oo wada tifrina tiico iyo eyro
Waxaa iiga toolmoon Ijoon kol u tiraabaayee"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qisadii jacayl ee Weerar bulxan iyo Mullaaxo

Dadka jacaylka aan iyana qarsan ee shaaca ka qaaday waxaa ka mid ahaa Gabayaagii weynaa ee la odhan jiray Weerar Bulxan oo ay walaalo ahaayeen Qamaan Bulxan. Wuxuu xod-xodtay gabadh Mullaaxo la yidhaahdo oo bilicsamideedda lala ashqararay, reer qarannimo sheegtana kasoo jeeday, wuxuu isku dayey intuu masaafaysto inuu raadsado wadaad Mullaaxo u mehersha, intaa kaddib wixii yarad iyo xoolo xididinimo ahna ay iyada aabbaheed ka wada xaalaan taasoo ay gabadhii ku diidday.

Dabadeedna gabayo aad u tiro badan oo suugaanta Soomaalida meel aad u sarraysa kaga jira ayuu Weerar Mullaaxo ku afuufay. Waagii barya iyo qorraxdii dhacdana tix cusub oo quruxdeeda iyo qiimigeeda tilmaameysa ayey socotadu u keentaa.

Wuxuu u ballan qaaday hadday guurkiisa oggalaato Barwaaqo iyada oo kale aan hore loo arag ay dhex dabbaalan doonto, dhar wada xariira dhammaan waxa dumar ku xarragoodo, cuno magaalo jaaday ahaataba iyo saddexda wariyood waxay Soomaalidu dhaqato.

Intii uu gabadhaa wax u ballan qaadayey waxaa ugu layaab badnaa, marka uu ku leeyahay haddaad aniga i guursato inaad daabbad fuushan tahay mooyee dhul dambe caga dhigi meysid (lugo kuma socon doontid) oo xataa libaax baanu kuu laylin doonaa, rukuubna kaaga dhigi doonaa. Waxaa kale oo uu ku beer laxawsadey qorraxda iyada inaanay is arki doonin hadday soconeyso iyo hadday taagan tahayba la dul wadi doono geedo loo dallaalimeeyey oo cadceedda kuleelkeeda isaga gudba:

"Oogsado Carbeed asliga lagu lammaaneeyey
Jilbo lulata ilqado soo lalmada laabta iyo qoorta
Liimbaraad ku kala laylsanto oo laqan adeegaaya
Lamaano dhawr ah laaxsin ilo xidh leh oo ladida loo yeelay
Darmo ladan furaash lagu gamo iyo laba haloo saran
Lisin geela caanaha karoox labanka xaytaaga
luqmi subaga loog iyo diraac lug iska laameerta
laxshida barnida lacag lasoo siiyey
lugta hilibka leecaani kabash laqanyo gooleedka
lufa yaraha aan kuu dajay iyo laanka anigoo ah
Mullaaxoy libaax kolay ku tahay inaanu kuu laylyi

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Lugo kuma gashidee daabbadbaa kuu laxaad noqonne
Laan baa dalaayadeed shamsada lawga kaa qabanne"

Awal, lama aqoonne Mullaaxo waa lawada bartay, gabayadii Weerar ayaa magaceeda halka sare gaadhsiiyey, ruux waliba waxa uu jeclaystay bal in uu arko inantaa gabayaagu ku naannaabay ee reerkiisii iyo haweenaydii uu qabayba illawsiisay. Maalintii dambe iyada oo aan *"hawraarsan"* odhan balse oggol-diiddan ah, ayaa kuwii guurkeeda u tafaxaytay waatii nin Nuur Idinle la odhan jiray usoo horreeyey kaasoo is damacsiiyey Mullaaxo, da'ahaanna Weerar ka weynaa, saa tartan baa dhexdoodii maray oo ka bilaabmay .

Hubka Weerar waa la yaqaannaa oo waa gabay iyo geeraar uu maanka iyo maskaxda kaga xadi karee, tallow Nuur Idinle muxuu isku hallaynayaa? Marka horeba Nuur Idinle waxa uu Mullaaxo is raacsiiyey isagoo xagga ay Weerar ka marayso iyo sida uu inanta u jecel yahayba og

Dadkii deegaanka ayuu u dhex raaciyey goor ay ahaataba inuu Mullaaxo guursan doono oo ninkastaa xaggiisee ay isaga xilo u noqon doonto, runtiina Nuur idinle muu aqoon gabay uu gabadha ku hanto ama kaftanka ku galo laakiin taasi shido kumay hayn. gabayadii weerarna wax walaaca may galin, wuxuu heystay hantidii waayadaa leysku hallayn jiray tii loogu jeclaa, dhawr kadin oo geela ayaa xeryaha uga buuxay.

Markii dambe rag xaajada weerar iyo Nuurba la socday ayaa waxay kula kaftameen *"Nuuraw Mullaaxo waxay u eegtahay mid aan gacanta kuugu jirin marba haddii diidmo laga keenay, ninka kugu haystaana uu yahay Weerar Bulxan oo waagii baryaba gabayada ammaanta ah quraac iyo hadhimo uga dhigaya"*. Nuur markaasuu ugu jawaabay *"cag-weyntaa gabyi"* taasoo markii dambe noqotay odhaah lagu maahmaaho, isaguna uu uga jeeday geelaygaan isku hubaa gabayada Weerarna dan kama lihi oo horweyntan i hareera daaqaysaa igaga filan.

Taasna waxbaa ka jiray oo inan rag ka aan geel lahayn iyo ka lehba guurka magacu ka hadho waayadaa uma sinnaan jirin , gabadh kasta oo qurux leh oo loo tartamo waxaa laysku maan dhaafaa waxay markasta ahaan jirtay ninkii geel badan lihi inuu guurkeeda ku guulaysto kolka uu qaalmaha yaradka ah soo tumo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Gabayaagii caanka ahaa Cabdi Muxumed Aw-Magan mar uu tirinaayey qiimaha sare ee geelu leeeyahay waxa uu ku daray, guursiga inanta wacan sida uu wax uga taro iyo sida ugu fudud ee nin kastaa ku heli karo gabadha wacan waa kii lahaa:

"Wuxuu dumar ,rag ugu maahayaa midabka weeyaanee
Majaafada xun lama guursado,iyo ta aan milgo lahaynee
Adigoo maran da'oo guur in badan xilo u meeraayeey
Gabadh miiganoo culus, haddaad milcsatood eegto
Ase aad muxabadeedii qalbiga, yaraha maan raacdo
Haddaad mudanihii aabaheed, madal ku weydiiso
Moodkiyo gabaatiga tolkaa, lagu murweeyaayee
Hadduu kugu mucaarido, inaad yara mihiibsiiso
Wax mushaakil iyo ceeba, maraw la'aanteede
Muraadkiisu waa u sahal ninkii moogo foofsadayee
Goortaad maryaha keento iyo sidig mariixaysa
In haddiiba meher kuugu dhici muranla weeyaanee
Dabadeed makaan loo dhis iyo aqal muunad weynee
Iyadaa martabadaa leh iyo muuna iyo kheyre
Adaa nagu maneystayee allaw maya hanaga qaadin"

Dabadeed Nuur Idinle oo is huba kalsoonina iska qaba, ayaa reerkii kusoo hoyday oo siduu hiddahu ahaa intuu yeelay inantii aabbaheed ka doonay. Af madhan lama soconne geel iyo xoolo kale wuxuu bixin doono ayuu golihii ka sheegay, markaasuu odeygii inta uu raalli noqday hal-haleel inantii u bixiyey waxaana lagu heshiiyey deyrta marka uu yaradka keeno. Hase ahaatee kolkii wixii xalay dhacay waa berigii loo sheegay Mullaaxo way isa soo taagtay, waxaana laga soo sheegay inay tidhi *"aabbahay buu iga yahay Nuur Idinle"*.

Wayse iska lahaydee wey ogeyd in aabbaheed iyo Nuur Idinle ay noqon doonto siday wax u wadaan, si kastaba ha haatee Weerar isma dhiibin geela Nuur Idinle oo kale isagu malaha markasta se reer adduunyo oon dhammaad lahayn ayuu Mullaaxo u ballan qaadaa haddii ay guursato.

Gabaygan soo socda wuxuu Weerar aad isugu hallaynayey aftahannimo iyo laandheerannimo, labadaas oo ay la ahayd inuu Nuur Idinle kaga foori karo Mulaaxana ay ugu xilan karayso. Wax suurto gal ah iyo waxaan ahaynba gabadha wuu ku sasabay. Wuxuu ku xod xodtay waalidkeed iyo walaalaheed ka sokow cid allaala iyo ciddii wax u galeenba inuu wax siin doono, waxaa

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

kale oo yaab lahayd inuu ku andacooday *"Mullaaxaan soo arkay"*, qofkii yidhaahdaba inuu abaal gud faraqa uga buuxin doono.

Wuxuu yidhi:

"Arrin dhacay Mullaaxoy, horaa aayad loo qorayee
Labadii ushoodu isu taal, kalama oollaanee
Ubadkeenna aan kala ciyeyn, agabar weeyaanee
Waan kugu ataxyaadsadaa, magaca arooryaadee
Adna umalka waad ila qabtaa, anoon ebyooneyne

Indhahooda naaguhu ka jecel, uufan geel badanee
Ayriyo cilaan nimaan lahayn, ma ogalaadaanee
Dhul abaar ah oo maradiroo, ibilku caws waayey
Ummad socota, duul ula sitoo, rag u itaal sheegtay
Arli buun ka dhacay wiil gobaa, loo irkanayaayee
Waxay aadan tahay gobi hadday, aarankii tahaye
Abtirsiinada lagu baxaa, weydi oon malehee
Ilwaad quruxsanleeyey , haddaad ooriday noqoto
Aakhiro ma sheeginee adduun, ma ilxumaateenee
Afar maro ah abxad aan kugu rido uunsi iyo qayli
Indhodeeq xadaayadi ku taal, boqor araafaad ah
Asli boqol ah kuul lala affabo arag wanaageeda
Usha luqunta aydida shunuuf olol cabaadeysa

Oogada muggeedaa inaan iibiyaan qabayee
Axmed wiilashiisiyo shaqlane iyo awawgaaba
Ayax iyo arbahayeey ah iyo odayo tiirshaaga
Abshir iyo cimaan-caaqil iyo, aw Mahdi iyo Faarah
Inanka abdi iyo yuusuf-aar iyo xuseen-aabi
Intaasoo adeer iyo wuxuu aabahaa dhalay ah
Arrinkeygu waa inaan samaan wada eekeeyaayee
Abtiyaalladaa iyo wixii kuu arxama sheegta
Il ku aragtay aadmiga waan wada ajuuraynee
Inta aadseNnuur Idinleiyo nin guna u indha taagayso
Soo inaadeeray ma arag anigiyo aarkoode (faraskayga)"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Inkastoo habeenka iyo dharaarta qaarkiisba ay Mullaaxo ku sugneyd qalbigiisa, haddana Weerar ma xilo la'ayn haweenay aad u jeclayd ayuu qabay. Qudheedana waxba kama qarsooneyn sida ay bulshada kale ee deegaanku u ogeyd xagga Weerar Mullaaxo ka marayso, ayey iyana wax u ogeyd in badan ayey isku deyday inay u caqli celiso.

Markii ay taa ku guulaysan weyday waxay u cabatay hablo weyntii ay xigtada ahaayeen kuwaasoo intii ay u dhimrin lahaayeen iyada eeddii saaray, waxay ku canaanteen naag naag ahi hadday ku bannaan lahayd inaan ninkeedu dumar kale u hanqal taageen waliba gabayo u tiriyeen. Intay wiirsi u aragtay ayey laabta ka ooydey, waxay kordhisay dareenkii ay ugu jirtay sidii uu Weerar halkeeda ugu xasili lahaa ee isaga iyo Mullaaxo isu seejin lahayd waxse ugama naasa cadda.

Fiidkii dambe isagoo jacaylka gabadhu laf iyo ludba ka haleelay hammi iyo hawo adduunna la tiicaaya ayuu Weerar reerkiisii usoo hoydey. Way u toog haysayee, afadiisii oo guubaabo qabta ayaa si degdega gogol cusub iyo weelaalis isugu kor saartay, birkin sooma-gare ka buuxaan isugu dul dhigtay oo intay keydkii soo furfurtay soo ag joojisay xeedho iyo madiibado afka wada haya oo qofkii arkaa u malayn lahaa cunto dhawr qof loo wanaajiyey, intii ay ka maqneydbuu halkan eegay mise waaba hilboo jeera jeera ah kuwo kumbis ah iyo ood kac geeda adari.

Dhinaca kale ayuu eegay mise waa dhiilo ay ku jiraan weraasi lo'aad, karuur geel, gadhoodh adhi oo aan wali dhanaanaan, kuma uusan hambaasinee dhammaan wixii ay barwaaqo agtiisa soo dhigtay intuu afka ka duway ayuu goradda laallaadshey, gadhka iyo labada law ayuu isa saartay wax yar ka dibna waxa uu ku baraarugay aafadiisii oo inta ay aqalka kasoo baxday dushiisa taagan. Wuu dhugtay mise qoftuba qofkii maaha immika gogosha u dhigtay

Dhar wada cusub intay arxada kala soo baxday ayey soo xidhatay maro marsiimo ah, boqor midabo qurxoon, gambo ilyar ah oo sugul madaw ah, dugaagado lacaga oo gacmaha ka buuxisay, kuul asli ah oo ay luqunta ku sharraxday iyo kaba maas ah oo dhawaan loo tolay. Maxayse ugu taal haddii intaa Weerar ugu soo loodsami waayey Mullaaxana ay ku illawsiin weyday. Candhuuf bay dib u liqday waxbayse ahaan lahayd cunto-diidka, sheeka la'aanta iyo maqnaanshaha haddii uu ugu eekayn lahaa ee aanu u tiriyeen gabaygan uu ugu quusgooyey. Wuxuu yidhi:

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

"Hararkiyo kabdaha lays dul dhigay, sida haldhaa baalkii
Hilibka cusub haydaari wan iyo, sogob la hoogaanshay
Hadhuub laban caanaha Hoyaad, halab karuurkeeda
Habkaad igu baayici kabahaad, howda kaga yeedhin
Habka fudud halkaan yeel ku odhan, hagar la'aantaada
Haween baa tahaye adigoon, hadin kobtaan joogo
Waa habi la'aan dhuunigaad, hoo i leedahaye
Hindisaha Mulaaxaa qalbigu, haabo lee yahaye
Haasaawahaan qeybsannaa magac habeenkiiye
Adoon i hubsan soortaad halligi, haysku hanaq goynnin
Haraggayga unbaad arkiye, kuuma soo hoyanne"

Aakhirkiina Weerar muu calfan Mullaaxo ee waxaa hantiyey Nuur Idinlee oo ay xilo u noqotay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qisadii jacayl ee Wiil-Waal Iyo Raage Ugaas

Qisadani akhriste waxey ku saabsantahay rag caan ah oo Soomalida ku magac baxay, abwaanno iyo kuwo talis xukuma isugu jira. Qisadani waxey ka bilaabantay Raage Ugaas iyo nin uu gabadh ka doonay oo reer Jigjiga ah, kaddibse dad badan aafeysay. Raage Ugaas wuxuu ku dhashay ceelka Sasabane ee Ogaadeeniya, kana tirsan gobolka Jarareed ee ay xarunta utahay Dhagaxbuur. Raage Ugaas wuxuu kasoo jeedaa qoys talin jiray oo ugaasyo ahaa badankood, aabbihii waa Ugaas Warfaa Faarax Samatar. Raage waxaa kor uga weynaa walaalkii Xuseen oo isna Ugaas noqday.

Raage isagoo quwad qabiil, talis iyo abwaannimo magac-dheer isugu darsantay ayuu qoodhsaday oo uu guur doontay. Wuxuu ilaalada kolba meel mariyaba, waxaa lasoo sheegay gabadh qurux badani inay jirto oo Faadumo Nuur la yidhaahdo oo reer Jigjiga ah, oo iyada laftigeedu qoys garaaddo iyo quwadba leh kasoo jeedda, Raage reerkii buu dhowr jeer tagay, si caadi ah isagoon danihiisa sheegan, ileen reerku ab iyo oodna midna makala foga, oo wax shaki ma beerin booqashada Raage Ugaas.

Raage dhowrkii jeer ee uu tegay soona hubsaday quruxda gabadha iyo asluubta Ilaahay u dhammeystiray, jacayl iyo hammi guur ayaa qaaday. Gabayadii uu gabadha kula hadlay waagaas, haddaan mid ka soo qaadanno waxaa ka mid ahaa gabaygan hoos ku qoran. Haddaba gabaygani wuxuu cajiib ku yahay isagoon gabadha haa iyo maya midna ka heysan, ayuu Raage isu badiyay dhankii mayada oo uu ka dhigayaa in gabadhu diidday, si uu ugu beer laxawsado, oo kolkaa intey naxdo ay *"haa"* u tidhaahdo durbaba.

Wuxuu yidhi

"Allayl dhexe ilayskii imaray, ababa'daan mooday.
Ma Ugaaso Nuur baa qalbiga waanka oogsadaye.
Ina abtaay nin araggaaga jecel, kuuna iman waayay.
Oo eed sokeeyiyo ka baqay, uubatiyo qaylo
Oo oodi kaga meersantahay, aqalka aad joogto.
Arrin sidaad u kala laasataan, adiga uun baa og.
Geeluba Ugaasooy hadduu, ayda miranaayo
Abeerkiisa naaxdiiyo hadduu, aaranku is waayo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Isaguba makala aammuusee, waa isu ololaaye
Haddaan ina adeereey ku idhi, soo ma urugootid
Waan kugu adkeeyaye, haddaad iga ajiibeyso
Ogoobay adduunyada ma jiro, edeb wax dhaamaaye"

Raage jacaylkii qaaday iyo gabaygan oo dadkii ka dhawaa aga-gaarkaas deegaanku ahaa ku faafay, waxey ku kalliftay inuu gabadha doonto. Xulufada raacday ee gabadha la doontay waxaa ka mid ahaa: Aw Muxumed Salal, Ugaas Xuseen, Aw Cumar iyo Xirsi-Jabane Faarax-Cadde. Qaabkii guurka loo soo mari jiray iyo arrimihii la is dhaafsan jiray oo dhan baa la isku af-gartay, Hadalna idinkuma deeqsiin karee, miyaa aan idiin soo bandhigo gabay muujinaya oo sawir wanaagsan ka bixinaya guurka qurxoon. Waxaana tirshay geerarshihii weynaa ee la odhan jiray Weerar Bulxan Yuusuf, muddo isla beryahaas ku dhow. Wuxuu Yidhi Weerar Bulxan:

"Adoo dooba reer wacan haddaad doonto gabadhooda
Dalaaqaha haddii lagu xidhiyo, meherka diinteenna
Sida dowga dhaqankeenu yahay yarad haddaad deeqdo
Ood dalawa geel iyo fardiyo duunyo badan dhiibto
Toddobaadka hore waa duciyo dadabgalkaagii dheh"

Sawirkaas kore, ee Weerar Bulxan ina siiyey, ayuunbeynu ku tilmaami karnaa qisada dhex martay Raage Ugaas iyo qoladii uu gabadha ka doontay. Waxaase lagu xukumay saddex xujo, oo gaabaheed ku xujeystay Raage Ugaas. Saddexdaasi xujo waxaa ka mid ahaa, Faras Galaalan, Ugxan Goroyo iyo Ilig Maroodi.

Raage arrintaas sahashayoo, hawraarsan buu yidhi, dib buuna isu soo majiiray, tashiga uu ku soo tegeyna wuxuu ahaa haddii saddexdaas xujo soo furo, inuu gabadha la wareegi doono wakhtiga uusoo sheegto isagu. Ugxan goroyo iyada wuu helay taasoo geyigaas Ogaadeeniya aad ugu badnayd, ilig maroodina la hel oo wakhtigu wuxuu ku aaddanyahay 1850-60'kii, oo Ingiriis iyo Xabashi midna ma xaalufinnin, oo ugaadhi waa tubantahay. Faraskii Galaalnaa ayaa la waayay, Faras Gallaalan haddaan idiin macneeyno, waa Faras Madow, Midab dhiin ahna ku jiro, Kobta sanqaroorka ahna Bar-cad ku leh.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Raage Ugaas wakhti dheer bay ku qaadatay iyo socoto dheer iyo kolba reer marti iyo meeshii lagu sheegaba geyiga Soomaaliyeed. Markii dambe ayaa lasoo sheegay in Faras Galaalan uu heysto nin Majeerteen ah oo ka talin jiray dhul xeebeedka kore, lana odhan jiray Boqor Maxamuud Yuusuf (Xaawade), Oo Boqor Cismaan aabbihii ah.

Raage Ugaas isagoon cidna la tashan ayuu dhaqaaqay, safar dheerna usoo galay inuu ninkaas is arkaan. Sida loo badanyahay oo dadka suugaanta iyo taariikhda uruursha iyo qoyskii qisadani ku saabsaneydba, waxaa la isku raacay in Raage kolkuu reerka uyimid, uu iska dhigay nin dhaan-dhaan ah oo maskaxda wax uga dhiman yihiin

Soomaalidu isuma gudbi jirin, oo Raage Ugaas inkastuu magac-dheeraa oo gabayadiisa la wada hayay, laguna halqabsan jiray oo hadalka maalinta madasha la joogo lagu toosin jiray halku-dhagyadiisii. Haddana fursad buu u helay in qoyskii uu booqday ayna muuqaalkiisa garan.

Raage in maalmo ah ayuu reerka joogay, isagoo la leeyahay *"Nin waalan oo dheer oo qurux badan baa inagaga yimid dhankaas galbeedka"*, wuxuu udhukusaba, maalintii dambe ayuu arkay Boqor Xaawade oo beeshiisa Majeerteen shir u qabanaya meel geed hoostii ah. Faraskiina wuxuu ku xidhanyahay meel geedka inyar u jirta oo gabadh uu boqorku dhalay baa la joogta oo yar. Raage intuu tallaabo haldhaa qaaday buu faraska geedkii ka furay, kuna booday oo la fakaday.

Boqor Maxamuud Xaawade yaa intuu sheedda ka eegay faraskii oo sii boodhinaya yidhi, *"Wallee Ninkaasi ma waalna oo siduu fardo fuul uyahay baan arkaaye, War jiraase Cakaara ayuu iman"*. Waa maalinta ay maah-maahdu baxeyso, Cakaarana waxey aheyd tuulo aad u ilbaxnimo badan oo boqorka hoos iman jirtay.

Raage Ugaas isagoo wada faraskii galaalnaa, yuu soo istaajiyay sabada Sasabane, gabayna wuu ka tirshay ay niman urursan uu kala hadlayay iyo faraskuu kasoo dhacay Maxamuud Saleebaan iyo In Jidwaaq loo wado xoolahan. Wuxuu kaloo sheegayaa inaanu Raage aheyn nin gacan adag ee uu yahay nin bixinaya wixii la weydiistaba, siduu doono haku keene. Wuxuu yidhi Raage Ugaas:

"Faraskan shisheeyaha iyo u galay shuunka Maxamuuda
Faraskaan markii laga shakiyay laba shanaad siistay

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Faraskan sharabihiisii ku daray sidigtii dhool shaaxin
Waa shay mug le bagaan Jidwaaq ku shakamadeeyay
Nimankaad shaxayseen bagaan sharad ku beeneeyay
Shukrina waxan u naqayaa inaan shiqib ku weynaanin"

Raage Ugaas waxaa u kaamil noqday oo u dhammaystirmay saddexdii xujo, oo maalinkaas gacantiisa Ilaahay wada gashay, wakhti dheerse ku lumay, Ugxan Goroyo, Faras Galaalan iyo Ilig Maroodi. Raage intuu soo maqnaa ee uu arrimahan lagu xujeeyay uu raadintooda jirayba, waxaa reerkii gabadhu joogtay ku dul wareegayay Garaad Faarax Garaad Xirsi (Wiil-Waal). Garaad Faarax wuxuu ahaa boqor ka talin jiray galbeedka Ogaadeeniya, aadna caan u ah oo lagu bartay xujooyin maldahan iyo fiiro-dheer, qabiil quwad lehna dhex taagnaa. Garaad Faarax oo gabadha isna arkooday, aanse ogeyn in gabadhu doonnantahay, ayaa dhowr jeer gabadha aabbaheed weydiistay, wadaadkii baa ku jawaabay gabadhu waa doonnantahay.

Garaad Faarax baa yidhi *"oo qolomey udoonnantahay, ninkey'se udoonnantahay?*. Wadaadkii baa ku jawaabay *"Gabadha waxaa ka xoola baxshay Nin Reer Ugaas Samatar, Oo Reer Ugaas Xirsi ah, oo Raage Ugaas ah"*. Garaad Faarax markuu maqlay in ninka gabadha doontay yahay Raage, horayna uga dhaxeysa halgaad-maanso iyo is af dhaaf, ayuu damac labaad oo waalan sii galay. Raage Ugaasna aad buu ugu raagay xujooyinkii loo diray, inkastoo oo uu ku guuleystay keenistoodii, haddana wakhti bay ku qaadatay. Garaad Faarax si uu yeelayba Alle ayaa inaga oge, wadaadkii intuu raagsaday Raage, ayuu gabadhii siiyay Garaadka.

Gabadhu inkastooyna ku qanacsaneyn guurka qasabka ah ee la siiyay Garaad Faarax, oo ay wali hammigeedu jiray Raage Ugaas iyo wada sheekeysigoodii hore, haddana hadalkii aabaheed uun bay noqotoyoo, gabadhii la guuri. Raage ayaa reerkii yimid, isagoo arrimihii loo diray wada, gabadhii uu u socdayna deggantahay reerka oo dhowr biloodba la qabo, Garaad Faaraxna ku yahay inan-la-yaal.

Raage buulkii u horreeyay ee uu foodda soo gashay baa noqday kii gabadha, *"Biyo isiiya"* buu yidhi. Gabadhiina garatay ninkuu yahay oo way aqoonsatay, Raagena aqoonsay. Laakiin la isma wareysan, oo Raage wali waa war-moog, gabadhase wadnahaa loo dhaafay naxdin iyo argagax.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Raage oo geed fadhiya oo biyihii cabbaya, ayeey gabadhii intey orod balaw tidhi aabaheed keentay. Wadaadkii baa ugu tagay Raage geedkii. Kobtii baa la isku wareystay oo lagu kala war qaatay. Raage intuu cabbaar aammusnaa, marna istaagay, marna fadhiistay, amakaag iyo fajac awgii, ayuu gabaygan marshay oo Soomaali oo dhan ku caan baxay. Gabaygan wuxuu ina tusayaa, imuurtan weyn ee la soo gudboonaatay iyo dhibkuu soo maray iyo sida uu rejaynayo inay wax isu beddelaan, ama dhiig ha udaato ama si kale halagu keenee.

Wuxuu yidhi Raage Ugaas, Alle ha u naxariistee.

"Alleyl dumay albaabbadoo la xidhay, uunku wada seexday
Onkad yeedhay uugaama roob, alif banaadiikh ah
Iihdayda bixi baa libaax iman la moodaaye
Raggase adhaxda iyo ooftu waa udub dhexaadkiiye
Labadii waxlaga eegi jiray waan ka awdnahaye
Halkaan aa ka leeyahay Ilaah kaliya uun baa og

Aboodigu ma lalo garab hadduu iin ku leeyahaye
Orod uma holado ooglihii adhaxda beelaaye
Ma aarsado il iyo oof nimay iini kaga taalle
Usha ma uu qaadan karo sheybihii arag darreeyaaye
Aroos uma galbado nimuu wadnaha arami jiifaaye

Geeluba markuu oomo wuu olol badnaadaaye
Sidii inan yar oo hooyadeed aakhirow hoyatay
Oo aabbeheed aqal midkale meel illina seexshay
Hadba waxaan la urugoonayaa uurkutaallada e
Ninkaa ila xidhkiisii nin kale eegay baan ahaye
Ninka ilo biyaleh soo maree oomman baan ahaye
Ninka ooridiisii nin kale loo igdhaan ahaye

Ambaqaadka geeddiga kobtaan awrka marinaayo
Orod kulama boodiyo anoo soo argaagaxaye
Ilaalada halkaan ka arda dhigi waan odorosaaye

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Nin walaalkii Ugaas yahoo eeday baan ahaye
Nin abkii Ogaadeen yahoo aarsan baan ahaye
Afdhabaandhow aayar ninkaa aammusaan ahaye
Alle gooyey oo nabi inkiray oo Islaam ma ihi
Ninkaa oorideydii qabaa ubad hadduu yeesho"

Haddii Tixdaas uu tiriyay Raage Ugaas, wadaadkii intuu is garan waayay wuxuu ku hadlo, yuu Yidhi *"Gabadha ka yar baan ku siine, gabayga kobtaa ku jooji Raagow"*. Raagena yeel oo gabadhii ka yareyd baa la siiyay. Walise qalbigiisu minweyntii buu la jiraa uu dhibaatada usoo maray, ee uu xeebta salkeeda uga soo qaaday faraska. Raage isla qoyskii ayuu isna ku noqday inan-la-yaal. Garaad Faaraxna waa inan-la-yaal, oo labadii gabdhood baa la kala qabaa.

Garaad Faarax oo tixda Raage ugaas ee hub uruursiga ah maqlay ayaa si kibir ah ugu yidhi gabadhuu qabay, *"Naa ani iyo Raage geedkaas baanu kusoo shixiye, intaad si fiican usoo labisato, Ta kaa yar ee Raage la siiyayna soo kaxee, oo qolqolka nagu soo dul mara"*. Shaxdii iyadoo la jeexday, oo caadi loo ciyaarayo, Raagase shafkiisu guuxayo cadho owgeed, ayeey labadii gabdhood soo dul mareen oo midda weyni aad u lebbisantahay. Raage Ugaas baa aad il-qoodhka ula raacay, Garaad Faaraxna waa intuu rabaye. Raage Ugaas intuu ciil isla garan waayay ayuu tixdan bilaabay, labada dhinacna la is daba marsaday tixo sababi doona dhiig daadashadii.

Raage Ugaas Warfaa:
"Geenyada inaan toociyaa ila gudboonayde
sidii guluf wax weeraray cidlaan gelelafaayaaye
Kamaan dagay ... ...

Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:
"Geenyada nin lihi qoofashee qololka meeraysa
Qiyaasli'i ninkii ugu tagow qoomamaa xigiye
Kannaan dagay... ... ...

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Raage Ugaas Warfaa:
"Geenyada nin lihi qoofashee qollolka meeraysa
Manaloo qoonsanaayaa hadday fuulmo nooqabato
Kannaan dagay... ... ...

Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:
"Qumbe subaga oo meel qotoma oo nin lihi quuto
Qooraansigiisaa kuugu daran quud aan lacunaynin
Kanaan dagay... ...j... ... ...

Raage Ugaas Warfaa:
"Qumbe malaba oo meel qotoma oo rag wada quuto
Ma nalagu qoonsanaayaa hadday gaajo noo qabato
Kanaan dagay... ... ...

Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:
"Nin adoogi dhawr qaalin dhalay qolona kaa fiican
Ma lagu qoonsanaayaa hadduu gabadhi kaa qaaday
Kanaan dagay... ... ...

Raage Ugaas Warfaa:
"Nin adoogi dhawr qaalin dhalay qolona kaa liidan
Mala qoonsanaayaa hadduu rubadda kaa qaado

Raage oo ku soo gunaanaday "Mala Qoonsanayaa hadduu rubadda ka qaado" iyo toorridii oo uu dhuunta ka gashay Garaad Faarax ayaa is raacay. Sidaas ayuuna Garaadkii ku dhintay. Raage gabadhii weyneyd ee uu horey u caashaqay ayuu faraskiisii Weehad ahaa soo saartay, lana soo dhaqaajiyay. Gabayadii uu dib udiray iyo farriimihii waxaa ka mid ahaa, haddaan wax ka soo qaadanno:

> ***"Qab qab dhaafay bay laba qabiil qaran ku waydaaye***
> ***Qaabiilba Haabiil intuu qoonsaduu dilaye***
> ***Qar ha'dumo qiyaamana hadhaco qoysna yuu hadhine***
> ***Qacda waaga labadeenna qolo ha isu qaateene***
> ***Wallee Faarax Qooqaan ku dilay qoomamayn mahayo!***

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Raage Ugaas isagoo gabadhii la aqal galay, colaad labadii qoys udhaxeysaana ay jirto, ayaa amar Ilaahay, libaax qaaday gabadhii, kobtii ayaanay ku geeriyootay Alle ha unaxariistee. Raage Ugaasna wuxuu ka marshay gabaygan muruguda miidhan ah ee isna caanka ah, ee uu sheeganayo in gabadh inantaa udhiganta uusan waligiiba heli doonin.

Wuxuu yidhi:

"Sida koorta Yucub oo la sudhay, korommo buubaal ah
Ama geel ka reeb ah oo nirgaha, laga ka xaynaayo
Ama beelo keynaan ah oo, kor u hayaamaaya
Ama ceel karkaarrada jebshiyo, webi karaar dhaafay
Ama koox ardo ahoo quraan, kaadibka u toostay
Ama habar kurkii iyo wadnaha, lagaga kaw siiyay
Ama kaal danley qaybsatiyo, kur iyo dhal yaabis
Shinni kaaluf galay ama siddii, koronkoroo oomi
Xalay kololo'aygii ma ladin, kaamil reeruhuye

Kunbulkiyo ardaagii miyaa, laygu kaliyeeyay?
Wixii laygu kuuniyay miyaa, igu karaamoobay?
Kunbiskii miyaa layga qubay, kolayo ii buuxay?
Maantana kataankii miyaa, layga kala qaaday?
Kob abaar ah meel dhexe miyaa, koore ila meeray?
Kub miyaan ka jabay biixi aan, kabayo loo haynnin?
Kun iyo kow kurtood dumar haddii, laysu wada keeno
Kolna waxaana heli karayn haween, Faadumoo kale'e"

Muddo aan xiligaas ka fogayn ayaa Raage Ugaas lagu dilay dagaal ay Jidwaaq soo qaadday. Wuxuuna ku aasanyahay meel magaalada Fiiq inyar ka xigta galbeed, Alle ha u naxariistee.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sheekooyinka Qosolka Iyo Lammaanaha

Dhoodaan Iyo Jacburkiisii

- *Anigaba dharaarahan qalbigu waa i ruxmanayaayee*
  Gabadh meel maraysay baan rabaa inaan jeeclaadaayee
  Laakiin ninbaa i waalayoo ii durbaan tumaye
  Wuxuu yidhi haddaad caashaq tahay dheefta wada-diide
  Aniguna run baan moodayee kama dhagaysteene
  Maantiyo shalaytiyo darraad waanigii qadaye
  Baahidii i haysaan ka baqay inaan hunqaacaaye
  Saaxiibkiisa mooyee anuun gaajo ii dilaye
  Ninkaa inaan budheeyaan damcee caawa ila raadi

- *Haddii inan aad jeclayd gaadhi kula soo fuusho*
  Oo uu dhinacaana ka fadhiyo ruuxaad garaneyso
  Ama aad gurigoodii tagtood lana ciyaarayso oo
  Hooyadeed joogtoo weliba soo jeeddo
  Ileen adigiyo gabadhaasi waad kala xishootaanee

- *War horta nin-yahaw anigu waan jeclaadaaye*
  Gabadhbaan jeclahay oo i jecel mana jeclaadeene
  Haddii ay i jeclaatana ma rabo inaan jeclaadaaye
  Ninkii ay jeclaatana waa inuu jeclaadaaye
  Kii aan jeclayn waa iyadu inay jeclaataaye
  Jacaylkagya iyo keedu waa laba jeclaadoode.

- *Gabadh jinaha dhuudhuuban waa inaan jeclaadaaye*
  Tu naasuhu janjeedhaan waa inaan jeclaadaaye
  Middii jeer la moodoo dhan waa inaan jeclaadaaye
  Garoobtii i soo jiidha waa inaan jeclaadaaye
  Islaan baradho jiidaysa waa inaan jeclaadaaye
  Duqdii jaadka gadaneysay waa inaan jeclaadaaye
  Habar jeenyo buurbuuran waa inaan jeclaadaaye
  Wadaaddii aan jeclaadee dharraar macawsta i siisay
  Gurigeeda waagaan tegee ay shaaha ii karisay
  Haasawaheedii kolkuu sooba madhan waayey

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Feedhka iyo tantoomada sideer uguma boobeene
Kolkay qaad i siinweydey ayuu mawdku ka adeegay.

- *Ninkii dumar jeclaadaase wuu yara ammaantaaye*
  Adna waxaaban kuu soo fekeray hadallo dhaadheere
  Midabka iyo quruxdaadan ayaan yarahe faalleyne
  Gabadhyahay casaantaadu waa dhuxullo meygaage
  Afkaagana madowgiisu waa nuuraddoo kale e
  Sidaa aawadeed baan jacayl kuugu soo kacaye
  Guur-na waaban kaa doonaya sidaa dharraartiiye
  Timahaygu siday yihiin eed cirrada moodo
  Duqnimiyo gabow igama aha oo wayska dhalankaye
  Adiguna carruurbaad tihiyo sida dhallaankiiye
  Isku qayrna waa nahay anuun baa laba Gu! kaa weeyne
  Sanadkii Daraawiishtii baan dhoocillo ahayne

- *Dhallinyaro inaan nahay dadkuba waa ogsoonyahaye*
  Inan iyo barbaar baan nahaye waan lagaranayne
  Raggaa kale juuq ha u odhan aniga mooyaane
  Kii kula hadlana waa inaan feedh ka badiyaaye
  Haddii layga kaa dhaco waxbaan sahayan doonaaye
  Dabadeed dhagaxa waa inaan gurtoo qaylo kiciyaaye

- *Naagtana ka iga qaada waa inaan ka dhuuntaaye*
  Ninuu ciil lafaha buuxiyoo dibinta ruugaaya
  Oo luqanta hoogaamiyo gegi xarriiqaaya
  Haddii kii xumaantaa ku falay weliba maad maagtid
  Sidii laba digaag sow ilkaha layska cuni maayo

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Kelmadihii kal-gacalka

Nin baa ay isaga iyo xaaskiisu sannadkiiba maalin samaystaan xaflad ay ku xusayaan maalintay is-guursadeen, waxay samaystaan qada-sharaf, taasoo lammaanaha is-qabaa midba qof asxaabtiisa ka mid ah ku soo casuumo qado-sharaftan xusuustu ku dheehan tahay. Sannadkan ninkaa u leh inuu qof ku soo martiqaado, waxaanu kusoo casuumay nin ay asxaab yihiin. Markii miiskii qadada layskugu yimid ayaa ninku markasta oo uu xaaskiisa u yeedhayo, wuxuu ugu yeedhayaa kelmado kalgacal ku dhan yahay. Isagoo leh *"xabiibi malqacaddaa iisoo dhiib, macaan waxan iga qaad, gacaliso halkan soo fadhiiso, noloshaydii koobkaa iisoo durki"*
Ninkii casuumadda martida ku ahaa wuu la qushuucay, sida uu saaxiibkii xaaskiisa erayadii kalgacalka lahaa oo dhan ugu dhammeeyay. Markay gabadhii alaabtii lagu qadeeyey qaadday ayuu saaxiibkii kusoo dhawaaday, isagoo ku leh *"saaxiib yaa-iska-kiin ag-jooga oo erayadan kalgacalka leh ee afkaaga kasoo burqanaya iska dhageysta"*.

Ninkii loo martida ahaa wuxuu ugu jawaabay; saaxiib kalgacal igama ahee magaceedaan ilaawaa, dumarkuna kalmadaha kalgacalka leh way ka simanyihiin ana kuwaasaan ugu yeedhaa markaan magaceeda ilaawo.

Abwaan Cabdi-Malaw

Wakhti-wakhtiyada ka mid ah, ayaa Cabdi-malaw xanuunsaday, waxa la dhigay Cusbitaalka, gaar ahaan qaybta waadhka ee ragga. Waxaa markaa qaybtaa soo booqday hablo hadba dhinac isu weedhaaminaya oo laafyoonaya Cabdi-malaw hablihii ayuu jalleecay, waxaana uu ku yidhi; *"Naa labadii is rabaw bannaan isla tagoo ragga buka reenka kala taga"*

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Odeygii Islaantiisa Furay Iyo Wadaadkii

Nin oday ahaa ayaa islaantiisu ka xanaajisay maalin maalmaha ka mida, isna xanaaq dartiis ayaa dalqad aanu ugu tala galini ka dhacday,

Odaygii: naa Cibaado xaalka inaan saa u xumeeyo maan rabine bal tali oo maxaan samaynnaa?.

Islaantii: xaaji dee kolay arrinku waa kaa dhacaye bal inamari aynu qiil soo raadsannee...oo kii Sheekh Warfaa ahaa ayaa la yidhi qiilalkuu sameeyaa ee bal isaga u tagnee.

Odaygii: waayahee bal ina kaxee qiil aan soo raadsanee.

Islaantii Cibaado iyo odaygeediiba qiil ayay u soo raadsanayaan bal sidii dalaaqdaa dhacday looga daba-tagi lahaa oo waxba kama jiraan looga dhigi lahaa. Tuuladana waxaa deggen sheekh aan wax kalaba ka shaqayn ee dadka is fura markay heshiiyaan qiil u sameeya.
Sheekhii ayey u imanayaan islaantii iyo odaygii oo wada socda.

Odaygii: Sheekh waxaan doonayaa inaad qiil ii samayso gabadhaydan ayaan dalaaq ku ridaye"
sheekhii ayaa qiil maskaxda ka baadh-baadhay oo intuu cabbaar aammusnaado oo uu islaantii eego weydiinaya,
Sheekhii: Cibaado markuu xaajigu dalqadda kugu ridayay maad fadhiday mise waad taagnayd?
Cibaado: mayee sheekh waan fadhiyay.
Intuu cabbaar aammuso ayuu odhanayaa *"Haddaa dalqaddaasi way ku dul martay"*.

Xishoodka, kal-gacalka iyo Wanjalidda Carruurta.

Beribaa waxa jiray wiil iyo gabadh muddo dheer is-jeclaa, inanta reerkoodu aad ayey u ilaalin jireen, waxaana ku adkayd inay ninka ay jeceshahay u baxdo oo u sheeko tagto. Si aan looga shakiyin habeenka ay sheeko tegayso waxay kaxaysataa cunug yar oo ay habaryar u tahay, wiilka yar iyo ninka ay la sheekaysataa waxay isu-barteen sidii laba qof oo wax-isku ah. Wiilka yarina

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

waxa uu u yaqaannaa adeero, markaas gabadha, wiilka yar iyo ninkuba waxay isku noqdeen ceeshow-milix.

Muddo waxa kal-gacalkoodu isku milmaba, waa laba nafood oo is-jecel oo wakhtiyo badan habeennimo kulmayee, inantii ayaa habeen-habeenadda ka mid ah waxa ka siibanaya naqas. Intay xishooto ayey kii yaraa ee ay habaryarta u ahayd wanjalaysaa oo ay odhanaysaa intay dhirbaaxdo *"waar nacas yahaw naga daa dhuusada"*. Jacaylkeedu waa uu fahansan-yahay in aanu ahayn wiilka yar cidda *neeftu* ka fakatay.

Ninkii wuxuu maanka ku hayo wanjaladdaasi wiilka yar, ayaa isagii waxa ku dhacday habeen-habeenadda ka mid ah inuu naqas ka fakado. Waa uu naxay, farsamo kaleba kama fikirine, isna dhirbaaxo inta uu ku dhuftay wiilkii yaraa ayuu yidhi *"Adeer naga daa bahasha"*.

Inantii ayaa is-hayn wayday oo ka damqatay dhirbaaxada ku dhacday wiilka yar ee ay habaryarta u tahay oo tidhi *"Waar inanka yar dhirbaaxada ka daa waxba muu samaynne"*. Ninkii baa si daacada oo qosol leh u odhanaya *"macaan waxaan moodayey in kolba keenna ay ka fakataa uu ka yar dhirbaaxayo"*.

Hinaasaha

Gabadh baa muddo guri lahayd, nasiib darro intaa waxba may dhalin. Aakhirkii waxay odeygeedii ku tidhi *"Iska guurso anna raalli baan kaa ahay, aroos kaagana qayb libaax baan ka qaadanayaa"*.

Odeygii wuu guursaday, habeenkii gabadha lasoo hoynayeyna waxay shaqayso oo ay hawsha kala maamushaba, waxay gashay baadka lagu qubaysto si ay arooska isugu diyaariso. Isla markiiba hoonkii gawaadhida ayaa yeedhay, dadkiina alalas iyo mushxarad bay isku dareen. Iyana iyadoo saabuuntii leh dharna aan xidhneyn ayey baadkii kasoo booday. Iyadoo leh *"soo dhawaada soo dhawaada u banneeya arooska u banneeya"*. Ma waxaanay dadkii in qososha iyo in yaabta aanay noqon baa?.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Islaantii Hinaastay Iyo Salaaddii.

Islaanbaa waxay ka hinaastay odeygeeda oo ay in muddo ahba tuhunsanayd inuu meel kale xamaanta u guranayo. Habeenkii dambe oo guriga la wada joogo islaantuna kacsan tahay ayaa waxay islaantii u kacday salaaddii cishaa'i, iyadoo markii ay Alxamdu akhriday ataxyaadkii ku xigsiisay. Odeygii wuu yaabay. Isagoo hinaasaheedana ka warhaya ayuu ku yidhi *"wixiiba sarajooggada ku akhridaye Cutiyooy maxaad la fadhiisan"*

Ninkii Gabadhiisu Maxkamadda Kusoo Oogtay.

Nin ku noolaa Ingiriiska muddo aan badneyn ayaa maxkamad looga yeedhay, iyadoo lagu yidhi gabadhaadaa ku soo dacweysay. Markii maxkamaddii la horkeenay ee laga waransiiyey ayuu yidhi *"gabadhani cunahay i qabatay, waxay soo gashay baddayda, waxay iga furtay gabadhaydii hore, way i lug goysay"*. Haddaba isagoo intan English ku odhanaya ayuu yidhi;*"she catch my neck, she enter my ocean, also she cut my leg and she open my first wife"*

Raggii caddaanka ahaa ee maxkamadda joogay meel ay u qaadaan bay garan waayeen kelmaddii, iyagoo sidii ay kelmaduhu ahaayeen u fasiranaya oo leh gcormay *"lugta ku goysay iyo ma badbaad leedahay?"*, halkaana is af-garan-waa baa ka dhacay.

Ciyaalka Yaan La Sahashan

Odeybaa wuxuu qabay gabadh aad u buuran oo xagga dambe u weyn, laakiin odeyga gabadhiisa waa laga indhasaabay. Hadba gabadhii kale ee uu arko inay badhi leedahay ayuu badhida taaban jiray.
Maalintii dambe islaantii uu qabay oo maydhaneysa ayaa wiil yar oo ay dhashay daf usoo yidhi. Markuu hooyadii arkayna wuxuu ku yidhi; *"hooyo badhidaadu weynaa"*. Islaantiina ilmihii yaraa waxay ugu jawaabtay *"hooyo waxaasaa aabbahaa laga qariyey oo la tusi waayey"*.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Hubsiimo Halbaa La Siistaa

Nin aad u guur badnaa oo sida la sheegay dhawrkii maalmood intuu afar furo afar kale meherin jiray, cadadka dumarka uu guursadeyna lagu qiyaasay boqol iyo wax ka badan, ayaa la weydiiyey goormey kugu yaab badneyd?. Wuxuu yidhi *"maalin baan inan u xayd-xaytay oon damcay inaan guursado anigoo hawshii meherkeeda u xamaan ururSanaya ayaa nin ii yimid isagoo igu leh waar gabadhan aad xamaanta u ururSaneyso miyaad taqaannaa?"*.

Markaan ku idhi *"maxaa jirana?"* wuxuu yidhi *"waar shalaybaa suuqa lagu dhunkanayey. Aniguna halkiibaan kaga hadhay maadaama oo suuqa lagu dhunkanayey"*. Dhawr cisho ka bacdi, ayaan arkay ninkii inanta wax ka sheegaayey oo guursadey inanta laftigeedii, waxaan ku idhi *"waar sowdigii lahaa suuqaa lagu dhunkanayey?"*. Wuxuu iigu jawaabay *"horta cidda dhunkaneysay miyaad i weydiisay wuxuu ahaa aabbaheed"*. Markaa waxaan ku hadlaan garan waayey. Waa sheekadii iigu layaabka badneyd.

Qurbaha Iyo Dhibaatadiisa

Ninbaa qoys aad u fiican la xididay oo inan ka guursaday, ninkan oo ahaa inan-la-yaal, ayaa isaga iyo xididkiisu waxay ceeshow-milix isku ahaadaanba ninkii waxaa usoo baxay **Visa** Maraykan ah. Waxaana uu tegay carriga Maraykanka.
Maraykanka caado xunbaa laga yaqaannaa, nin 'nin qaba! iyo gabadh' gabadh qabta!. Dadkaa baadida cad ku sugan ayuu ninkii arkay, waxaanu la saaxiibay qaar ka mida ragga'ragga wax ka daya. Wuxuu la socdaba markii dambe ayaa lagu yidhi *"wax ma isku dayeysaa?"* wuxuu yidhi *"anigu waddankiibaan nin aan guursado ka doonanayaa"*. Markii dambe wuxuu ka soo degay madaarka. Isagoo shandad lacaga sita wuxuu yimi gurigiisii. Habeenkii dambana wuxuu hudheelka ku casuumay nimankii ay xididka ahaayeen.

Markii cashadii la iskugu yimidna wuxuu yidhi *"horta xidid idinka fiican waligay maan arkin, sidaasay tahay si aan xidid tinimadiina usii xoojiyo oon usii adkeeyo, hore inanbaan idiinka qabay, caawana wiilbaan idiinka fadhiyaa inaad isiisaan?*. Cajaa'ib! odayaashii cumaamaddii bay tureen, iyagoo dib u gurtay, lana yaabban waxa uu ninkani ku hadlay. Nin maskax badan oo sheekadan la fahmaya ayaa yidhi *"u kaadiya anigaa ninkan la gudhinayee, adeer maxaad tidhi*

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

wiilbaan doonayaa inaad isiisaan waayahay waanu ku siinaynnaa. Laakiin saddex shardi baanu kugu xidhaynnaa:

1. *Lacagta gabbaatiga ee aad wiilkaa ka bixinaysaa waa gole-kaga-kac, imikaad bixineysaa.*
2. *Inanka annagu kuu keeni maynnee adigaa la soo heshiinaya.*
3. *Wadaadkii kuu meherin lahaana soo kaxayso"*

Ninkii lacagtii halkii buu ku bixiyey, wiil kasta oo uu la had-laana *"waar naga tag"* buu yidhaahdaa. Isagoo kolba leh *"Cabdow kaalay ka warran haddaynu isku xidhno?"*. Markii laga dhegaysan waayey, dadkiina la wada yaabeen aakhirkii wuu toobbad keenay.

20 Dhunkasho .

Nin bakhayl ahaa ayaa wuxuu u dhoofay dibadda isagoo xaaskii iyo carruurtiina magaalada kaga tegay. Markay bilkastaa dhammaato oo ay xaaskiisu la hadasho si uu biilka usoo diro wuxuu odhan jiray *"waxaan kuusoo diray 20 dhunkasho"*. Haddana bisha kale 40 dhunkasho isagoo mar kasta oo xaaskiisu biilka weydiiso usoo dira dhunkasho, xagguu lacag uga soo diri lahaa.

Maalintii dambe ayey la hadashay iyadoo ku leh *"waxaa ii yimi inankii laydhka lacagna mahayo, markaa waxaan siiyey 20 dhunkasho, Ninkii biyaha shubaayeyna waxaan siiyey 10 dhunkasho, kii cawska jaraayeyna 15 dhunkasho, ninkii tukaanka biilka aynu ka qaadanno haystayna waxaan siiyey 40 dhunkasho markaa kisskii /dhunkashadii aad soo dirtay way dhammaatay qaar kale soo dir noo"*.

Ninkii dhunkasho dambe miyuu soo dirayaaba, waxbaa ka qabsadey sidii baanu bilihii dambe lacag ku soo diray.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Il-Jebinta Ragga ee Hablaha

Ninbaa inan arkay aad u qurux badan oo indha-jiidasho leh, wuxuu inantii il qoodha ka eegaba markay usoo dhawaatay ayuu is yidhi u il-jabi. Markuu is yidhaa u il-jabiba labada indhood wuu isku qabtaa. Inantii baa yaabtay iyadoo ku leh *"maxaad labada indhood isugu qabaneysaa?"*. Isna si daacad ah ayuu u yidhi *"way iska kay raaceen"*. Isagoo u jeeda midbaan is ahaa isku qabee labaduba way iska kay raaceen.

Dhaqtarka Carruurtaan Ahay.

Dhakhtar iyo gabadh gashaanti ah ayaa muddo wada socday. Walow dhakhtarku aanu aqoon u lahayn gabadha waalidkeed! haddana isaga iyo gabadha waxa ka dhexeeyey xidhiidh aad iyo aad u wanaagsan. Markasta oo ay isaga iyo gabadhu is arkaanna waxay wakhtiga ku dhammaysan jireen kaftan, qosol iyo haasaawe.

Haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa dhakhtarkii go'aansaday in uu gabadha aabbaheed ka doonto (Jacayl baa haya) inanta aabbaheed ayaa weydiiyey *"Adeer maxaad ka shaqaysaa?* Wuxuu yidhi *"waxaan ahay dhakhtarka carruurta"*. Aabbihii oo shaqadaas saluugsan baa si qosol leh u yidhi *"Adeer maxaad waxbarashadaada u sii wadan weyday aad dhakhtarka dadka waaweyn noqotidee"*.

Waar Ciyaarta Masaajidka Ka Daa

Waxa jiri jiray Oday magac weyn ku lahaa degaanka uu deggan yahay oo Alle uu hanti badan siiyey oo maalqabeen ahaa. Waxa intaa u sii dheraa in uu caan ahaa oo laga wada yaqaanney dhulka Soomaalidu degto Oday Xaamud waxa uu lahaa saddex gabdhood oo qaangaadh ahaa oo Alle qurux saa'id ah siiyey. Balse nasiib-xumo hablihii oday Xaamud way ku waaweynadeen, al micna wa laga soo doonan waayey oo laga guursan waayay. Markaas ayuu oday Xaamud fikiray oo maalin Jimce ah uu masaajidkii uu ku tukan jirey tagey, bacda salaaddii ayuu kacay oo uu khudbad jeediyay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Markaas buu dadkii la hadley oo ku yidhi waan isa-sir og-nahay dadweynow in hablahayga aad u soo doonan waydeen lacagta ay haystaan dartood, oo aad is leedihiin oday Xaamud hablihiisa nin maalqabeen ah uun buu la rabaa. Laakiin maanta waxaan idiin shegayaa nin Alle ninkii raba saddexdayda hablood anigaa siinaya oo waliba kharash ugu daraya, markaas bay dadkii yaabeen oo loo qaadan waayay hadyadda Alle ee uu bixinayo.

Nin dhallin yar ahaa oo safka hore fadhiyay oo laakiin aan ahayn nin weji fiican leh, al micna aan qurxooneyn ayaa farta taagey oo yidhi *"anigaa xaaji Xaamudow gabdhahaaga mid ka mid ah u diyaar ah"* maxaa dhacay haddaba? Oday Xaamud talo ku caddaatey oo gabdhihiisii qurxoonaa ayuu ninkan u quudhi wayay – markaas buu ku yidhi ***"waar ka daa ciyaarta misaajidka oo gacanta hoos u deji..."*** *"yaa diyaar u ah markaas buu sii yidhi"*.

Furniinkii iyo farxadii ka dambaysay

Wiil ayaa qabay gabadh ay ilmaadeer ahaayeen oo uu aad u jeclaa waxay isu lahayeen 2 ilmood. Maalin ayaa dhacday in ay ka hinaasto ninkeeda, kaddib ninkeedii oo guriga usoo hoyday ayey dagaashay, mindi ayey ula soo baxday oo ku tidhi *"i fur iminka"*. Wax walba intuu sameeyey ayuu maslixi kari waayey. Kaddib waxay ku tidhi *"inaad ifurto iyo inaan ku dilo kala dooro"*, markaa ayuu ku yidhi *"hagaag, ee aan helno markhaati"*, wey ka diiddey markaa ayuu qolka galay oo qorey warqad iyadoo agjoogta. Wuxu ugu qorey magaciisa iyo magaceeda *"waxaan ku caddaynayaa warqaddan anoo maankaygu taam yahay inaan kujeclahay, lagamana yaabo inaan ku furo inaan kaa dhinto mahee"*. Intuu isku laallaabay ayuu udhiibay.

Gabadhii ma ay furin ee armajada ayey ku ridday, wuuna tagay gabadhina marki xanaaqii iyo tuhunkii ka ba'ay maalmo kaddib ayuu xanuunsaday wiilkoodii, wuu u yimi markay aragtay ninkeedii ayey ku tidhi *"waan ku jecelahay, waanan ka qoomameynayaa waxan sameeyey"*, markaa ayuu ku yidhi *"haddii i jeceshahay anigu wali ninkaaga ayaan ahay"*, markaa ayey ku tidhi *"miyaad igu laabatay"* wuxu yidhi *"maya ee kumaanba furin"*, gabadhi ooyaaban ayaa tidhi *"miyaad waalan-tahay sow digii i furay"* markaas ayuu yidhi *"caddayn keen inaan ku furay"*. Waxay la soo orodday warqaddii marka ayuu yidhi *"fur oo ii akhri"*. Gabadhi marki ay furtay wey filan-weyday, oo farxad is hayn

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

weyday ... waxay tidhi *"waa **ninkee** ninka sidaa reer kiisa u **badbaadiya**"* wuxuu ugu jawaabay *"waa aniga ina abti"*.

Waaryaa Maxaad Dooneysay?

Makiinadda hadhuudhka, ayaa wiil yar oo afar iyo toban jir ah hooyadii usoo dirtay inuu hadhuudh ugu soo ridqo.
Markuu makiinaddii cajiinka yimid waxaaba hor taagan gabadh quruxi ku idlaatay oo intay yara kululaatay xijaabkii garabka saaratay. Kii yaraa meel kalaba ma aadin, intuu is-illaabay ayuu gabadhii u daawasho tagay, siduu u fiirinaayey gabadhii ayaa xishootay, iyadoo rabta inay indhihiisa iska leexiso ayey ku tidhi *"waaryaa maxaad dooneysay"*. Kii yaraa intuu naxay ku lahaa *"hooyaa naas iisoo dirtay "*.

Islaantii iyo Ammaantii

Wadaadbaa wuxuu qabay islaan gaari ah oo nadaafadda gurigeeda aad ugu dedaasha. Isna aad buu ula dhacay siday u diran-tahay ee ay hawlaha guriga ugu dabacsantahay. Markastana wuu ammaani jiray, isaga oo yidhaahda *"ma heblo oo kale, ma-iyadaa dumarkaba ku jirta"*. Ammaanta oo qofka laga badiyaana khasaaraheed ayay leedahay.

Maalintii dambe ayey islaantii is tidhi wadaadku ha ku sii ammaanee maad kitaabka u maydhid. Waa kitaabkii xaashi casaha ahaa ee wadaaddadu qur'aanka ka akhriyi jireen, markay meydhayna khadkiibaa isku daatay. Wadaadkii maxaa qabsaday, kala-calaf-qaade isaga iyo ammaantii faraha badneyd ee uu gabadhiisa ku harqiyey.

Kaalay Kun Kalana Dilnee,

Ninbaa inan uu jeclaa jaanis u waayey inuu habeen uun dhunkado, markii dambe ayuu ku yidhi *"ma-ogtahay haddaynu is dhunkanno waxaynu ka dhigannahay inagoo dilnay kun gaalo ah"*. Inantii way yeeshay markuu sidaas ku yidhi. Wuxuu dhawr jeer dhunkadoba uu ka haqab beelay ayey u yeedhay, iyadoo leh *"kaalay kun kalena dilnee"*. Isagoo kasoo yara taagan dhunkashada ayuu si qosol leh u yidhi *"naa naga daa dhiigga lama badsadee"*.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Sheeko Dhex-martay Lammaane is Qaba.

Sheekadan oo ah mid ila qosol ah ayaa ka dhex dhacday nin iyo naagtiisa oo dhanka Afsoomaaliga iyo caqliga isku fahmi waayay. Kaddib markii mid kastaa uu baahidiisa gaarka ah ka hadlay, waxa dhex maray sheekadan;

Xaaska: waryaa xaggee jirtaa dulliyahow?
Ninka: macaanto magaalada ayaan joogaa.
Xaaska: Wareegga xilligaan aad kujirtid maxaa waaye waryaa?
Ninka: Macaanto maxa-suusataa dukaankii dahabka ee hadda kahor Katiinka quruxda badan uu yaallay ee aad dhihi jirtay katiinkan ii gad??
Xaaska: Haa Gacalliye waan xasuustaa, Macaane Katinki miyaad iisoo iibineysaa neh, I Love U macaane..
Ninka: Ninka dukaankaas maqaayad u dhaw ayaan shaah ka cabbayaa, Hadda shaah caddees Ma Kuu Soo Qaada Neh.
Xaaska: War bax aan ku dhahay nacasyahow, qasaaro ayaa tahay wax-ma-garad ah.
Marka sheekadu marayso meel macaan waxay odhanaysaa gacalliye, marka sheekadu gaadho shaah iyo wax aan dhaaminna waxay odhanaysaa nacas ayaad tahay, cajiib badanaa.

Hooyo ninkii wuu kala daatay

Oday qurbaha deganaa ayaa hargeisa ku guursaday inan da'ahaan ka yar oo uu dhali karo.odaygu waa naafo, oo waxa ku jira lug iyo gacan caag ah.hadaba habeenkii arooska markii xafladu dhamaatay, ee loo kala tagay isaga iyo aroosadii, ayuu qolkii hurdad soo galay, markaasuu lugtii iska bixiyey oo halkan dhigtay. Haddana gacantii buu bixiyay oo iyana halkan dhigtay,Ilko caag ahaa oo ku jirayna miiska ayuu dul dhigtay. Inantii oo anfariirsan ayaa sariirta ka booday oo orod is dhigtay ilaa reerkoodii . hooyadeed baa kusoo booday oo tidhi "hooyo maxaa ku helay?" inantii baa ku jawaabtay "hooyo ninkii wuu kala daatay"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Ninkii maxaa qabsaday

Gabadh aad u guursi badneynd oo ahayd isku filan, calashaan guri iyo lacagba way iska-haysatay, ayaa markii ay kala tageen oo ay is-fureen ilaa afar nin, ayaa ninkii indhaha ku qac-siiyey kaatabaankii yaallay qolka hurdada oo ay saaran yihiin afar koofiyadood. Ninkii ayaa yaabay wuxuu bilaabay waraysi ku saabsan koofiyadahan fara badan.

Ninkii: Walaal waxaan ku weydiiyey waxan oo Koofiyado ah, maxaa kaatabaanka ku soo ururiyey?
Gabadhii: Walaal xusuus baan u haystaa.
Ninkii: oo maxaad ku xusuusataa?
Gabadhii: Koofiyaddaas cas, waxa lahaa ninkaygii tahriibay. Koofiyaddaas huruuda ah, waxaa lahaa ninkaygii gaadhigu jiidhay. Koofiyaddaas cad-na waxa lahaa ninkaygii ila guursaday. Koofiyaddaas yara-cagaaranna waxaa lahaa ninkaygii ciyaaloobay.
Ninkii: naa heedhe!!! Koofiyadayddiina waanigaa kaatabaanka kuu saaraye waxaad tidhaahdaa marka lagu weydiiyo **waxa lahaa ninkaygii hore ee lafihiisa la baxsaday.**
Ninkii wuu yaabay, sidaa ayuunna gabadhii ku furay.

Damacii macallinka

Nin macallin ahaa ayaa malcaamaddiisa waxaa lagu soo daray inan yar oo shan jir ah, inanta yari aad bay u qurux badneyd. Dabadeedna macallinkii wuxuu sawirtay inantan yar ee quruxda badan hooyadeedna talow waa sidee, miyaanay sidan u qurux badneyn. Wuxuu maqli jiray heestii ahayd *"inani waa hooyadeed"*. Macallinkii wuxuu damac ka galay islaantii inanta dhashay isagoo maalin walba ta yar weydiiyaa *"hooyadaa ma sidaney u qurux badan tahay ,xataa ma sankaaganoo kalay leedahay"*. Iyana maalin walba wuxuu macallinku weydiiyo hooyadeed iyo aabbaheed oo wada jooga ayey u sheegtaa.

Maalintii dambe ayey odeygii iyo islaantii oo wada joogaa macallinkii kaarto u degeen, iyagoo tii yarayd u faray farriin, kuna leh waxaad macallinkii ku tidhaahdaa *"aabbaa safar u baxay, markaa hooyaa ku doonaysoo ii kaalay "*bay ku tidhi. Macallinkii markii ay u sheegtay aad buu u farxay isagoo is leh maantuunbay arrintaadu dhantahay, wuxuu isasoo hagaajiyaba albaabkiibuu soo garaacay. Markii ay islaantii ka furtay ee ay laba kelmadood is

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

weydaarsadeen ayuu odeygii albaabkii soo garaacay, isaga oo leh naa heblaayoy iga fur, islaantii wey gabgableysay.

Iyadoo leh maxaa soo celiyey sowkii baxay maaha, macallinkiina halkanuu isleeyahay talow xaggeed ka baxdaa, laakiin waa kaarto loo dagaye halkan waxaa yaalla tib iyo mooye iyo jawaan hadhuudh ah oo ag-yaalla, islaantiina waxay macallinkii ku tidhi *"xijaabkan qaadoo, jawaankan hadhuudhka ah tun, waxaan ku odhanayaa, waa inan jaarka ah oo noo soo wareegtaye"* siduu baanu xijaabkii intuu xidhay tumay hadhuudhkii.

Odeygii markii albaabka laga furayna wuxuu yidhi; *"iisoo dhiiba ganbadh"*. Waxaana uu ag fadhiistay hadhuudhkii la tumayey, isaga oo leh gabadhani *"talow maxay ahayd?"*. Islaantiina ay leedahay *"waa inan jaarka ah oo inoo soo wareegtay"*.
Macallinkii miyuu is dhaqaajinayaaba, hadduu hadlo waa lagu fahmi-buu isleeyahay, wuxuu hadhuudhka tumaba jawaankiibaa lagu dhammeeyey. Markuu hadhuudhkii wada tumay ayuu odeygii iska baxay, isna isagoo naf-ka-bax taagan ayuu xijaabkii tuuray albaabkana ka booday, miyuu dib u haweysanayaaba meesha waxbaa ka qabsadaye.

Nacaskii Iyo Fashilaaddii Haasaawaha

Islaanbaa waxay dhashay nin nacas ah oo wax walba oo uu sameeyo sheega, maalintii dambe ayey hooyadii ku tidhi*"hooyo iska guurso illeen waanigan lacagta kuu hayee, hablaha waa lala haasaawaa oo waa loo yeedhaa, hadday ku fahmi weydana waa loo foodhyaa, haddii kalana falliidho yar yar oo dhagaxaanaa lagu tuuraa. Markaa hooyo inan soo kaxayso anaa kuu dhisayee"*.

Maalintii dambe ayuu arkay inan doox maraysa wuu u yeedhay, markay maqli weyday ayuu u foodhiyey, haddana wey maqli weydey markii dambe ayuu is yidhi waatii hooyadaa ku lahayd dhagax ku tuuree, maad dhagxaan ku tuurtid, dhagax weyn ayuu ku tuuray, inantii ceel ay ag-maraysay ayey xanuunkii ku dhacday. Ninkii nacaska ahaa markuu arkay inay ceelkii ku dhacday ayuu xaggii hooyadii u cararay, isagoo ku leh *"hooyo maanta inan baan is idhi la haasaw, markii ay i maqli weyday ayaan dhagax ku tuuray, kaddibna ceel bay ku dhacdee bal kaalay soo eeg"*.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Islaantii markiiba waxay soo qabatay orgi weyn oo geeso laallaaban leh, iyadoo dhegta jiidaysa ayey ku tidhi *"i gee ceelka inantu ku dhacday"*. Markuu dul geeyayna orgigii ay wadatay ayey ceelka ku ridday, iyadoo ku leh inaga mari.
Maalintii dambe ayuu dooxii tegay, waxa uu arkay inanta ehelkoodii oo raadinaya oo leh *"inan dhuuban oo markii noogu dambaysay dharcas xidhneyd yaa arkay?"*. Isna xaggoodii buu usoo dhaqaaqay isagoo leh *"anagaa aragney, ceel xaggan ah ayaanay ku jirtaa"*.
Markii uu ceelkii dul geeyey ayaa loo dhiibay dawliskii oo lagu yidhi *"bal ka soo-saar"*. Markii uu dawliskii ceelkii ku riday ayuu soo qabsaday geesihii orgiga, markuu soo jiiday ee uu arkay geesihii orgiga ayuu yidhi *"waar isu kaalaya inantiinnu ma geesay lahayd?"*. Yaa kuwada hadlayba *"waar wuu waalan yahee innaga keena"* ayaa la yidhi. Islaantuna sidiibay inankeedii nacaska ahaa ku badbaadisay.

Carwadii Iyo Caashaqii Wiilka

Sheekadani waxay ku dhacday wiil Soomaali ah, maalin maalmaha ka mid ah ah isaga oo hor maraya Carwo weyn oo lagu iibiyo dharka, ayaa wuxuu isha ku dhuftay gabadh horjoogta oo uu markii u maleeyay inay carwada ka masuul tahay. Wiilkii markii uu gurigii ku noqday ayuu dareemay (jacayl), isaga oo aamminsan in aragtidii gabadhii Carwada joogtay laga raacay. Muddo marki uu wiilki ahaa bukaan-jiif ee waxa hayo la-garan waayay, wadaad iyo qur'aanba lagala daalay, ayuu sheegay in uu jecel yahay gabadh joogtay carwo. Markaas ayey qasab noqotay in loo soo wado dhinicii carwada, garbaha ayaa la qabtay, si ay ergadiisu ugu dacwooto, iyaga oo badbaadinaya noloshiisa tabaalaysan.

Haddaba dadkii wiilka raacay oo ay ka go'nayd inay gabadha uu caashaqay u soo gacan geliyaan, ayay arrin lama filaan ah ku noqotay markey hor istaageen carwadii, dabadeedna arkeen gabadh quruxi ku dhammaatay oo aad loola dhacay lebbiskeeda. Laakiinse nasiib darro caag ahayd oo la sheegay inay xayaysiis u taallo goobta. Wiilkii jacaylku hayey iyo dadki kale ayaa qosol la dhacay, markaas ayuu kaga dhawaaqay meeshii inuu caafimaaday maadaama ay gabadhii caag ka noqotay, isagoo nabad qabana meeshi ka soo laabtay.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Qisooyinkii Dadkii Jacaylka Ku Caan Baxay

Qaybtan waxaynu kusoo qaadan doonnaa dhawr qiso oo xul ah sida qisooyinkii jacaylka ahaa ee Cilmi iyo Hodan, Cali-Maax iyo Cawrala iyo Qays iyo Layla.

Cilmi iyo hodan

Cilmi Boodhari waxa uu degganaa Berbera isagoo ka shaqayn jira moofo furinka lagu sameeyo, moofadaana ay qisadu ka bilaabmeyso.

1) Subax wanaagsan.

Dukaankii roodhida lagu gadi jiray ee Berbera ugu weynaa ee Cilmi uu ka shaqeyneyey, waxaa soo gashay gabadh qurux badan oo la odhan jirey Hodan Cabdille Walanwal. Sidii ay u socotey waxaa abwaan Soomaaliyeed ku sifeeyey sidan:

Markay socodka damacdee
Deggenida tallaabada
Miisaanka lagu daray
Laafyaha la daawado
Dadku waxay yiraahdaan:
"May daarin ciiddee
Indho-deeraleeyey!"

Gabadhu waxay ku tidhi Cilmi *"Subaax wanaagsan!"*. Isagoo markii horeba ka helay qaab-dhismeedka qurxoon ee uu Eebbe u uumay, ayaa haddana wuxuu ku murqaamay midabkeeda oo aad dahabi moodeysey iyo indheheeda debecsan ee ka soo jeeda wejiga dhalaalaya. Wuxuu ugu jawaabay *"aroorro suubban"*. Islaamarkaasna wuu caashaqay.

2) War Dhafoor buu Ku Yaal.

Caashaqii buu u bukay Cilmi Boodhari. *"Culays wuu i saaran yahay"* buu ku yidhi saaxiibbadiis. Markuu muddo bil ah oo uu jacaylka dhex dabbaalanayay waxaa soo batay xanuun ka dhashay rabitaan xad-dhaaf ah oo uu u qabay Hodan. Cuntadii iyo hurdadiina way ku yaraadeen. Intii uu Hodan u tegey ayaa wuxuu u sheegay in uu jecel yahay inuu guursado. Hodanna iyadoo dafirsan, si kulul bay ugu sheegtay Cilmi in aanay guurkiisa

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

u baahnayn. Muddo kaddib Cilmi wuxuu tiriyey gabaygii ugu horreeyey, isagoo ku muujiyey dhibaatadii la soo deristay:

"Nimanyahow, dharaar iyo habeen waan dhadhabayaaye
Dhulkuun baan xariiqaa siday dhiillo u timiye
Sidii qaalin dhugatoobayoo geeli laga reebay
Dhallinyaro ma raacee keligay baan dhaxanta meeraaye
Dhakhtarkaa la geeyaa qofkii dhawac weyn qaba e
Iyana waa igu dheeldheeleyaan dhamacda Daa'uude!

3) Boodhari Oo Daaweyn Loogu Dhaqaaqay.

Cilmi wuxuu ka faquuqmay bulshadii uu dhexdeeda magaca iyo maamuuska ku lahaa, wuxuuna noqday nin iska aammusan. Xilligaa geyiga Soomaaliyeed lagama aqoon jacayl, waxaana ceeb iyo foolxumo loo arkayey qofkii laga maqlo "Caashaq baa i haya". Qofkaa caynkaas ah waxaa loo haysan jirey mid uu jinni derderay. Sidaas darteed ayaa Cilmi loogu qaadey habar jinniga dadka ka buubisa oo dad badan daaweysey. Kaddib markii laga quustay ayaa waxaa loo tegey wadaaddo. Inkastoo ay aad u dedaaleen, haddana ficilkoodii iyo Quraankoodii ma noqon fal uu Cilmi ku raystay. Nin wedkii galay looma taag helo.

4) Soomaalidaa Caado Xume Iguma Caydeene!

Cilmi Boodhari isagoo aad u xanuunsanaya ayaa wuxuu tiriyey gabay uu ku eedeeyey dadkii garan waayey caashaqa wuxuu yahay:

Caashaqa haween waa horuu Caaddil soo rogaye
Sayidkii Carshiga nuuray iyo Caliba soo gaadhye
Carruurtay sideen meesha iyo Ciise Nebigiiye
Cidla' lagama beermeen dadkoo cuudi waaxidahe
Waxaa qaarba cayn looga dhigay hays cajebiyeene
Soomaalidaa caado xumee iguma caydeene
Oo ima canaanteen sidaan Cuudka iibsadaye
Kuwii ii calaacalayey baan camal tusalaynne
Sidii weelka caanaha haddii, laabta loo culayo
Caqliga yaa ka biin tuu Ilaah, ku cir-caddaadeeyay"

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

5) Gaadama-galooleey.

Cilmi iyo saaxiibbadiisii waxay ka qayb galeen xafladdii arooska ee ka dhacday Daaroole, waxayna kula kulmeen Hodan.

Alla hoobey hobaaligayeey sidirigam hoobalow heelleey
Gaadama galooleeyeey sidirigam hoobalow heelleey
Gidiggeedba Soomaaliya sidirigam hoobalow heelleey
Geyigaan ku nool ahayeey sidirigam hoobalow heelleey
Gabdhaha waad u sidataayeey sidirigam hoobalow heelleey...

Kaddib markii la wada ciyaarey oo la wada heesey ayay Cilmi suurtogal u noqotay inuu gooni ula sheekeysto Hodan. Wuxuu u sheegey inuu danaynayo inay noqdaan laba qof oo haasawe-wadaag ah, maadaama uu iyada aad u dooneyo, hablaha oo dhanna uu ka calmaday. Hodan waxay ugu jawaabtay in ay la nooshahay islaan eeddadeed ah oo aan marnaba ka aqbalayn nin iyo sheekadiisa toona. Islamarkaasna waxay dhegaha Cilmi si dadban ugu riddey inay jeceshahay in mustaqbalka guurkeedu uu talo ahaan qoyskooda ka go'o.

6) Cadceed soo baxday calaacali ma qariso.

Boodhari wuxuu yimid gurigii Hodan, isagoo u tiriyey gabay uu ku ammaanayo quruxdeeda:

"Naasahan sidii hooto waran horay u soo taagan
Dibnahaagan hiifkaba aqoon hadasan mooyaane
Gudub halacsi daymada indhahan hibada loo siiyey
Qosol hanaqa soo taabayoo caashaq hurinaaya
Ilko aan hoggoodii ka lumin kalana hoosaynnin
Sankaagaa hannaankiyo qorshaha hadiyad loo siiyey
Dhabannada hareeraha wacan wejiga halac nuuraaya
Suniyaha habkooda wacan hadal dhamayn waaye
Luquntaa habkii geri lahaa hadal wax dhaafsiiyey
Timaha hoos garbaha uga degoo sinaha haabhaabtay
Heega iyo laafyaha gacmahan hibada loo siiyey
Dhexdan aan hareeraha u fidin hore soo taagmin
Hannaan quruxsan waa taa indhuhu ka haqab beeleene!

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

8) Qalbiguu Wax Iga Yeelaya Naaska Qaawaniye.

Dhowr oday oo ay Cilmi is xigeen ayaa macsuumay odayaal dhinaca Hodan ah. Hase yeeshee markii dantii ay iska lahaayeen iska wareysteen arrinkii hanaqaad ma noqon, maxaa yeelay odayadii gabadha la weydiistay yarad ka kooban xoolo aan xerada Cilmi iyo xerada xigaalkii ku jirin bay ku xidheen. Dhowr bilood kaddib bay hablo reer Berbera ah oo aad uga xumaaday xaaladda Cilmi, waxay u soo jeediyeen inuu tan ugu qurux badan ka doorto oo iska illaawo Hodan.

Cilmina wuxuu hablihii u tiriyey gabaygan:

Haddii qurux la daawado mar uun, lagu qaboobaayo
Aniguna Qadraan soo arkiyo, qaararkii Hodane
Hayeeshee qaraan baygu galay, qalay naftaydiiye
Hablayahow halkii qoommanayd baad i qabateene
Qalbigaan bugsiinaayey baad qac iga siiseene
Bal qiyaasa waa taan qandhaday Qamarey awgiine
Qarqarrada jidhkaygiyo gacmuhu way qadh-qadhayane
Qalbiguu wax iga yeelayaa, naaska qaawaniye
Qosolka yaryari waa waxaad, nagu qaldaysaane
Inaan Eebbahay idin qatalin, qariya laabtiinna!

8) Allahayow Afkaygiyo Sidaan Aadmiga U Eedey!

Cilmi abtiyaashii iyo adeerradiiba waxay isku deyeen in ay ka leexiyaan Hodan, una doonaan gabadh kale oo fiican oo deggen Oodweyne. Hase yeeshee wuxuu raggii la talineyey ka dul mariyey gabay uu ku yidhi:

"Allahayow afkaygiyo sidaan aadmiga u eedey
Amadariyo Oodweyne way Omos badnaayeene
Aagaamo haddii loogu shubo ma engegnaateene
Abaaraa ku doogoobi la ereyo daydiiye!..

9) Hoheey Maxay Seexshey?

Gabadh ay Hodan deris ahaayeen baa waxay u sheegtay Cilmi inuu yimaaddo gurigeeda oo ay Hodan ku martiqaadday. Cilmi aad buu u farxay,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

laakiin intii uu sugeyey waqtigii uu la kulmi lahaa Hodan waa uu lulooday. Ninkii seexdaa sicii dibi dhal! Cilmi markii uu gartay wixii dhacay dhulka ayaa la wareegay. Niyad-jab baa kor iyo kal saaqay. Ciil buu cunihiisu buuxsamay. Indho buurbuuran mooyee far-dhaqaaqdaa laga waayay. Wixii maalintaa ka dambeeyey Cilmi wuxuu isu arkay nin nasiib xun oo gabadhuu calmaday hanan waayay.

Wuxuu yidhi:
Hadhka galay hurdadu way xuntee, hohey maxay seexshay
Bal inaan habaar qabo maxaa, Hodan i weydaarshay

10) Burco iyo Boodhari.
Maalin maalmaha ka mid ahayd ayay rag ka mid ahaa Cilmi qoyskiisii go'aan ku gaadheen in Cilmi laga qaado magaalada Berbera ee uu ku xanuunsaday, lana geeyo magaalada Burco si uu waabayda jacalka uga soo dawoobo. Cilmi inkastoo ka cudurdaartay safarka, haddana waa uu yeelay. Burco Cilmi waxaa ku soo dhoweeyey dhallinyaro mashiisnayd inuu dibindaabyo caasahaq oo dareenkiisa ku baahday in muddo ah dhinaca dhulka ugu hayey. Muddo kaddib Cilmi wuxuu bilaabay inuu sheekaysto oo kaftamo. Laakiin mararka uu Hodan soo xasuusto ayuu tash qabsan jirey.

11) Hilaac Baa Berbera Iiga Baxay.
Kaddib markii ay muddo sannad ah in ku dhow ku noolaa Burco ayaa waxaa la weyddiiyey Cilmi haddii uu ka raystay cudurkii jecaylka ee hayay. Isagoo su'aashaa ka jawaabeya wuxuu yidhi: *"Waxna igagama dhicin halkan oo sidaydii baan ahay. Sidii ayaan weli u bukaa, sidii baan Hodan u jeclahay!"* Gabaygii uu markaas tiriyey waxaa ka mid ahayd tixda soo socota:

Hilaac baa Berbera iiga baxay, Hodan agteediye!
Hurdadana habeenkii ma lado, had iyo waagiiyee
Sidii hoorrimaadbaa qalbigu, ii hanqanayaayee
Waxaa ley horjoogaa sidii, horadhicii geellii
Inaan heybsigeed dhigay, hadday Hodan i moodayso
Gabadh kaloon haasaawiyaa, weyga haniyaadee
Haddaan hadyad camo ugu diro, hoohidaa gubiyee
Maxaan ugu hagaagaa yartii, wey hanweyntahaye

12) Inta sabada joogta waad ugu sarraysaaye!

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Intii uu Cilmi Burco ku sugnaa ayaa maalin dhallinyaro qado sharaf u sameeyeen, waxayna weyddiiyeen nuu sifeeyo muuqaalka Hodan iyo heerka ay hadda ka joogto qalbigiisa. Cilmi intuu go'iisii shaalka ahaa madaxa hoos uga dhigay oo hagaag u fadhiistay buu gabay mariyey isagoo leh:

Ilko saqaf la moodiyo wejiga, lagu saruureeyey
Timaha madoobee subkanee, saaran garabkeeda
Indhiyo sankaa iyo afkaa, sida sabiibkeeda
Suniyaal madoobey qalbigu, saakin kaa noqoye!...

13) Dhudhumaduu I Jaray Caashaq!

Maalintii dambe ayuu Cilmi ka carraabay Burco, isagoo u soo hayaamay berbera. Markii uu yimid ayaa wuxuu ku degdegay inuu arko Hodan. Hadalkiisii wuxuu ku bilaabay salaan iyo wareysi guud, kuna xejiyey bal inay la socoto dhibaatada uu darteed u qabo iyo weliba sida ay aragto haddii ay si wadajir ah u furtaan haasaawe ay ku gaadhaan wada-noolaansho dhab ah oo labadooda dhex mara. Laakiin warkii Cilmi Hodan way la yaabtay. Intay indhaheedii waaweynaa Cilmi kor ugu fiirisey bay tidhi: *"Weligay kan oo kale ma arag. Waar maxaad sheegayso waxba ka garan maynee ninyohow maxaad u jeeddaa?"*

14) Kolkaad Hodan Tidhaahdaanba...

Waqtigaas Soomaalidu waxay caashaqaa u arkayeen wax laga fiican yahay oo mudan in laga dhowrsado. Hase yeeshee markii Cilmi la weyddiin jirey Hodan iyo halkii ay kala mareyeen waxna ma uu qarsan jirin. Gabay uu tiriyey kaddib markii uu la sheekeystay gabadhii uu jeclaa, wuxuu ku yidhi:

Sidii geel harraadoo wax badan, Hawdka miranaayay
Oo haro la soo joojiyoo, kuray u heesaayo
Oo hoobay loo qaaday iyo, hadal Walwaaleedka
Kolkaad Hodan tidhaahdaanba, waan soo hinqanayaye
Hadday hawl yaraan idinla tahay, aniga way hooge
Iyadoon xabaal laygu hamsiin, waanan ka hadhayne
Hamada been ah baa tidhi malaha, waad la huruddaaye
Haabhaabkii baan is idhi: "Haabo gacanteeda!"
Goortaan hubsaday meel cidla' ah, inaan ku hawshooday
U hayllhaylay gogogshii sidii, halablihii aare
U hammiyay sidii geesi ay, niman ka hiisheene
U hiqleeyay sidii naag la yidhi, huray dalaaqdaaye

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Waxanad haynnin ood ku hammidaa, hagarti weeyaane

Dhinaca Hodan iyadu way ka dheregsanayd Cilmi inuu dhowr goor isagoo saaxiibbadii wata sheeko iyo haasaawe ugu yimid. Xigtada Hodanna ninka gabadhooda marba gabay meel uga tirineya way ka cadhaysnaayeen oo dhaar xagaf ka siiyeen inay dilaan.

15) Saylac iyo Boodhari

Xaaladdu markay meel xun gaadhay baa odayaal soo jeediyeen, reerkiisuna isku raacay in Cilmi loo tukubiyo xaggaas iyo Saylac. Markii gaadhigii la saaray uu dhaqaaqay Cilmi wuxuu ku heesey:

Abuteeristii waa gooni maree, cishqi keenaya
Badoow waaridkii naaree serigii doo mareenaya!

Intii uu Cilmi Saylac joogay dadyow ay qaraabo ahaayeen waxay kula taliyeen inuu ka hadho jacaylkii u socon waayay, waxayna u ballan qaadeen in ay u guuriyaan gabadh allaale gabadhii kale ee uu ka doorto hablaha sokeeye iyo shisheeyaba, meeshay doonto ha joogtee. Laakiin Cilmi wuxuu sheegey in aanu Hodan ka maarmi karin, gabadh kalena aanu doonayn.

16) Cilmi Oo Dabayl La Hadlaya.

Maalin ayuu ku lugeeyey xeebta ilaa uu ka helay taag yar oo dhulka xoogaa kor uga go'an. Intii uu soo tafay buu wuxuu arkay dabaylo hayaan ah oo u socda dhinaca Berbera. Markay mid mooyee intii kale dhaaftay buu tii ugu dambeysey guddoonsaday inuu farriin gabay ah Hodan ugu soo dhiibo:

Dabaylyahay adaa duulayoon, orodka deynaynne
Adigaa dul mari meel hadday, dogobyo yaalliine
Adigaan dariiqii xun iyo, daah ku celinaynne
Adigaan darboobayn naf waa lala dalumaaye...

17) Maankaba Ka Jaray Naago Kale.

Maalin kale Cilmi waxaa lagu martiqaaday aroos si heer sare ah loo soo agaasimay. Goobtii aroosku uu ka dhacayay waxaa laga mariyey laba gabay oo mid uu tiriyey Cabdi Gahayr, middii kalana Cige Baraar. Dabadeedna ninkii la odhan jirey Ducaale wuxuu Cilmi ka codsaday inuu soo daayo gabay uu Hodantii uu jeclaaday ku ammaanayo. Cilmi wuxuu yidhi:

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Maryama Xaashii iyo tuu Gahaydh madal ka sheegaayo
Iyo mudantiduu Cige Baraar meel fog kaaga booday
Muran ma leh Ducaalow inay muunad dheer tahaye
Maankaba ka jaray naago kale muhindis-koodiiye
Hadduu Qaaddi ii meheriyoo midigta ii saaro
Ku maqsuuday oo dunidu way maalintaa qudhahe!...

18) Kolba Aniga Oo Sahashaday,
Maalintii danbe ayay Cilmi soo booqdeen dhowr dhallinyaro ah oo gabdho iyo wiilal ka kooban. Markii cabbaar la sheekeysaneyey bay gabadh intii hore aammusnayd waxay Cilmi weyddiisey bal inuu jacaylkii xanuunka badnaa ka raystay iyo in kale. Isagoo su'aashaas ka jawaabaya wuxuu yidhi:

Kolba aniga oo sahashaday oo sooriyaha aaday
Ayuun baa Siraad midab-wanaag lay sawirayaaye
Sadrigay ku daabacan tahee uma sarkhaameene
Sidii saacadii bay qalbiga iigu socotaaye
Habaynkii markaan seexdo way ila safaadaaye
Salaaddaa hore iga tagtaa Siigo noqotaaye!

19) Cilmi Iyo Warkii Xumaa,
Markii uu Cilmi in door ah ku dhex sugnaa Saylac waxaa u yimid nin ka soo socdaalay Berbera oo guddoonsiiyey warqad uu ka siday saaxiibbadii Tabbaase iyo Muuse "Carab". Waxay la socodsiiyeen Cilmi in gabadhii uu jeclaa uu nin soo dooney, waalidkeedna ay siiyeen, waxayna u soo jeediyeen inuu Hodan laabtiisa ka xorreeyo, uuna gabadh kale helo.

20) Murugadii Boodhari
Markiiba uu soo gabaggabeeyey fahamka nuxurka warkaas xun intuu fardhexada qaniinay buu cirka iyo dhulka meesha ay iska galaan ku dhaygagay. Naxdin daraaddeed bay madaxa Saani ka kacday. Dhulkii baa la dheeliyey. Wadnahaa gariiray. Cilmi habaynkaas hurdo ma ledin. Wuxuuna ahaa habeenkaasi kii ugu dhibaatada badnaa intii uu Ilaahay uumay. Subixii danbe ayuu gaadhi Berbera u jeeda gundhada jaray. Saaxiibbadii ayaa Cilmi oo aan saddex beri hurdo arag la kulmay, waxayna korkiisa ka dheehdeen dhibaatada uu warkii ay u direen u geystay.

21) Mid Kalaa La Tegey Geenyadii Maanku Ku Xidhnaaye!

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Kolkay in door ah Berbera iyo fagaarihii waaya-waayo dhex meeraysanayeen ayuu nin u sheegay in Hodan iyo ninkii soo dooney laysu meheriyey, isaguna uu falkaas goobjoog ka ahaa. Warkaas Cilmi naxdin buu beerkii la qadhqadhay. Meel uu joogo buu garan waayay. Wareer wareer kale ayuu u dhiibay. Wuxuu sameeyo ayuu garan kari waayay. Muddo kaddib buu Cilmi wuxuu tiriyey gabay uu ku yidhi:

Haddaan madal ka sheegayo oo midho ka mansoodo
Martuba waa ka dhici lahayd hablaha muxibo awgeede
Murugada calooshayda iyo muhanka laabtayda
Miyi waxaan la tegi waayey iyo madaxdii Daa'uudka
Meereysigeedii waxaan ula madoobaaday
Nin kalaa la tegay geenyadii maanku ku xidhnaaye
Dadkii baa masoobo ninkii magac lahaa eedye
Muruq kuma kaxaysane rag buu magansanaayaaye...

22) Wehelkii Murugada Iyo Tiiraanyada.

Dabadeedna Cilmi wuxuu noqday qof murugo iyo tiiraanyo weheshada, welwel iyo walbahaarna adeegsada. Fekerka iyo maahsanaantuna waxay ahaayeen kuwo uu ku caweeyo. Wareerka iyo xanuunka waxaa u dheeraa hurdo-la'aan iyo cunto-la'aan. Wxuu noqday qof xanuunsan. Si kasta oo loo dooney in la daweeyo ama lagu qanciyo inuu ka hadho Hodan iyo jacaylkeeda waa lagu guuldarraystay.

23) Gardarriyaa, Maxaan Hodan Cabdaay Kaaga Go'i Waayay?

Cilmi qaraabadiisii waxay arkeen inuu ka sii darayay. Si ay u badbaadiyaan ayaa waxay ku tashadeen in Cilmi loo guuriyo. Cilmi wuu aqbalay guddoonkii laysku wada raacay. Laakiin intii aan golihii laga kicin ayaa wuxuu tiriyey gabay uu ku yidhi:

Intaan adiga kugu gooni ahaa geed haddaan la hadlo
Ama aan gawaan qodayo may gama'sanaateene
Gaalladu ha joogtee sidaa gacal ma yeeleene
Gardarriyaa, maxaan Hodan Cabdaay kaaga go'i waayey?

24) Dabbaaldeggii Arooska Hodan Oo Dhegaha Cilmi Hafiyey,

Maalin ka mid ah kuwii Cilmi ugu dhibaatadda badnaa waxaa loo sheegay in Hodan iyo ninkii soo dooney ay is aroosayaan. Wakaas Cilmi dhayal iyo dheel-dheel buu u qaatay. Waxaa ku sii batay welwelkii iyo walaahowgii uu

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

awalba la murugsanaa, waxaana weerar ku soo qaaday tiiraanyo xanuunkeedu si daran qalbigiisa u lulay. Wuxuu wareerkii ku sii batay markii ay hugunkii iyo mashxaraddii arooska loogu dabbaaldegey iyo heesihii cayaaraha hiddaha iyo dhaqanku ay dhegihiisa si toos ah ugu soo dheceen.

25) Guurkii Cilmi iyo Faakhir

Muddo yar kaddib Cilmi Boodhari guurtidii waxay u dooneen gabadh carab ahayd oo la ohan jirey Faakhir Arooskii Cilmi waa la qalqalay, guri baa la dadbay oo la qurxiyey, xoolaa loo gawracay, dhallinyaraa u cayaartay. Carab oo cadceedda u ekayd oo qiimaheeda iyo qaayaheeda la yaabay baa aqal loogu dalaq siiyey. Hase yeeshee Cilmi kama uu reysan cudurkii hayay. Hodan mooyee hadal kale waa laga waayay. Damaciisu gabadhii oorida u noqotay waa uu dhaafay. Taasina waxay keentay in Faakhir laga furay. Wixii intaa ka dambeeyey Cilmi jirradii ayaa kuu sii batay. Hurdadii ayuu gebi'ahaanba ka haajirey, cuntadiina way ka degi weydey, hadalkiiba wuu yaraaday. Maalinba maalinta ka dambeysa wuu ka sii dareyey ilaa uu socodkii gabay.

26) Waddankeeda Soomaali Waan Sii Waddacayaaye.

Maalin ka mid ah maalmihii uu Cilmi sariirta saarnaa ayaa wuxuu ka maqlay saaxiibbadii in Hodan iyo ninkeedii ay u guureen magaalo kale. Isagoo ay tiiraanyo xoog lihi ka muuqaato ayuu soo kuududsaday oo tiriyey gabay uu ku yihi:

Walaalooyinoow, waxaan ka biqi inaan ku waashaaye
Hadda inan wareegaan damcoo webiga jiidhaaye
Wiirsiga ragga iyo waxaan ka tegi wadhida naagaaye
Waddankeeda Soomaali waan sii wadacayaaye
Wuxuu Eebbahay ii wiciyo waa' san bal aan dhowro!

27) Boodhari Oo Aakhiro U Guuray.

Nin wedkii galay looma taag helo, baa la yidhi. Cilmi ehelladiisii wax kasta oo daawo u noqon kara way isku deyeen. Meel kasta way u cid direen. Fal kasta oo daawo laga raadiyo way tijaabiyeen. Nasiibdarrase, Cilmi xaaladdiisii waxay gaadhay meel aan ka soo noqosho lahayn. Xataa in la geddiyo mooyee wuu is rogi kari waayay. Miyirkiisaa ka tegey. Naftii baa qaarka dambe ka soo xawaaraysay. Goor waagu aanu si fiican u beryin buu ka guurey adduunyadii uu toddoba iyo soddon sano ku noolaa, iyadoo u macaan ayuu jacaylku ka dhadhaadiyey.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Moofadii Cilmi Boodhari



Baradani waa bartii Cilmi iyo Hodan isku barteen, bariidadii ugu horreysay ee Hodana, Cilmi laga baabay halista, laguna bilaabay qandhadii jacaylka oo badanka iyo boggaba ka asiibtay, markii lala baacin waayeyna uu u basaasay, boholyawgii hodana bukaanjiif la noqday. Xanuunkii Cilmi kusoo booday kamuu bi'in ilaa iilka loo bud-dhigay caashaquna ula boqoolay aakhiro.

Bal aynu yar dul istaagno tixdan tiiraanyada leh ee uu Cilmi ku sheegayo caashaqa Hodan inuu godka la jiifsado mooyaanee in aanu dhayal kaga go'ayn .

Luqun madoobe awrkuba kolkuu laacdan baranaayo
Isagaa u laakima badnaa laqanka xoolahe e
Hadba qaalmo laacdan ah wuxuu luqun jibaadhaba
Lix intaanu jirin hadduu laacib ku ahaado
Lama loodin karo jeeray liicdo bowdaduye
Anna laabta kama gooynin caashaqii ladane
Luxudkaan la gelayaa sidaa igaga liil dheere

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

qays iyo leyla

Layla iyo Qays, waa sheeko jacayl ah oo ka mida sheekooyinka ugu caansan bariga dhexe. Sheekadan waxay taariikhdeedu noqneysaa ilaa qarnigii 7aad. Layla iyo Qays waa sheeko sida oo kale ku faaftay waqooyiga Afrika iyo Hindiya. Haddaba Layla iyo Qays maxay ahaayeen? sheekadoodu siday se u dhacday?

Nin la odhan jiray Majnuun (ninkii waalnaa) oo magaciisa caadiga ahi uu ahaa Qays ayaa Layla kula kulmay si kedis ah meel ay dumar xaflad ku lahaayeen dabadeed wuxuu bilaabay inuu geeliisii gawraco munaasibaddaa haweenka awgeed, haweenkan waxaa ku jirtay Layla. Layla waxay jacayl u qaadday Qays isna mid kii la mid ah ayuu u qaaday, si dhakhso ah ayuu Qays u doonay Layla in uu u geed fadhiisto oo wuu weydiisto aabbaheed. Balse nasiib darro Layla aabbaheed hore ayuu nin kale ugu ballan qaaday inuu inantiisa siinayo.

Qays arrintaasi waa u cuntami weyday wuxuuna ku adkeystay in Layla la siiyo. Halka Layla aabbeheedna ku adkeeystay in inantiisa uu nin kale ugu ballan qaaday. Qays wuxuu noqday nin jacayl qaaday laakiin inantii uu u qaaday ku hunguubay. Qays oo jacaylka Layla uu ku dheeraa ayaa ka samri waayey, dabadeed wuxuu bilaabay inuu dugaagga weheshado oo uu duurjoogta u tago.

Qays aabbihii ayaa isku deyey inuu illawsiiyo inankiisa jacaylkan haleelay, balse Qays xanuunkiisii waa ka sii daray oo wuxuu noqday nin waalan oo xiskiisii ayaa raacay Layla. Qays wuxu u tiriyey Layla gabayo badan oo uu mar ku ammaanaayo, marna ku calaacalaayo, marna uu ku muujinaayo marxaladdan cusub ee la soo deristay.

Gabayada Qays uu u tiriyey Layla waxay qayb ka noqdeen suugaanta Beershiya, iyagoo u isticmaali jiray siyaabo kala duwan waxaa la sheegaa mararka qaar inay u isticmaali jireen hees-hawleedyo. Isla marka uu Qays ku sugnaa xaaladdaas Layla waxay joogtay gurigooda oo lagu ilaalinaayey iyada oo gabayada uu tirinaayo Qays ay ka dhigeen Layla mawduuca qudha oo lagu sheekeysto iyo xanta dadka.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Layla aabbeheed wuxuu ballan ku galay inuu Qays ka ilaaliyo Layla, qiimaha ay doonto ha ugu kacdee, waxaa la sheegaa in nin la yidhaa Ebne-e salam u weydiistay Layla aabbeheed inuu siiyo. Laakiin Layla aabbeheed wuxuu ninkaa u sheegay in innantiisu weli yartahay oo uu sugo ilaa dhowr sanno si ay ugu soo korto. Qays wuxu galay nolol adag oo silic leh, sheekadii Qays waxay gaadhay nin la odhan jiray Nezamis's oo ahaa nin deeqsi ah oo sida la sheegay boqor ka ahaa dhulkii Beershiya ee hadda loo yaqaan Iiran. Ninkaas oo isku deyey inuu Qays la taliyo, laakiin markii u kala quustay waano iyo talo ayaa la sheegaa in Boqorkaa ay ka gaadhay in uu weerar ku qaado Layla reerkii ay ka dhalatay, isagoo ka doonayo reerkaas in Layla iyo Qays la isa siiyo haddii kale dhiig daadan doono.

Inkastoo oo dagaalkii dhacay oo la jebiyey Layla qabiilkoodii, haddana aabaheed wuxuu ku adkeystay in aanu marnaba Layla siin doonin Qays. Isagoo ku dooday in Qays dhulka dhigay oo burburiyey sharaftii Layla, wuxuuna odhan jiray *"dabeylkasta oo soo dhacdaa waxay sidaa magicii inanteyda"*. Isagoo sheegay in Layla oo uu Qays siiyaa uu ka dooranayo inuu dilo oo qudha ka jaro Layla.

Boqorkii wuxu ogaaday in aanu ku guuleysaneyn inuu Layla aabbeheed ku qanciyo in uu isa siiyo laammanahan isku dhibaateysan, faraha ayuuna ka qaaday arrintii Layla iyo Qays. Ninkii Layla loogu ballan qaaday ayaa doonay inuu ka faaiideyso jaaniskaa isagoo u yimid Layla aabbaheed mar labaad, balse markan si dhib yar ayaaba Layla loo siiyey. Wuxuuna Layla u kaxaystay gurigiisii. Qays markii uu maqlay in Layla nin la siiyey ayuu ka sii daray wuxuuna wehel cusub ku sii yeeshay keyntii uu markii horeba dugaagga la joogay.

Qays aabbihii wuxuu la dhintay murugadii iyo uur xumadii uu ka qaaday noloshii uu la dersay inankiisu isagoo Qays ahaa inanka keliya ee uu lahaa, uuna u jeclaa si aad ah. Qays markii uu maqlay in aabbihii hoos maray ayuu xalkiisii ka sii xumaaday intii hore, balse nin qoyani biyo iskama dhowro, isaga ayaaba tisii la il daran, wuxuuna aabbo ka sii dhigtay oo booskii aabbihii u sii buuxshay habardugaaggii uu la noolaa.

Inkastoo Layla la guursaday haddana ma ay illaawin jaceylkii Qays waxaana ku sii siyaaday jaceylkii ay Qays u haysay. Layla waxay warqad u dirtay Qays

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

iyadoo uga tacsiyadeyneysa geerida ku timid aabbihii, waxanay u sheegtay in ninkeedu ogyahay in ay Qays jeceshahay oo aanu weligeed qalbigeeda ka baxayn.

Muddo ka dib waxaaba dhimatay Qays hooyadii, Laylana waxay farriin u soo dirtay Qays iyadoo u soo dirtay nin waayeel ah una sheegay in Layla ay dooneyso in ay kulmaan.....Qays waa raacay ninkii waxaana mar labaad kulmay lammaane is jeclaaday oo dhib adduunyo muquurtay. Layla ninkii la siiyey wuxu ogaa inaanu marna qalbiga Layla ka saari karin Qays.

Balse Layla ninkii la siiyey waa xanuunsaday waana dhintay. Sida dadka dhaqanka u ahayd gabadha carmalka ah ee laga dhintaa 2 sanno ayey ahayd inay ku jirto guriga oo aanay muddadaa rag la kulmin...Layla iyada uma dulqaadan karto muddadaas dheer ee aanay Qays is arkeyn, waanay xanuunsatay waanay dhimatay.

War xumi dugsi ma fadhiistee Qays markii uu maqlay in Layla ay dhimatay oo dhulka hoos martay ayuu aad uga xumaaday wuxuuna bookhday xabaasheedii. Halkaasna waxaa ku soo af-jarmay noloshi Qays waxaana uu ka daba tegay Layla oo isna waa dhintay.
Inkasta oo sheekada jaceylka ah ee Layla iyo Qays ay adagtahay in si dhaba loo helo waayo waxay dhacday qarni aad u fog, haddana sidan ayaa ugu dhow sida maanta loo weriyey.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

cali-maax iyo cawrala

Sheekadani waxay ka mid tahay sheekooyinka jacaylka kuwa ugu waaweyn ee ka dhacay geyiga Soomaalida, aad iyo aadna u caan baxay. Cali-Maax wuxuu u dhashay gobolka Sanaag, gaar ahaan Sanaag-bari, sida Laasqoray iyo nawaaxigeeda, Cawarala Bulxan oo ah gabadhii jecaylka u qaaday Cali Maax waxay u dhalatay Gobolka Sanaag gaar ahaan dhanka galbeedka sida magaloyinka Xiis iyo Maydh oo ku yaal xeebaha ka sokeeya Laasqoray. Sheekadan waxa xiiso gaara ah u yeelay kagana duwan tahay kuwa kale; Calimaax markay gabadhu jeclaatay, wuxuu lahaa xaas iyo carruur,sidoo kale waxna ma akhriyi jirin waxna muu qori jirin.

Cawrala markii dareenka jacaylku kusoo booday isla markiiba waxay u soo dirtay warqad jacayl, taas oon hoos idin kula wadaagi doono siday u dhignayd.

Markii Cali loo keenay warqadii , oo sida la sheegay ku qornayd Af Carabi maadaama aanay wakhtigaa jirin far soomaali,dadkuna ay fariimaha qoraalka ah u adeegsan jireen luuqadaha kale sida Carabi ama Ingiriisi. Ayuu cali garan wayey waxa ku qoran iyo meel ay ka timid.

Markaa wuxuu ula tegay sodoggii oo uu gabadhiisa qabo oo yidhi *"Xaaji bal waraaqdan ii akhri"*. Markaa buu warqadda fiiriyey mise ninkan uu sodoga u yahayba gabadh baa u dhimanaysa oo jecel. markaa wuu ka xishooday in uu u sheego waxa ku qoran waraaqda. Wuxuu yidhi *"Cali wallaahi ma garanayo fartane, bal waxaad u geysaa hebel oo ah wiil uu dhalay, isagaa igaga fiican qoralkane"*. *"waayahay"* buu yidhi. Markaa weli Cali ma fahmin waxaa laysugu riix riixayo, wiilkii buu se u tegay. Wuxuu yidhi *"ii akhri waraaqdan"*. Wiilkii baa ka qaaday wuu akhriyey markaas buu arkay wixii odaygu arkay oo kale.

Wuxuu ku yidhi *"waraaqda Cid kale ma tustay?"* *"haa"* buu yidhi oo aabbahaa baan soo tusay. Isna adiguu ii kaasoo tilmaamay ee ii akhri. Markaas buu yidhi *"waxa meesha ku qoran, gabadh ku jecel baa ku soo dirtay"*. Cali Maax maalintaa wixii ka danbeeyey wuxuu go'aan ku gaadhay in aanu dib oo dabadeed qof waraaq ii akhri ku odhan, ee uu isagu akhristo. Wuxuuna bilaabay iskuul markii danbena isagaa noqday nin aqoon leh. haddaba aan sheekadii bilowno.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Jacaylka Cawrala iyo Calimaax wuxu ka bilaabmay doonni ay ka soo raaceen magaalada Cadan ee waddanka Yaman. halkaas oo uu Cali gacan caawimaad ugu fidiyey Cawrala Markii doontii ay saarnaayeen cadilantay habeen badh oo duufaaano ku kaceen. Hadaba cawrali waxay usoo qortay warqad ay ugu sheegaysay qofkay tahay iyo jacayalkeedu siduu u bilaabmay iyadoo tix iyo tiraaba isu soo raacisay, waxaanay u qornayd sidan.

Gacaliye Calimaax,

Calimaax sidii johoradeed, yaanan kuu jamane,
Jannadii sidaad tahay yaanan, jawda kugu hayne,
Dabadeed aan kala jiidannee, mar ila soo joogso.

Calimaax, waxaad iga guddoontaa salaan kalgacal oo kasha iyo laabta ka soo go'day. Waxaad kaloo iga guddoontaa mahad weyn iyo salaan uurka ka soo baxday. Intaas waxaa ii raaca inaan warqaddan qoriddeeda bilaabay saddex jeer oo haddana saddexdiiba jeexjeexay, ilaa ay ugu dambaystii iga soo go'day inaan illawba ilaw kuu soo diro, tan oo ah tii afraad oo jeexjeexiddii ka nabad gashay.

Ka maaggistaas aan ka maagayna warqaddana, waxaa iigu wacan welwel iyo walaac iyo waxaan garan waayey oo ila soo dersey ilaa maalintii aragtideennu kow isu ahayd, ee ishaydu kugu dhacday, laabtayduna ku raacday, oo ay isla mar ahaantaa nafsaddaydu ku doontay.

Haddaba, ugu horraystii waxaan jeclahay inaan iskaa xusuusiyo waa intaasoo aad i illawsantahaye, inaan ahay gabadhaad huudhiga ka soo wada raacdeen dekedda Cadmeed oo markii doonnida la soo koraayey aad gacanteeda midig ku taageertay taada midig, dabadeedna doonnida soo wada raacdeen.

Magaalada Cadmeed maalintaan, casar ka soo dhoofnay,
Waxaan ahay middaad caawintood, cudud ku taageertay,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye.

Waxaan ahay mid habeenkii kowaad oo ay doonnidu gutiraha ahayd dhegaysanaysay haasaawahaagii iyo gabayadaadii macaanaa murtidana

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

lahaa, ee adiga iyo odaygii Nuur Ciise la lahaa idin dhex maray. Khaas ahaanna dheg ulahayd xifaalayntaadii ku saabsanayd habkiyo hannaankay reer miyigu kula dhaqmaan hablahay gursadaan iyo marwooyinkey qabaan.

War cilmigiyo haasaawihii, lagu caweynaayey,
Waxaan ahay codkaad tidhi midduu, cudur geyeysiiyey,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo caashaq dhibayaaye

Habeenkii labaad ee baddu kacday oo roobkii mahiiggaanka ahaa ee onkodka, hillaaca iyo hanqadhka badnaa ee ay doonnidiina degtay, waxaan ahay tii kuu baaqday oo aad gacaan qabatay, iyadoo baaxaa degaysa dhawr jeerna hafatay.

Baddoo caratay mayeygaad ogayd, calool xumaantiisa,
Waxaan ahay cadraddaad siddoo, calaf u laabnaa ye,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye,

Waxaan ahay mid abaal iyo mahad weyn oo aan la koobi karayn uurka iyo laabta kuugu haysa, biimahaad ka badbaadisay adoo dusha ku sidey muddo aan toddoba iyo toban saacadood ka yarayn, aanad ka daalin sidniinkeedii ilaa aad berriga nabadgeliyo keentay. Inkastoo libaaxi badeed iyo bahalaha kale ee badda kuu nooliba ina sigeen dhowr jeer.

Waxaan ahay cirkoo horay, iyo caadka oo kale'e,
Waxaan ahay casaan raaca iyo, midab casaawiira,
Waxaan ahay canabkii ka baxay, Calihi doognaaye,
Waxaan ahay car foon iyo udgoon, iyo cadarki Baariye,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye.

Waxaan ahay haddi runtii lagu arooro, Cawrala Barre oo ah middaan sheegay oo isheeda iyo laabteeduba ku raaceen aragtideedii u horraysey, oo aad shaki la'aan nafteeda iyo ruuxeeda leedahay, aadanse adigu ogeyn iyaduse had iyo jeer, habeen iyo dharaar, hurdiyo soojeed kugu hammiyeysa oo jacaylkaaga iyo kalgacalkaaga oo jiidhka iyo lafaha galay aawadood, oon iyo anfaco diiddey.
Waxaan ahay midaan cunin cuntada, calafka sooreede,
Waxaan ahay mid cadanyootayoo, cidihi dayrsheene,
Waxaan ahay mid caynkaaga iyo, caaqil mehershaa ye,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Ugu dambaystii waxaan ku soo gabagabaynayaa warqaaddaydan oo intaas ii weheliya Calimaaxow, dayax buuxa nuurkiisa lahaayow, mangalool uduggiisa lahaayow, waqayga Caleed iyo waadhida Hawdow, waago beryaaya wajiigiisa lahaayow, mayey hooray hanqarkiisa iyo hillaaciisa sansaanshow, balanbalkoo dildillaaciyo midadbka balanbaalista lahaayow, markii aan saxariray saacii i qabtow. Soomaaliyi quruxdeeda sinji bay ula lahayde sunnaari la moodyow, sed bursiimo lahaayow, inaanad marnaba arrinkan aan kuu soo qoray yaraysan, ee aad si degdeg ah war iigu soo celisaa ama aad i soo gaadhaa aan aniguna raaxada adduun maqsuude adiguna aad muudsatee macaankii iyo roonaantii ay murwo u roonaan jirtey mudanaheeda.

Casarkii haddaan weel la culay, caano kugu siiyo,
Cishihii haddaan sarar cusbaale, kugu cashaysiiyo,
Oo waa caafimaad rage haddaan, cagaha kuu duu go,
Asaadan caloosha igu hayn, Caliyow yeelkaaye.

Waxaa iga dardaaran ah, haddaanan war buuxa ciyeen kaa helin inaad adigu wixii kalgacalkaagu i gaadhsiiyo masuul ka tahaye bal ogow.

Ogoobey haddaan dayaxu jirin, dirir ma nuureene,
Ogoobey haddaan daaqu bixin, duunyo ma foofteene,
Ogoobey haadday diiddo, waan degel baxaayaaye,
Oo hal iga dardaarana Calow, debinta maan saaro,
War diifta aan qabo hadday, digasho ii raacdo,
Waynoo daartii aakhiro, iyadaan cidina deyneyne.

"Waa gacaladaa Cawrala Barre, ee deggan
magaalada Xiis Xarrago"

Gabaygii oo dhammi waa kan sheekada waraaqda waxaa ku jir jira sadarro ay ku soo hal qabsatay ee isagoo dhan waa kan:
Calimaax sidii johoradeed, yaanan kuu jamane,
Jannadii sidaad tahay, yaanan jawda kugu hayne,
Dabadeed aan kala jiidannee, mar ila soo joogso.

Magaalada Cadmeed maalintaan, casar ka soo dhoofnay,
Waxaan ahay middaad caawintood, cudud ku taageertay,
Waxaan ahay mid kuu cabatayo,. caashiaq dhibayaaye.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

War cilmigiyo haasaawihii, lagu caweynaayey,
Waxaan ahay codkaad tidhi midduu, cudur geyeysiiyey,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo caashaq dhibayaaye

Baddoo caratay mayeygaad ogayd, calool xumaantiisa,
Waxaan ahay cadraddaad siddoo, calaf u laabnaaye,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo caashaq dhibayaaye,

Waxaan ahay cirkoo hooray, iyo caadka oo kale?e,
Waxaan ahay casaan raaca iyo, midab casaawiira,
Waxaan ahay canabkii ka baxay, Calihi doognaaye,

Waxaan ahay carfoon iyo udgoon, iyo cadarki Baariise,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye.
Waxaan ahay mid aan cunin cuntada, calafka sooreede,

Waxaan ahay mid cadanyootayoo, cidihi dayrsheene,
Waxaan ahay mid caynkaaga iyo, caaqil mehershaaye,
Casarkii haddaan weel la culay, caano kugu siiyo,

Cishihii haddaan sarar cusba leh, kugu cashaysiiyo,
Oo waa caafimaad rage haddaan, cagaha kuu duu go,
Asaadan caloosha igu hayn, Caligaan calmadow yeelkaaye.

Ogoobey haddaan dayaxu jirin, dirir ma nuureene,
Ogoobey haddaan daaqu bixin, duunyo ma foofteene,
Ogoobey haddaad diiddo waan, degel baxaayaaye,

Oo hal iga dardaarana Caliyoow, debinta maan saaro,
War diifta aan qabo hadday, digasho ii raacdo,
Waynoo daartii aakhiro, iyadaan cidina deyneyne.
Markey Doonta Saarnaayeen

Intay doonta saaraayeen ayaa Cawrali dumar la fadhiyey uga sheekaysay jacayl, waxayna ku dhexdaraysay Calimaax , markay dhulka yimaadeen ayaa saaxiibbadeed iyo Cawrali sheekaysteen, in mudda ah markay sheekaysanayeen ayaa saaxiibbadeed dareentay in Cawrala jacayl hayo.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Markaas ayey waydiisay *"Cawralaay ma jacaylkaad ka sheekaynaysay markaan doonidu ku jirnay ayaa ku haya?"*

Cawrali waxay ku jawaabtay:

Baxsanay habeennadan indha baal ma saarinoo,
Duni baadi weeyoo bilisina illowshaha,
Waa u beer nugayloo ba'a iyo baraaraha,
Baraarahay xuseeyaan anse baal ka marayoo,
Biimahaad ogayd iyo cirkoo biriq hillaaciyo,
Bartii roobka duufaan biyihii shubmaayiyo,
Dakhalkii bacramay baan baayeey ku selelaa,

Bisin Alla bir weeyaan sow bilow ma taabinoo,
Eebbe ima ballaysiin anoo baaxa degayoo
Bes ah oo hafanayoo bixi layd naftaydii,
Baaqaan hayeeey iri sow Cali-badmaaxoo,
Baari iima qabanoo, Berrigii imuu gayn
Naftaan qaaddir bixinayn,
Ogow wey badbaaddaa

Waa baab jacayloo baarax uma ledaayoo
Baddaasaad arkaysoo buuraha la moodoo,
Badraankii libaax iyo hambabarada booddiyo,
Bahaluku ka buuxaan way bila dayahoo
Buruudkii Badmaaxiyo nuur layga biliyaa,
Waa boog jacayloo bukaankii la yaab ma leh,
Beerkiyo wadnaha iyo boggu hoy ku leeyahay,

Waa baab jacayloo Billaawihii afaystoo,
Bedenkayga degayoo igu beeray boholyow,
Waa baab jacayloo waxa ii bogsiina ah
Ama ii bushaara ah oo ii baraara ah,
Ama ii barwaaqa ah baanashada haweenoo,
Badmaax-aan hantaayoo berri aannu kulanoo,
Beryasamo ku waarraa!!.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Gabayaddii Ay Isu Tiriyeen Nimankii Doonta Saarnaa,

Reer magaalku wuxuu yidhi oo Calimaax ah

Wallee daacuflow reer miyaan, docna garanaynin,
Dab la shiday aroortii hadduu, daamanka is dhaafsho,
Doqonniimo waa wuxuu cadkiis, doc uga muujaaye,

Haddii doog Ilaah shubo, oo duni barwaaqowdo,
Oo dobobi caanaha riyaha, looga dalaf siiyo,
Oo rodol uu doondoon ku helay, uga danbaysiiyo,

Isagiyo duqdiisii markaas, dawlad la is moodye,
Damdamtiyo hangoolkii ma jiroo, diriri maayaane,
Maantaas ninkii dan u lahow, deyso hada1kaaga.

Reer miyigiina wuxuu ku waabay:

Dunnunucaay kolkuu qahwaha, debinta saaraayo,
Duuf lulaaye goortuu kaalluun, labada daan buuxsho,
Dayn qaate meeshii nin ragi, debec ka maalaayo,

Duryan xume markuu deego buu, dunida hiifaaye
Diintiyo wuxuu caayayaa, daayin ilaahiise,
Dacwad aan la garanayn iyo, dafashya baas sheegte,

Dood iyo dagaal baa nin raga, lagu daryeelaaye,
Deeqdana haddii loogu ladho derejo wee yaan,
Wax dawddara magaaliyo ninkii degelkeed waa jooga.

Gabaygan waxay Cawrala tirisay markii aabbaheed yidhi waxaan ku siiyey nin xoolo iyo maal badan leh.....

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Cawrala waxay tidhi sidan:

Maalqabeenka geeliisa ramad, madar ku maalaaya,
Oo muluggii adduunyada qaboo, midigta loo saaray,
Nim micnaha dumar yaqaan, yey maskaba dhaama,

Magalooti jaahila, oo haddana madax taagaaya,
Oo haddii muran idin dhex maro, meel ku jebinaaya,
Ninki biri magaydada yaqaan, yey maskabi dhaama,

Maangaab aan aqoon iyo lahayn, madadka haasaawe,
Oo mugdi ha been guđahayoo, marin habaabaaya,
Oo aan maraaciga haween, iyo muxibadood haynnin,

Oo aan milgiyo maansa gabay, mira ka sheegaynin,
Oo siđa Cali waa maahire, mayey u horraynin,
Inaan meel cidla ah weey tamaa, yey maskabi dhaanta,

Muudal weeye iyo nimaan, muqdarba ahayne,
Oo magligiyo hangoolayntu, waa meheraddiisiiye,
Waa wixii makalay wiiladay, milaygii dayreede,

Murwana daryeelkeedu, waa xil iyo maamuuse,
Mar hadduu man facii hunguri, mee i oranaayo,
Inaan meerto guumays noqdaa, yey maskabi dhaanta,

Malabkiyo macaankiyo wixii, miid iyo maaheera,
Maantadaas haddi lay wacoo, la i mihiibsiiyo,
Maalaydaa dacartoon rabaa, yey maskabi dhaante,

Aabbow maqaan iyo waxaad moogtahaa badane,
Oo intaasoo masalooyinaan, maragsanaayaaye,
Haygu meherin aabbow, nimaanan muxibbadiishaynin,

Haygu mehenin aabbow, nimaanan muxibbadiis haynin,
Hay gu meherin aabbow, nimaanan muxibbadiis haynin,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Gabaygan waa gabaygii uu tireyey Cali-maax markii loo soo sheegay in Cawrala dhimatay isagoo la hadlaya faraskiisii.

Calimaax wuxuu yidhi..

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go'dee,
Xamarow xakama diidow, xan far duulay la mood yow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go'dee,
Xamarow xakama diidow, xan far duulay la mood yow,
Xawaaree orordkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Xaq laygu lahaa, iyo xus baan dhigayaa ye,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go'dee,
Xamarow xakama diidow, xan far duulay la moodyow,
Xawaaree orordkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Qalbigay xanafoonoo, xummad bey derdertee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go?dee,
Xamarow xakama diidow, xan far duulay la mood yow,
Xawaaree orordkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Xabadkaa i dakaamoo, waan xabeebsanahee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

In kastoo la xiddeeyo, aroos loo xaradheeyey,
In kas too xoola badnaa iyo, xariir loogu hagoogey,
Xirrib tii indhaygiyo, xubnahaygay ahayde,
War xiskii i dhinaayo, Xadeed weyn ku habaabee,
Xamarow xakama diidow, xan far duulay la mood yaw,
Xawaaree orordkaagoo, Ximan jee fag ku dhaafoo,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa I gee,
Waan xawaal dhigayaaye. caawa Xiisa i gee,

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Meel xun bay ku dhammaatay, waxaan se rejaynayaa in ay jacayllada kale ee Soomaalida ka dhacaa ay meel fiican ku dhammaadan oo sheekadan iyo kuwii ka horreyeyba ay u noqdan tusaale sida Cilmi-Boodhari, Cali-Maax iyo gabadhay jacaylka wada galeenba.

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

TIXRAAC iyo Xigasho:

Anigoo ixtiraamaya ilaalinayana xeerka u yaalla bahweynta qalinleyda kana dhawrsanaya in buuggani ku suntanaado xatooyo iyo sheegasho waxaanu lahayn oo qof kale wakhti iyo maskaxba u huray.

Markaa waxaan iskudayey inaan buuggan maskaxdayda iyo maankayga ku meel mariyo, kuna maareeyo, haddana waxaa jira waxyaabo ma dhaafaan ah buuggana aan uga maarmi waayey, horena waxaa loo yidhi"*caqliga inta kaa maqani waxay ku jiraa walaalkaa*", nin hooyo dhashayna hal ma seegi waayo, maadaama jacaylkuna yahay wax qof waliba ka faalloodo oo bad ah.

Haddaba maqaalladaa faraha badan ee laga qoray jacaylka ayaan kasoo qaatay qaar ka mid ah oo ay aniga ila noqotay in buuggani aanu ka fursan Karin, udub dhexaadna ay u noqon karaan anigoo u tix galinaya una qiraya dhammaan qorayaashii ku fara yaraysay halkana ku xusi doona Insha Allaahu.

Shaqsiyaadka, buuggaagta iyo mareegaha (websites) aan wax kasoo xigtay waxaa ka mid ah:

1) ***Buugga Raaxada Guurka,*** **oon kasoo xigtay qayb ka mid ah gacal doorashada**
2) ***Weriyaha.com,*** **oo aan kasoo qaatay maahmaahyada jacaylka**
3) **Buugga *aqoon darro* waa u nacab jacaylka oo uu qoray *Faarax Max'ed Jama* oon kasoo xigtay sheekadi cali-maax iyo cawrala**
4) **Buugga *Al-Dawaa* oo uu qoray caalimka weyn ee *Ibnu Qayim* oo aan kasoo qaatay qaar ka mid ah hadallo laga soo wariyey dadkii saalixiinta ahaa**
5) ***Daalonews.com*** **oo maqaal ay qortay oo la yidhaa ma ogeyiyee jacayl waa maxay aan kasoo xigtay qayb ku jirta oo la yidhaa kimistariga iyo dareenka jacaylka**
6) ***Xamse Ismaaciil Aadan*** **oo aan kasoo xigtay maqaal uu qoray oo ka hadlaya sida warqad jacayl ah loo qoro**
7) ***Maxamed A. Cabdi*** **:- oo isna qoray qoraal uu dadka ugu gaalaa bixinaya maalinta jacaylka adduunka buuggana aan kusoo qaatay**
8) ***Ibraahin Maxamed-Deeq Ciise*** **oo qoray sheekadii dhex martay Cilmi iyo Hodan .**
9) ***Axmed Faarax Cali (Idaajaa)*** **oo isna barnaamijka hiddaha iyo dhaqanka (suugaanta iyo jacaylka} ee ka baxa VOA aan wax kasoo qaatay**

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

10) *Abwaan Yuusuf Shaacir* oo isna marka uu ka sheekaynayo sheekadii Cambaro iyo Hurre oo uu hordhaca kaga hadlayo waagii hore iyo ciyaaraha ayaan iyana buuggan wax kaga soo daray

11) *Buugga Ogeysiis Jacayl* oo aan isna kasoo qaatay dhawr ka mida hal-ku-dhigyada ku qoran.

Allaa Mahad Leh..

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

Weedh Celinta Akhristayaasha

(1) Sideed u aragtay habka buugga loo qoray

Sax.....% khalad.....%

(2)-habka buuggan layskugu dubariday ma yahay mid aad u bogtay oo ku qanciyey

Haa.....maya.....

(3) Markaad akhriday buugga wax god daloolooyin ah ma ku aragtay.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

(4) Buuggani wax ma kugu soo kordhiyey oo ma ka faa'iidday mise waxba kamaad

faa'idin.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

(5) magaca buuggani xambaarsan yahay iyo waxa gudhiisa ku qoraani ma yihiin kuwo isu dheeli tiran

Haa.....maya.....

(6) maxaa ku cajab galiyey eed buuggan ku aragtay ,sheeg dhawr ka mida.....

.....

.....

.....

.....

.....

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

(7) Ma jiraan wax si gaara noloshaada saamayn ugu yeeshay oo uu xambaarsan yahay buuggan hadyad jacayl
Haa.....maya.....

(8) Ugu dambayn maxaad si gaara ugu soo jeedin lahayd qoraaga ama abwaanka diyaariyey buuggan.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Fadlan kusoo hagaaji aragtidaada ciwaankan

sumcada@gmail.com

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS

DHAMMAAD

Telegram: @Suhayb34 @SOMALIBOOKS